Ohio, 2024



# Ku soo dhawoow bulshada

UnitedHealthcare Community Plan ayaa adeegyo daryeel caafimaad siiso deggenayaasha Ohio ee u qalma dheefaha Medicaid ee Waayeelnimada, Indhoolenimada ama Naafanimada, Qoysaska iyo Carruurta Daboolan (oo ay ku jiraan Healthy Start iyo Healthy Families), iyo u-fidinta dheefaha Medicaid dadka muddakarka ah.

UnitedHealthcare Community Plan

CSOH24MD0161983_000

# Soo dhawoow

Ku soo dhowoow Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan. Adigu waxaad hadda tahay xubin ka tirsan qorshaha daryeelka caafimaadka, ee sidoo kale loo yaqaan qorshaha daryeelka la maareeyo ee shirkadda (MCO). UnitedHealthcare Community Plan waxay siisaa adeegyada daryeelka caafimaadka dadka deggan Ohio ee u qalma, oo ay ku jiraan shaqsiyaadka daqliga hooseeyo, shaqsiyaadka uurka leh, dhallaanka, iyo carruurta, dadka qaangaarka ah, iyo shaqsiyaadka qaba naafanimada. Xubin ahaan, waxaad hadda u qalantaa dheefo aad ku faraxdo oo lacag la'aan kuu ah adiga, ayna ka mid yihiin la'aanta lacagta caymiska. Intaa waxa u dheer, waxaan leenahay barnaamijyada maareynta daryeelka iyo cudurka oo loogu talagalay cudurada sida neefta iyo sonkorowga iyo Barnaamijka Uurka ee Healthy First Steps™.

Fadlan qaado dhowr daqiiqado si aad dib ugu eegtid Buug-gacmeedkan Xubinta. Waxaan diyaar u nahay inaan ka jawaabno su'aalo kasta oo aad qabto. Waxaad jawaabaha su'aalaha inta badan ka heli kartaa halkaan **myuhc.com/CommunityPlan**. Kasoo wac Adeegyada Xubinta **1-800-895-2017**, TTY **711**, 7:00 subaxnimo illaa 7:00 fiidnimo, Isniin ilaa Jimce.

Warbixinta lagu sheegay buugan waxaa loogu talagalay in ay u shaqayso sida hage warbixin degdeg ah laga tixraacayo.

UnitedHealthcare Community Plan

# Bilowga

Waxaan rabnaa inaad adigu isla markiiba aad uga faa'idaysato qorshahaaga caafimaad. Ku bilow saddexdan tallaabo ee fudud:

1. **Wac Daryeel Bixiyahaaga Asaasiga ah (Primary Care Provider, PCP) oo qabso ballan baaritaan.** Baaritaanka joogtada ah ayaa muhiim u ah caafimaad wanaagsan. Telefoon lambarka Daryeel Bixiyahaaga Asaasiga ah (Primary Care Provider, PCP) ayaa ay tahay inuu ku qornaado kaarkaaga aqoonsiga ee xubinimada ee aad dhawaan ku heshay boostada. Haddii aadan aqoonin lambarka PCP-gaaga, ama aad jeclaan lahayd in lagaa caawiyo qabsashada ballanta baaritaanka, ka soo wac Adeegyada Xubinta halkaan **1-800-895-2017**, TTY **711**. Waxaan halkan u joogaa inaan ku caawino.
2. **Qaado Qiimeynta Caafimaadkaaga.** Tani waa qaab gaaban oona fudud oo lagu fahmayo qaab-nololeedkaaga iyo caafimaadkaaga haatan. Tani waxay naga caawinaysaa inaan adiga kugu aaddinno faa'iidooyinka iyo adeegyada aad heli karto. Booqo **myuhc.com/CommunityPlan** si aad u buuxiso qiimeynta Caafimaadka maantaba. Sidoo kale, dhawaan ayaan ku soo wici doonaa si aan kuugu soo dhaweyno UnitedHealthcare Community Plan. Inta lagu jiro wicitaankan, waxaanu kuu sharixi karnaa faa'iidooyinka qorshahaaga caafimaad. Waxa kale oo aanu kaa caawin karnaa ku buuxinta Qiimaynta Caafimaadka telefoonka.
3. **Faham Qorshahaaga Caafimaad.** Ku billow qaybta Guudmarka Qorshaha Caafimaadka ee ku taal bogga 8-aad si aad si dhakhso ah dulmar guud ugu sameyso qorshahaaga cusub. Hubi inuu buugyarahani kaa ag-dhawaado, sii aad tixraac ku sameeyso mustaqbalka.

## Adeegyada Xubinta 1-800-895-2017, TTY: 711)

7:00 subaxnimo–7:00 fiidnimo., Isniinta–Jimcaha

**Xafiiskayagu wuu xiran yahay maalmahan fasaxa:**

- Maalinta Sannadka Cusub
- Maalinta Martin Luther king jr.
- Maalin Xasuuseedka
- Maalinta Xornimada
- Maalinta Shaqaalaha
- Maalinta Mahad-naqa
- Maalinta Ka Dambeeysa Maalinta Mahad-naqa
- Maalinta Kirismaska

# Tusmada

**Soo dhoweyn** . . . . . . . . . . **2**

**Dulmarka qorshaha caafimaadka** . . . . . . . . . . **8**

Kaarka Aqoonsiga ee Xubinta . . . . . . . . . . 8

Qooraansiga faa'iidooyinka . . . . . . . . . . 9

Qiimeynta Caafimaadkaaga . . . . . . . . . . 10

Taageerida xubinta . . . . . . . . . . 11

Waxaad bilaabi kartaa isticmaalka faa'iidooynikaaga farmashiyaha isla markaba . . . . . . . . . . 13

**U tagidda dhakhtarka** . . . . . . . . . . **15**

Bixiyaha Daryeelkaaga Aasaasiga ah (Primary Care Provider, PCP) . . . . . . . . . . 15

Baaritaannada sannadlaha ah . . . . . . . . . . 17

Ballan ka qabsashada PCP-gaaga . . . . . . . . . . 18

U diyaargarowga ballanta PCP-aaga . . . . . . . . . . 19

Adeegyada NurseLine – Isha Macluumaadka Caafimaadkaaga ee 24-ka saac furan . . . . . . . . . . 19

Haddii aad u baahan tahay daryeel oo xafiiska dhakhtarkaagu xiran yahay . . . . . . . . . . 20

Daryeelka caafimaadka markaad ka fog tahay hoygaaga . . . . . . . . . . 21

Hoyga caafimaad . . . . . . . . . . 21

Adeegyada iskaa-u-imaadka ah . . . . . . . . . . 22

Faa'iidada dheeraadka ah ee loogu talagalay xubnaha dadweynaha ee Adult Extension . . . . . . . . . . 23

Helitaanka fikrad labaad . . . . . . . . . . 24

Oggolaanshooyinka hore . . . . . . . . . . 24

Daryeelka sii soconayo haddii u PCP-gaagu ka baxo shabakadda . . . . . . . . . . 24

Adeegyada gaadiidka – Aan gurmadka ahayn . . . . . . . . . . 25

**Isbitaallada iyo gurmadyada degdegga ah** . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . **26**
Daryeelka Degdegga ah . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 26
Adeegyada isbitaalka . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 26
Daryeelka ilkaha ee degdegga ah . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 27
Adeegyada caafimaad ahaan laga maarmaanka ah . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 27
Caymiska caafimaadka kama jiro meelaha ka baxsan Maraykanka . . . . . . . . . . . . . . . . . . 28

**Buug-gacmeedka Xubinta ee Waaxda Medicaid ee Ohio** . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . **30**
Soo dhoweynta laga helo gobolka Ohio . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 30
Buug-gacmeedka Xubinta ee Waaxda Medicaid ee Ohio . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 32
Kaararka aqoonsiga (ID) . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 33
Macluumaadka xubinta cusub . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 34
Daawooyinka dhakhtarku qoro . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 35
Adeegyada aan ku caynsanayn qorshaha UnitedHealthcare Community Plan . . . . . . . . . . . 35
Adeegyada aan hoos imaan qorshaha UnitedHealthcare Community Plan inay caafimaad ahaan lagama maarmaan yihiin mooyee . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 36
Adeegyada maareynta daryeelka . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 36
Adeegyada Xubinta . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 37
Adeegyada caafimaadka hab-dhaqanka, adeegyada caafimaadka maskaxda iyo adeegyada daaweynta cilladaha isticmaalka maandooriyaha . . . . . . . . . . . . 38
OhioRISE . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 39
Barnaamijka adeegyada la iskuduwo . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 40
Baaritaanka iyo talaalka COVID . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 41
Baaritaanka hubinta caafimaadka . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 41
Doorashada Daryeel Bixiyaha Aasaasiga ah (Primary Care Provider, PCP) . . . . . . . . . . . . . 43
Beddelida PCP-gaaga . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 43
Adeegyada caafimaadka ee lagu bixiyo khadka (Telehealth) . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 44
Xuquuqdaada xubinimada . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . . 44

Sida aad ugu sheegi karto qorshaha UnitedHealthcare Community Plan haddii aadan ku qanacsanayn ama aadan oggolayn go’aan annagu aan gaadhnay – Racfaannada iyo cabashooyinka . . . 47

Foomka cabashada iyo racfaanka . . . 49

Dacwad-dhageysiyada Gobolka . . . 51

Dib usoo kabashada hantida . . . 52

Adeegyada Xaaladaha Deg-Degga ah . . . 52

Dhaawaca ama jirrada shil ahaan ku yimid (kharash-soo-ceshiga) . . . 53

Caymiska caafimaad ee kale (Isuduwidda Dheefaha – COB) . . . 54

Ogeysiiska luminta caymiska (Shahaadada caymiska la aamini karo) . . . 54

Waayitaanka u-qalmitaanka Medicaid . . . 54

Dib-u-cusboonaysiinta tooska ah ee xubinnimada MCP . . . 54

Joojinta Xubin Ka Ahaanshaha Qorshaha Daryeelka Maareysan (MCP . . . 55

**Jadwalka adeegyada Medicaid . . . 59**

Adeegyada uu daboolo qorshaha UnitedHealthcare Community Plan . . . 59

**Dheefaha dheeraadka ah ee UnitedHealthcare . . . 66**

Dheefaha dheeraadka ah . . . 66

**Faahfaahinada kale ee qorshaha . . . 72**

Helitaanka bixiye ku jira shabakada . . . 72

Diiwaanka Bixiyaha . . . 72

Haddii biilka adeegyada laguugu soo dallaco . . . 73

Dardaaranka Horudhaca ah . . . 73

Xatooyada iyo xadgudubka . . . 75

Ra'yigaaga waa muhiim . . . 76

Maareynta isticmaalka . . . 77

Barnaamijka tayada . . . 77

Ka badqabka iyo ka ilaalinta takoorka . . . 78

Tilmaamaha habdhaqanka caafimaad iyo tiknoolojiyadda cusub . . . 78

Mas’uuliyadahaaga Xubbinimada . . . 79
Daryeel iyo ereybixin maareeysan . . . 80
Ogeysiisyada Qorshaha Caafimaadka ee Habdhaqannada Asturnaanta . . . 86

**Lifaaqa . . . 94**
Ohio Maamulaha farmashiye faiidadisa hal ah (SPBM) . . . 94
1. Waxa kujira Buug-gacmeed ka . . . 94
1.1 Aqoonsiga shirkadda . . . 94
1.2 Adeegyada laheli karo . . . 94
1.2.1 Liis daroogooyinka la doorbidi karo . . . 95
1.2.2 Ogalaanshooyinkii hore . . . 95
1.2.3 Xeeladaha Maaraynta Isticmaalka ee Farmashiyaha . . . 96
1.2.4 Adeegyaada laga saaray . . . 97
1.2.5 Adeegyo dheeri ah . . . 97
1.3 Codsi ku aadan racfaanyada, cabashooyinka, ama dhageysida gobolka . . . 97
1.4 Bedelo talooyinka . . . 100
1.5 Isticmaalka farmashiyaha . . . 100
1.6 Daawada bukaan-socodka degdega ah . . . 100
1.7 Hadal aan takoor lahayn . . . 100
1.8 Shabakada bixinta wararka . . . 101
1.9 Shabakada bixiyaha iyo farmashiyaha . . . 101

# Guudmarka qorshaha caafimaadka

## Kaarka aqoonsiga ee xubinta




**Ma kaa lumay kaarkaagii aqoonsiga xubinta?**

Haddii adiga ama qof qoyskaaga ka mid ah ka lumio kaarka, waxaad mid cusub ka daabacan kartaa barta **myuhc.com/CommunityPlan**. Ama ka soo wac Adeegyada Xubinta telefoonka **1-800-895-2017**, TTY **711**.

# Qooraansiga faa'iidooyinka

Xubin markaad ka tahay UnitedHealthcare Community Plan, waxaad leedahay faa'iidooyin iyo adeegyo kala duwan oo daryeel caafimaad ah oo aad heli karto. Waa tan guudmar kooban. Waxaad ka heli doontaa liiska dhammaystiran qeybta Faa'iidooyinka.

**Adeegyada Daryeelka Aasaasiga ah**

Waxaad ku caynsan tahay dhammaan booqashooyinka Daryeel Bixiyahaaga Asaasiga ah (Primary Care Provider, PCP). PCP-gaaga waa dhakhtarka ugu muhiimsan ee aad u arki doonto inta ugu badan daryeelkaaga caafimaad. Tani waxa ka mid ah baaritaannada, ka dawaynta durayga iyo hargabka, walaacyada caafimaadka iyo baaritaanka caafimaadka.

**Shabakada weyn ee bixiyaha**

Waxaad PCP ka dooran kartaa shabakaddayada ballaaran ee bixiyeyaasha. Shabakaddayada ayaa sidoo kale waxa ka mid ah takhasuseyaal, isbitaallo, iyo dukaammada dawada — taas oo kuu siinaysa fursado badan daryeelka caafimaadkaaga. Ka hel liiska bixiyeyaasha shabakadda oo dhammaystiran barta **myuhc.com/CommunityPlan** ama soo wac **1-800-895-2017**, TTY **711**.

**NurseLine**

NurseLine ayaa marin telefoon kuu siisa kalkaaliyaal caafimaad oo sharciyaysan khibradna leh 24/7. Waxay kaa siin karaanmacluumaad, taageero iyo waxbarasho wixii su'aal ama walaac kasta oo caafimaadka la xiriirta. Wac **1-800-542-8630**, TTY **1-800-855-2880**.

**Adeegyada dhakhaatiirta takhasuska leh**

Caymiskaaga waxa ka mid ah adeegyada takhasuslayaasha. Takhasuslayaasha ayaa ah dhakhaatiir ama kalkaaliyeyaal heer sare loogu tababbaray inay daweeyaan cudurada qaarkood. Waxa laga yaabaa inaad u baahato inuu PCP-gaagaku soo gudbiyo marka hore. Eeg bogga 15-aad ee buug-gacmeedka.

**Dawooyinka**

Qorshahaaga ayaa leh caymiska dawooyinka la qoro oo aan lahayn la-bixiska oo loogu talagalay xubnaha da' kasta oo yihiin. Waxa kale oo caynsan: insulinta, irbadaha iyo sirinjiyada, xakamaynta dhalmada, asbiriita dahaarka leh ee tufka loo qaato, kiniinka dhiiga iyo fitamiinnada la calaashado.

**Adeegyada isbitaalka**

Waxaad u caynsan tahay seexashada cisbitaalka iyo adeegyada bukaan-socodka (adeegyada aad ka hesho isbitaalka iyada oo aan habeenka lagu seexin).

**Adeegyada sheybaarka**

Adeegyada caynsan waxa ka mid ah baaritaanada iyo rajada kaa caawin kara ogaanshaha sababta xanuunka keentay.

### Booqashooyinka caafimaad-qabka ilmaha

Dhammaan booqashooyinka caafimaad-qabka Ilmaha iyo tallaalada waxaa daboolaya qorshahaaga.

### Daryeelka ummusha iyo uurka

Waxaad u caysan tahay booqashooyinka dhakhtarka ee ah kahor iyo ka dib dhalshada ilmahaagu. Taas waxa ka mid ah isbitaal ku jiritaanka. Haddii loo baahdo, waxaan sidoo kale cayminaa booqashooyinka guriga ka dib markuu ilmuhu dhasho.

### Qorsheynta qoyska

Waxaad u caysan tahay adeegyada kaa caawinaya maaraynata waqtiyaynta uurka. Kuwani waxa ka mid ah sheyada iyo habraacyada xakamaynta uurka.

### Daryeelka aragga

Faa'iidooyinkaaga aragga waxa ka mid ah baaritaannada indhaha ee caadiga ah iyo muraayadaha indhaha. Eeg bogga 65-aad.

### Daryeelka ilkaha

Faa'iidooyinkaaga ilkaha waxaa caymiyay UnitedHealthcare Community Plan. Wixii warbixin dheeri ah oo ku saabsan qarashkaaga ilko hagaajinta ama si aad u hesho dhakhtarka ilkaha, gal **myuhc.com/CommunityPlan** ama UnitedHealthcare® app, ama ka wac Member Services lambarka **1-800-895-2017**, TTY **711**.

### Waxaa la heli karaa adeegyo gaadiid

Haddii aad u baahan tahay in lagu geeyo goobta PCP-gaaga ama bixiye caafimaad ee kale, waxaan laga yaabaa inaan ku caawin karno. Gaadiidka caafimaadka ayaa caynsanaan u leh daryeelka caafimaadka qaarkiis. Haddii aadan haysan hab kale oo aad ugu tagto dhakhtarka, ama aad ku nooshahay aag aan lahayn gaadiidka dadwaynaha ama aadan isticmaali karin gaadiidka dadwaynaha sababtoo ah xaalad caafimaad ama naafanimo, wac **1-800-895-2017**, TTY **711** ugu yaraan 48 saacadood wakhtigaaga ka hor. Si aad waxbadan u ogaato gal **myuhc.com/CommunityPlan** dooro "Coverage & Benefits" si aad u raadiso qarashaadka gaadiidka.

# Qiimeynta Caafimaadkaaga

Qiimaynta Caafimaadka waa ra'yi-ururin gaaban oona fudud oo lagugu weydinayo su'aalo sahlan oo ku saabsan qaab-nololeedkaaga iyo caafimaadkaaga. Markaad buuxiso ee aad noogu soo dirto boostada, si fiican ayaan kuu baran karnaa. Waxayn naga caawin doontaa inaan kugu aaddino faa'iidooyinka iyo adeegyo badan ee aad heli karto.

Fadlan qaado dhowr daqiiqo oo buuxi foomka Qiimaynta Caafimaadka. Ama wac **1-800-895-2017** si aad ugu buuxisid telefoonka.

# Taageerida xubinta

Waxaan rabnaa inaan sida ugu suurtogalka ah kuugu fududayno inaad sida ugu badan uga faaiidaysato qorshahaaga caafimaad. Xubin ahaan, waxaad leedahay adeegyo badan oo aad heli karto, oo ay ka mid yihiin gaadiidka iyo turjubaano haddii loo baahdo. Haddii aad wax su'aalo ah qabto, waxa jira meelo badan oo laga helo jawaabaha.

**Barta interneetka ayaa 24/7 laga heli karaa faahfaahinta qorshahaaga**

Booqo **myuhc.com/CommunityPlan** si aad iskugu qorto inaad barta interneetka ka hesho koontadaada. Bartan interneetka ayaa si aammin leh ugu haysa dhammaan macluumaadkaaga caafimaad hal meel. Waxaa faahfaahinta qorshaha dheer, barta waxaa ka mid ah aalado waxtar leh oo kaa caawin kara:

- Hel daryeel-bixiye
- Inaad daawo ka raadsato Liiska Dawooyinka La Doorbidayo
- Inaad hesho faahfaahinnada faa'iidooyinka
- Inaad soo degso Buug-gacmeedka Xubinta
- Inaad daabacato kaarka aqoonsiga xubinta oo cusub
- Hel abaalmarinda warbixinda caafimaadka ee laheli karo si aad u gaarto qaar kamid ah yoolalka caafimaadka

**Adeegyada xubinta waxaa la heli karaa 7:00 subaxnimo ilaa 7:00 fiidnimo, Isniin ilaa Jimce**

Adeegyada Xubnaha ayaa kaa caawin kara wixii su'aalo ama walaac ah. Tani waxa ka mid ah:

- Fahamka faa'iidooyinkaaga.
- Ka caawinta helida kaarka aqoonsiga xubinta oo beddel ah
- Helitaanka dhakhtarka ama rugta daryeelka dhakhsaha ah
- Sida loo helo daryeelka khaaska ah
- Sida loo codsado cabashada ama rafcaanka

Wac **1-800-895-2017**, TTY **711**.

**Barnaamijka Maareynta Daryeelka**

Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan wuxuu bixiyaa adeegyada maareynta daryeelka. Haddii aad qabtid xaalad caafimaad oo daran, sida neefta ama sonkorowga, waxaad ka faa'iidaysan kartaa barnaamijkeena maareynta daryeelka. Waxaan kaa caawin karnaa waxyaabo dhow ah, oo ay ka midka yihiin ballamo qabsiga dhakhtarka iyo ka wargelinta dhammaan bixiyayaashaada daryeelaka wixii ku saabsan daryeelka aad hesho. Si aad wax badan ugu baratid, soo wac **1-800-895-2017**, TTY **711**.

## Soo dhawoow

---

**Waxaan ku hadalnaa luqaddaada**

Haddii aad ku hadlayso luqad aan Ingiriisi ahayn, waxaan si bilaash ah ku bixin karnaa waxyaabo la tartjumay oo la daabacay iyo adeegyada luqada, macluumadka qoran ee aan Englisha ka ahayn waxaa loo aqoonsadaa qofka luqadiisa asaasiga ah, macluumaadka qoran ee qaab kale u habeysan iyo qargaar kale oo degdeg ah ama adeegyada loo qabanayo dadka naafada ah. Ama waxaan kuu diyaarin karnaa turjubaan kaa caawin kara inaad fahamto macluumaadkaas. Waxaad ka heli doontaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Adeegyada Turjumaadda iyo Ka caawinta Luqadda qaybta loo yaqaan Faahfaahinada Kale ee Qorshaha. Ama ka soo wac Adeegyada Xubinta telefoonka **1-800-895-2017**, TTY **711**.

Si usted habla un idioma que no sea inglés, podemos proporcionar materiales impresos traducidos. O podemos proporcionar un intérprete que puede ayudar a entender estos materiales. Encontrará más información acerca de servicios de interpretación y asistencia lingüística en la sección Otros detalles del plan. O llame a Servicios para Miembros al **1-800-895-2017**, TTY **711**.

**Gurmadyada**

Haddii ay jirto xaalad gurmad ah, wac . . . . . . . . . . **911**

**Lambarrada kale ee muhiimka ah**

24/7 NurseLine . . . . . . . . . . **1-800-542-8630**
(la heli karo 24 saac maalin kasta, 7 maalmood isbuucii)
TTY . . . . . . . . . . **1-800-855-2880**

Healthy First Steps (loogu talagalay kuwa hooyooyinka noqonaya) . . . . . . . . . . **1-800-599-5985**

Maareynta Daryeelka . . . . . . . . . . **1-800-895-2017**

Khadka Furan ee Xatooyada iyo Xadgudbka

UnitedHealthcare . . . . . . . . . . **1-877-766-3844**

Waaxda Caymiska ee Ohio (Ohio Department of Insurance) . . . . . . . . . . **1-800-686-1527**

. . . . . . . . . . **1-614-644-2671**

Khadka Furan ee Macmiilka Medicaid ee Ohio . . . . . . . . . . **1-800-324-8680**

TTY . . . . . . . . . . **1-800-292-3572**

Haddii u cinwaanku isbeddelo, fadlan la xiriir Xafiiska Shaqada iyo Adeegyada Qoyskaa (Job and Family Services, JFS) ee degaanka.

# Waxaad bilaabi kartaa isticmaalka faa'iidooynkaaga farmashiyaha isla markaaba

UnitedHealthcare Community Plan waxay qorshaynayaan in xubnaha ay isticmaali doonaan Gainwell si ay u soo saarto sheegashada daawada waxayna u baahnaan doonaan in ay wixii caawimaad ah ka tixraacaan buug gacmeedka Gainwell. Qorshahaaga waxaa ku caymisan liis dheer oo ah dawooyinka, ama walxaha uu dhakhtarka qoro. Dawooyinka caymisan waxaa lagu muujiyay Liiska Dawooyinka La-Doorbidayo (PDL). Liiskani waxaa sidoo kale loo yaqaan liiska daawooyinka. Dhakhtarkaagu wuxuu isticmaalayaa liiskan / PDL si uu u hubiyo in dawooyinka aad u baahan tahay ay ku caymisan yihiin qorshahaaga. Gainwell waxay maareeysaa qarashaadkaga daawada waxaana laga yaabaa in ay kaa dibirto daawwoyin kale oo horey loo hubiyay. Haddii daawadaadu aysan u baahnayn oggolaansho hore, daryeel caafimaad bixiyahaaga ayaa kuu codsan kara. Waxaad Liiska Dawooyinka La-doorbidayo (PDL) ee qorshahaaga ka heli kartaa weebsaydhkayaga **myuhc.com/CommunityPlan**. Halkaas, waxaad sidoo kale ka raadin kartaa daawada adigoo adeegsanayo magaca daawada.

Way fududahay inaad buuxsato dawooyinka laguu qoray. Waa sidan habku:

## 1. Dawooyinkaagu ma ku jiraan Liiska Dawooyinka La-Doorbidayo?

### Hadday haa tahay

Haddii dawooyinka ay ku jiraan Liiska Dawooyinka La-doorbidayo, wax kastaa waa kuu dhan yihiin. Hubso inaad tusto farmashistahaaga kaarkaaga aqoonsiga ee xubinimada ee cusub mar kasta oo aad buuxsanayso daawooyinkaaga laguu qoray.

Ka fiiri Liiska Dawooyinka La-doorbidayo barta **myuhc.com/CommunityPlan**. Waxaad sidoo kale xubnaha adeegyada Gainwell ka wici kartaa **1-833-491-0344**. Waxaan halkan u joogaa inaan ku caawino.

### Haddii ay maya tahay

Haddii daawooyinkaaga laguu qoray ayna ku jirin Liiska Dawooyinka La-doorbidayo, ballan la qabso dhakhtarkaaga gudaha 30-ka maalmood ee soo socda. Waxa laga yaabaa inay kaa caawiyaan ku beddelashada dawo ku jirta Liiska Dawooyinka La-doorbidaydyo. Dhakhtarkaaga ayaa sidoo kale kaa caawin kara inaad weydiisato ka dhaafitaan haddii ay u maleeyaan inaad u baahan tahay dawo aan liiska ku jirin.

## 2. Ma leedahay daawo laguu qoray?

Marka u dhakhatarkaagu dawo kuu qoro, ama aad u baahan tahay in dib laguugu buuxiyo dawo, booqo farmashiye shabakadda ku jira. Tus farmashiistaha kaarkaaga aqoonsiga xubinimada. Waxaad heli kartaa liiska shabakado badan oo farmashiyaal ah ee ku jira diiwaanka onlyanka ah ee **spbm.medicaid.ohio.gov** ama ka wac xubnaha Gainwell 1-833-491-0344.

## 3. Haddii aad u baahan tahay inaad dib u buuxsato dawo aan ku jirin Liiska Dawooyinka La-doorbidayo

Booqo farmashiye ku jira shabakadda oo tus kaarkaaga aqoonsiga xubinimada. Haddii aadan haysan kaarka aqoonsiga xubinimada, waxaad tusi kartaa farmashiistaha macluumaadka hoosta ku taal. Kala hadal dhakhtarkaaga xulashooyinkaaga dawooyinka la qoro.

### Fiiro Gaar ah Farmashiiste

Fadlan socodsii qaansheegashada xubintan ee Grainwell adoo adeegsanayo:

**BIN:** 02451
**Lambarka Maamulka Habsocodsiinta:** OHRXPROD

Haddii aad hesho fariin ah in daawada qofka ay au baahan tahay ogolaansho hore ama aysan ku jiran qaacidaneena, fadlan ka wac Gainwell **1-833-491-0344** ama booqo **spbm.medicaid.ohio.gov** wixii warbixin dheeri ah.

# U tagidda dhakhtarka

## Daryeel Bixiyahaaga Asaasiga ah (Primary Care Provider, PCP )

Waxaan ugu yeernaa dhakhtarka ugu muhiimsan ee aad aragto Daryeel Bixiyaha Aasaasiga ah, ama PCP. Markaad u tagto isla hal PCP in muddo ah, way fududaanaysaa inuu xidhiidh idiin abuurmo. Xubin kasta oo qoyska ayaa yeelan kara PCP u gaar ah, ama waxaad dooran kartaan dhammaantiin inaad aragtaan isla hal qof. Waxaad u arki doontaa PCP-gaaga:

- Daryeelka caadiga ah, oo ay ku jiraan baaritaannada sannadlaha ah
- Isku duwida daryeelkaaga uu ku siiyo takhasuslaha
- Daawaynta durayga iyo hargabka
- Walaacyada kale ee caafimaadka

**Waxaad haysta xulashooyin**

Waxaad PCP-gaaga ka dooran kartaa noocyo badan oo ah bixiyayaasha shabakadda ku jira. Qaar ka mid ah noocyada PCP-yada waxa ka mid ah:

- Dhakhtarka qoyska (sidoo kalena loo yaqaan dhakhtarka guud)— wuxuu daryeelaa carruurta iyo qaangaarka
- Dhakhtarka daawaynta jirka gudahiisa (sidoo kalena loo yaqaan “internist“) — wuxuu daryeelaa qaangaarka
- Kalkaaliye Caafimaad (Nurse Practiotiner, NP) — wuxuu daryeelaa carruurta iyo qaangaarka
- Dhakhtarka carruurta — wuxuu daryeelaa carruurta
- Kalkaaliye Dhakhtar (Physician Assistant, PA)— wuxuu daryeelaa carruurta iyo qaangaarka

**Waa maxay Bixiye Shabakad?**

Bixiyeyaasha Shabakadda ayaa qandaraas la qaatay qorshaha UnitedHealthcare Community Plan si ay ugu daryeelaan xubnahayaga. Adiguna uma baahnid inaad na soo wacdo ka hor intaadan arag mid ka mid ah bixiyeyaashan. Mararka qaarkoodna xubnaha ayaa u baahan doona inay arkaan dhakhtar gaar ah oo takhasus badan leh. Waxaan la shaqayn doonaa PCP-gaaga si aan u hubino inaad hesho takhasuska caafimaadka ama adeegga markaad u baahan tahay, ilaa inta muddada ah ee aad u baahan tahay, xitaa haddii aanu bixiyuhu ahayn hadda bixiye ku jira shabakadda. Ma jirto wax kharash oo adiga kaaga baxaya markaan horay u oggolaano daryeelka ama adeega, ka hor intaadan u tagin bixiyaha ka baxsan shabakadda.

Haddii aad u tagto dhakhtar takhasus leh iyada oo uusan ku soo dirin PCP-gaaga oo aanay jirin oggolaanshaha hore ee UnitedHealthcare Community Plan, waxa laga yaabaa inaad bixiso biilka. Had iyo jeer kala lashaqee PCP-gaaga marka koobaad wixii ku saabsan adeegyo kasta oo aad ubaahato.

**Bixiyeyaasha qorshaha UnitedHealthcare Community Plan**

Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan ayaa qandaraasyo la qaadata bixyeyaasha leh heerarka tayada Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan.

Waxa jira 3 siyaabood oo lagu heli karo PCP-ga adiga kugu habboon.

1. Fiiri Hagahayaga Bixiyaha ee Daabacan. Diiwaan bixiyaha wuxuu liis gareeya dhamaan shabkad bixiyayaasheena. Waxaad codsan kartaa Diiwaanka Bixiyaha adoo wacaya Member Services ama adoo soo celinaya kaarka boostada ee aad ku heshay agabkaaga xubinnimada cusub oo uu ku jiro kaarka aqoonsiga (ID) xubinta.
2. Isticmaal aaladda Hel-Dhakhtar (Find-A-Doctor) ee barta **myuhc.com/CommunityPlan**.
3. Ka wac Adeegyada Xubnaha telefoonka **1-800-895-2017**, TTY **711**. Waxaan kaaga jawaabi karnaa su'aalahaaga oo kaa caawin doonaa inaad hesho PCP adiga kuu dhow.

Qorshahaaga wuxuu leeyahay shabkad dhaqaatiir tayo leh, isbitaalo, iyo daryeel bixiyayaal kale, iyagoo dhamaantood isla shaqaynaya si ay kaaga caawiyaan in aad hesho daryeelka ugu fiican. Ka fiiri qorshaha diiwaan bixiyaahaga liiska shabakad bixiyayaasha. Bixiyayaasha way isbedeli karaan sanadka gudihiisa madaama aan kuu sii dhisayno shabakad tayo leh. Waxaad ka heli kartaa diiwaanka bixiyaha ee ugu dambeeyay barta **myuhc.com/CommunityPlan** ama app-ka UnitedHealthcare app.

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo adeeg bixiye ku siiya adeegyadeena, ama adeeg bixiye la shaqaeeya adeegyadeena iyo caymis labaad, waxaad sidoo kale wici kartaa Member Services **1-800-895-2017**, TTY **711**. Waan ku faraxsanahay inaan kaa caawino inaad hesho PCP ku jira shabakada oo kugu habboon. Ha ogaado udoodahaaga xubinta adeega haddii aad leedahay goob, luqad, ama dhaqaan aaad jeceshahay. Warqad koobi ah oo lacag la'aan ah oo diiwaan bixiyaha ayaa sidoo kale ayaa lagu soo diri karaaa adigo oo wacaya Member Services.

Markaad doorato PCP, wac Adeegyada Xubnaha oo nala soo socodsii. Waxaan Hubin doonaa diiwaankaaga la cusboonaysiiyo. Haddii aadan rabin inaad xulato PCP, UnitedHealthcare ayaa adiga kuu xulan kara mid, iyada ku salaysan goobtaada iyo luqadda aad ku hadasho.

**Baro wax badan oo ku saabsan dhakhaatiirta shabakadda**

Waxaad ka ogaan kartaa macluumaad ku saabsan dhakhaatiirta shabakadda halkan **myuhc.com/CommunityPlan**, ama adiga oo waca Adeegyada Xubnaha. Waxaan kuu sheegi karnaa macluumada soo socda:

- Magaca, cinwaanka, lambarrada telefoonka
- Shahaadooyinka hawlyaqaanimo
- Takhasus
- Dugsiga dhakhtarnimada ee qofku uu dhigtay
- Dhameystirka laylinimada dakhtarnimada
- Heerka sharciyaynta ee guddiga
- Luqadaha uu dhakhtarka ku hadlo

# Baaritaannada sannadlaha ah

### Muhiimadda baaritaanadaada sannadlaha ah

Ma aha kaliya inaad dhakhtar u tagto markaad bukto. Dhab ahaantii, baaritaannada sannadlaha ah ee aad la yeelato PCP-gaaga yaa kaa caawin karta caafimaad-qabkaaga. Marka laga reebo hubinta caafimaadkaaga guud, PCP-gaaga wuxuu hubin doonaa inaad hesho baaritaannada iyo ka tijaabinta xaaldaha iyo tallaallada aad u baahan tahay. Haddii ay jirtana dhibaato caafimaad, aad ayay badi u fududdahay in la daweeyo marka la helo xilli hore.

Halkan waxaa ku qoran qaar ka mid ah baaritaannada muhiimka ah. Inta jeer aad hesho baaritaanka ayaa salka ku haya da'daada iyo halis u ahaanta cudurada. Kala hadal dhakhtarkaaga arrimaha ku saabsan waxa adiga kugu habboon.

### Loogu talagalay haweenka

- Baaritaanka kansarka ilma-galeenka (Pap smear) — ayaa caawiya in la ogaado kansarka ilmo-galeenka
- Baaritaanka naaska/Mamografiga — ayaa caawiya in la ogaado kansarka naasaha

### Ragga loogu talagalay

- Baaritaanka xiniinyaha — ayaa caawiya in la ogaado kansarka xiniinyaha
- Baaritaanka qanjirka xiniinyaha — ayaa ka caawiya in la ogaado kansarka qanjirka xiniinyaha

### Booqashooyinka caafimaad-qabka ilmaha

Booqashooyinka caafimaad-qabka ilmaha ayaa ah waqti u PCP-gaaga eegayo sida ilmahaagu u korayo iyo sida uu u kobcayo. Waxa kaloo ay siin doonaan baaritaanka loo baahan yahay, sida tijaabooyinka hadalka iyo dhagaysiga, iyo tallaallada marka lagu guda jiro booqashadan. Booqashooyinkan caadiga ah ayaa sidoo kale waqti kuugu fiican ah inaad weydiiso wixii su'aalo ah ee aad ka qabtid dabeecadda iyo guud ahaan bedqabka, ilmahaaga, oo ay ka mid yihiin:

- Cunida
- Hurdada
- Dabeecadda / Dhaqanka
- Isdhexgalka bulsheed
- Dhaqdhaqaaqa jirka

Waa kuwan tallaallada ay u badan tahay inuu dhakhtarku siiyo, oo sida ay u badbaadiyaan ilmahaaga:

- **Cagaarshowga A iyo Cagaarshowga B:** ayaa ka hortaga laba ka mid ah infekshanada caadiga ah ee beerka
- **Rotavirus:** ayaa ka hortaga fayraska keena shubanka daran
- **Gawracatada:** ayaa ka hortaga caabuqa dhuunta ee halista ah
- **Teetanada:** ayaa ka hortaga cudurka daran ee neerfaha
- **Kixda (Xiiq-Dheerta):** ayaa ka hortaga xiiq-dheerta
- **HiB:** ayaa ka hortaga qoorgooyaha carruurnimada
- **Meningococcal:** ayaa ka hortaga qoorgooyaha bakteeriyada
- **Dabaysha:** ayaa ka hortaga fayraska keena baralaatada (naafowga)
- **MMR:** ayaa ka hortaga jadeecada, qaamo-qashiirka iyo jadeeco jarmalka
- **Busbuska:** ayaa ka hortaga busbuska
- **Hargabka:** ayaa kahortaga fayraska hargabka
- **Pneumococcal:** ayaa ka hortaga caabuqa dhegaha, cudurrada dhiigga, oof-wareenka iyo bakteeriyada qoorgooyaha
- **HPV:** ayaa ka ilaaliya fayraska lagu faafiyo galmada oo keeni kara kansarka ilma-galeenka ee dumarka iyo burooyinka saxaaxa ragga

**Jadwalka baaritaanka**

Waa muhiim inaad ballan ugu qabato booqashooyin fayoqabka ee ilmahaaga da'ahan ah:

| | |
|---|---|
| 3 ilaa 5 maalmood | 15 bilood |
| 1 bil | 18 bilood |
| 2 bilood | 24 bilood |
| 4 bilood | 30 bilood |
| 6 bilood | Sannad kasta ka dib da'da 3, Baaritaanka fayoqabka Qaangaaraha |
| 9 bilood | |
| 12 bilood | |

# Ballan ka qabsashada PCP-gaaga

Si toos ah u wac xafiiska dhakhtarkaaga. Lambarku waa inuu ku yaal kaarkaaga aqoonsiga xubinta. Markaad u wacdo inaad ballan qabsato, hubi inaad u sheegto xafiiska waxaad xaafiiska u imanayso. Taasi waxay kaa caawin doontaa inaad hubiso helitanka daryeelka aad u baahan tahay, markaad u baahan tahay.

**Sidani waa sida ugu dhakhsaha badan ee aad filan karto in lagugu arko:**

- Gurmadka — Isla markaaba ama waxaa laguu gudbin xarunta gurmadka
- Xaaladaha gurmadka ee aan nafta halis gelinayn — Isla markaaba ama waxaa laguu gudbin doonaa xarunta gurmadka
- Dhakhso leh (laakiin ahayn gurmad) — 1 maalin gudaheeda ama 24 saacadood
- Caadi ah — 6 toddobaad gudahood
- Ka hortagga ah iyo badqabka — 6 toddobaad gudahood

# U diyaargarowga ballanta PCP-aaga

**Kahor booqashada**

1. Meesha tag adiga oo og wixii aad rabto inaad ka hesho booqashada (ka ladnaanta xanuunka, u gudbin takhasusle, macluumaad gaar ah, iwm).
2. Xusuus u qoro calaamado kasta oo cusub iyo markay bilaabmeen.
3. Liis u samee dawooyin kasta ama fiitamiino kasta oo aad u qaadato si joogto ah.

**Muddada booqashada**

Markaad la joogto dhakhtarkaaga, xor ah ahow inaad:

- Weydii su'aalo
- Xusuus qor wax ku qoro haddii ay kaa caawinayso xusuusta
- Weydiiso dhakhtarka in si ayaar ah u hadlo ama u kuu sharraxo wax kasta oo aadan fahmin
- Weydiiso wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan daawooyinka, daaweynta ama xaaladaha

# Adeeyada NurseLine –Ishaada macluumaadka caafimaadka ee 24-ta saac furan

## Wac 1-800-542-8630, TTY 1-800-855-2880

Markaad bukto ama dhaawacantahay, way adagtahay in la gaaro go'aano daryeel caafimaad. Waxa dhici karta inaadan kala garan haddii ay tahay inaad aad tagto qolka gurmadka, booqato xarun daryeel dhakhso ah leh, aad ballan ka qabsato bixiye ama aad adeegsato isku-daryeelka. Kalkaaliye caafimaad eek a tirsan NurseLine oo khibrad leh ayaa ku siin kara macluumaad kaa caawiya inaad arrimaha go'aansato.

Kalkaaliyayaasha ayaa kaa siin kara macluumaad iyo taageero xaalado iyo ka walaacyo badan oo caafimaad, oo ay ku jiraan:

- Dhaawacyada yaryar
- Cudurrada caadiga ah
- Talooyinka Is-daryeelida iyo fursadaha dawaynta
- Cudurada la ogaaday dhawaan iyo cudurada daran
- Doorashada daryeel caafimaad ee habboon
- Ka-hortagga cudurka
- Nafaqada iyo jimicsiga
- Su'aalaha ah inaad weydiiso bixiyahaaga
- Sida loogu qaato daawada si badqab ah
- Caafimaadka ragga, haweenka iyo carruurta

Waxa dhici karta inaad kaliya jeceshay inaad ogaato arrin caafimaad oo aad rabto inaad wax ka koradhsato. Kalkaaliyeyaasha caafimaad ee sharciyaysan oo Khibrada leh ayaa kaa siin kara macluumaad, taageero iyo waxbarasho wixii su'aal ama walaac ah ee caafimaadka la xidhiidha.

Wac lambarka lacag-la'aanta ah **1-800-542-8630**, TTY **1-800-855-2880**. Waxaad wici kartaa lambarka NurseLine waqti kasta lacag-la'aan, 24 saacadood maalintii, 7-da maalmood toddobaadkii. Mana jirto xadidnaa khuseeysa inta jeer ee aad wixi karto.

# Haddii aad u baahan tahay daryeel oo xafiiska dhakhtarkaaguna xiran yahay

Wac dhakhtarkaaga haddii aad u baahan tahay daryeel aan ahayn xaalad degdeg (emergency) ah. Telefoonka dhakhtarkaaga ayaa laga jawaabaa
24 saac maalintii, 7 maalmood toddobaadkii. Dhakhtarkaaga ama dhakhtarka heeganka ayaa kaa caawin doona inaad samayso doorashada kuugu habboon daryeelkaaga.

Waxa laga yabaa in laguu sheego inaad:

- Tagto rugaha caafimaadka ama daryeelka dhakhsaha ah ee shaqeeya saacadaha aan caadiga aheyn
- Tagto xafiiska subaxdii
- Tagto qolka gurmadka (ER)
- Ka hesho daawo farmashigaaga

# Daryeelka caafimaadka markaad ka fogtahay hoygaaga

- Haddii aad u baahan tahay daryeel caafimaad oo degdeg ah markaad ka fogtahay agagaarka hoygaaga, ka wac daryeelahaaga Aasaasiga (PCP-gaaga) ama UnitedHealthcare Community Plan **1-800-895-2017**, TTY **711**, si aad u hesho caawin
- Markay tahay xaalad degdeg ah, uma baahnid inaad wacdo PCP-gaaga marka hore. Tag qolka gurmadka ee isbitaalka kuugu dhow ama wac 911.
- Wac PCP-gaaga ka dib tagitaanka qolka gurmadka
- Ka hel daryeelkaaga daba galka ah PCP-gaaga
- Adeegyada daryeelka caafimaadka caadiga ah waa in laga helaa PCP-gaaga markaad ku soo noqoto gurigaaga
- Dhammaan adeegyada laga helo meel ka baxsan Maraykanka iyo Dhulkiisa ayaan caynsanayn

Haddii aad hesho daryeel caafimaad oo degdeg ah inta aad guriga ka maqan tahay, dhakhtarka ayaa ku soo diri kara qaan sheegashada elektaroonig ahaan ama cinwaankan:

UnitedHealthcare Community Plan
P.O. Box 5220
Kingston, NY 12402-5220

Haddii aad hoyga aad ka fogtahay tahay oo aad u baahan tahay daryeel aan degdeg aheyn laakiin aadan heli karin bixiye shabakadda ku jira oo kuu dhow, ka wac Adeegyada Xubnaha lambarka telefoonka ku yaal kaarkaaga aqoonsiga xubinta.

# Hoy caafimaad

**Waa maxay hoy caafimaad?**

Hoy caafimaad ayaa ah il laga helo daryeel caafimaad oo aad isticmaalayso waqti kasta aadna ku kalsoon tahay. Haddii aad u tagtid hal dhakhtar ama meherad caafimaad waqti kasta, dhakhtakaasi waa "hoygaaga caafimaad."

**Maxaan ugu baahanahay hoy caafimaad?**

Hoy caafimaad ayaa kuu sahlaya inaad adigu hesho daryeel caafimaad iyo talo. Waxa jira sababo badan oo aad ugu baahan tahay adigu inaad lahaato hoy caafimaad.

- Hoyga caafimaad ayaa horay u haysan doona diiwankaaga caafimaad. Taas ayaa fursad u siinaysa dhakhtarku inuu kuu arko si dhakhso leh.
- Hoyga caafimaad ayaa garan doona waxa ay yihiin tallaalada, cudurrada, iyo daawooyinka aad hory u qaadatay iyo waxa sida fiican u shaqeeya
- Hoyga caafimaad ayaa garan kara waxa xasaasiyaddaada iyo xaaladaha kale ee caafimaad ay yihiin

- Hoyga caafimaad ayaa garan kara dhaqanka iyo caafimaadka caadi kuu ah
- Hoyga caafimaad ayaa kaaga jawaabi kara su'aalahaaga ku saabsan daawaynta hore

Waxaan u soo jeedinaynaa inay dhammaan xubnaashayadu yeeshaan hoy caafimaad.

# Adeegyada iskaa-u-imaadka ah

Waxaad heli kartaa adeegyada qaarkood adiga oo uusan PCP-gaa kuu gudbin ama kuu dirin dhakhtar kale. Kuwan waxa loo yaqaan adeegyada iskaa-u-imaadka. Tusaalooyinka adeegyada aad heli karto adiga oo uusan PCP-gaaga kuu gudbin dhakhtar kale waxa ka mid ah:

- Daryeelka ilkaha
- Daryeelka aragga
- Adeegyada daryeelka caafimaadka caadiga iyo ka-hortagga ee dumarka ee uu bixiyo takhasuslaha caafimaadka haweenka (dhakhtarka dumarka, dhakhtarka cudurrada haweenka, kalkaalisada ummulisada ah ee sharciyeysan)
- Daryeelka khaaska ah (marka laga reebo adeegyada takhasuslaha ee kiimoterabiga iyo maareynta xanuunka)
- Daryeelka gurmadka
- Adeegyada ay bixiyaan Bixiyeyaasha Qorsheynta Qoyska ee Sharciyeysan (QFPP)
- Adeegyada caafimaadka hab-dhaqanka, adeegyada caafimaadka maskaxda iyo isticmaalka maandooriyaha
- Adeegyada lagu bixiyo Xarumaha Caafimaadka oo ay Fasaxday Dowladda Federaalka (Federally Qualified Health Centers (FQHCs)/Rugaha Caafimaadka Miyiga (Rural Health Clinics (RHC) iyo adeegyada kalkaaliyaha shatiyeysan
- Kelyo-sifaynta
- Terabiga shucaaca
- Raajada shucaaca

Waa inaad ugu tagto bixiye shabakadda ku jira dhammaan Adeegyada Iskaa-u-imaadka marka laga reebo daryeelka gurmadka ah ama adeegyada laga bixiyo xarumaha caafimaadka ee dowladda Federaalka ka Fasaxan (FQHC)/Rugaha Caafimaadka Miyiga (RHC), Bixiyayaasha Qorsheynta Qoyska ee Sharciyeysan (QFPP), Waaxda Ohio ee Caafimaadka Maskaxda iyo Adeegyada Caadaysiga (OhioMHAS), xarumaha daaweynta sharciyaysan oo ah bixiyeyaal Medicaid. Bixiyeyaasha ka qaybgalayaasha ah ayaa noqon kara bixiyeyaasha ah kuwa ku qoran Diiwaanka Bixiyahaaga Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan Provider. Hagahaaga Bixiye ayay ku jiri doonaan takhasuslayaasha ah sida dhakhaatiirta kansarka, caafimaadka haweenka, dhakhaatiirta indhaha, dhakhaatiirta ilkaha, iyo dhakhaatiirta cilmi-nafsiga. Haddii aadan ku arkin bixiyahaaga liiska, soo wac Adeegyada Xubinta ama booqo **myuhc.com/CommunityPlan** si aad u ogaato haddii bixiyahaagu hadduu aqbalayo qorshaha UnitedHealthcare Community Plan. Si aad u hubiso in aad

hesho daryeelka ugu fiican, u sheeg PCP-gaaga arrimo kasta oo ku saabsan wixii booqashooyin is-gudbin ah ee aad ku tagtay takhasuslayaal iyo bixiyeyaasha kale. Haddii aad sidaas sameeya, PCP-gaaga ayaa kaa caawin kara inaad isku dubbarido daryeelkaaga caafimaad. Haddii aad booqato bixiye aan aheyn bixiye ka qaybgalo UnitedHealthcare Community Plan, adeegyadani waxay u baahan karaan oggolaansho hordhac ah.

### Bixiyeyaasha ka baxsan shabakadda

Bixiyaha aan ku jirin shabakadda UnitedHealthcare Community Plan ayaa ah bixiye ka baxsan shabakadda bixiyeyaasha. Haddii aad u tagto bixiye ka baxsan shabakadda, UnitedHealthcare ayaa sida qaalibka ah aan kaa bixin doonin kharashka daryeelka haddii uusan adeeg uu daboolay qorshaynta qoyska, xaalad degdeg ah ama aad naga haysato oggolaansho hore annaga. Fadlan ka wac Adeegyada Xubinta telefoonka **1-800-895-2017** (maqalka culus: **711**).. Waan ku caawin doonaa. Adeegyada Xubinta ayaa sidoo kale ku siin kara liiska takhasusleyaasha, oo uu ka mid yahay bixiyaha caafimaadka maskaxda.

# Faa'iidada dheeraadka ah ee loogu talagaly xubnaha dadweynaha ee Adult Extension

**Adeegyada hay'adeed, gaar ahaan goobta kalkaalinta caafimaadka iyo goobta daryeelka dhexe ee loogu talagalay adeegyada shaqsiyaadka naafada garaadka leh (ICF-IID) ayaa loo daboolaaa U Fidinta dadweynaha Muddakarka ah iyada oo aan xad laheyn, marka caafimaad ahaan loo baahan yahay.**

### Adeegyada Goobta Kalkaalinta Caafimaad (NF)

Xeerarka OAC 5160-26-02 iyo 5160-26-03 ayaa u fasaxaya ODM inay ka saarto sajilka xubnaha markay weydiisato ODM. Kuwa hadda jira ee ah dadweynaha CFC iyo ABD, xubnaha MCP ayaa laga yaabaa sajilka laga saaro kadib bisha labaad ee ku jiridda goobta kalkaalinta caafimaadka ee joogtada ah iyada oo ay daboosho barnaamijka adeegga ujirada leh (FFS) marka shuruudaha qaarkood la buuxiyo. Xubnaha U-Fidinta Muddakarka MCP ayaa hase yeeshe aan laga saari doonin sajilka oo ku jiri doona barnaamijka daryeelka maaraysan dhammaan muddada joogid(taano) kasta ee Goobta Daryeelka (NF) caafimaadka loo baahan yahay, illaa inta ay u qalmaan Qaybta U-Fidinta Medicaid ee Qaandhaaka. U Oggolaanta ICF-IID: Haddii aad ogsoon tahay in xubin ka tirsan U-fidin Muddakarka loo oggolaaday goob ICF-IID, fadlan la xidhiidh ODM isl markaaba oo ODM ayaa kala shaqayn doonta go'aaminta tallaabooyinka xiga ee daboolitaanka.

### Adeegyada dhakhtarka cilmi-nafisga

Ma laha xadad dheef (oo waliba loo yaqaan"xadadka adag") oo loogu talagalay adeegyada cilmi-nafsiga ee loogu talagalay dadka Mudakarka ah; adeegyada cilmi nafsiga caafimaad ahaan loogu baahan yahay waa in la siiyaa xad la'aan dhammaan xubnaha U-Fidinta Dadka Muddakarka ah. Dheeftan waxa la naqshadeeyay iyada oo aan laheyn xad adag si loo xaqiijiyo u hooggaansanka shuruudaha Xeerka Cadaladda Caafimaadka Dhimirka iyo Sharciga Sinnaanta Caadaysiga (MHPAEA).

# Helitaanka fikrad labaad

Fikradda labaad ayaa ah markaad rabto inaad u aragto dhakhtar labaad isla welwel caafimaad isku mid ah. Waxaad ka heli kartaa fikrad labaad bixiye shabakad wixii kasta ee ah faa'iidooyinkaaga caymiska. Taani waa ikhtiyaarkaaga. Adiga lagaama rabo inaad hesho fikrad labaad.

# Oggolaanshooyinka hore

Mararka qaarkood bixiyahaaga ayaa ah inuu fasax ka qaato qorshaha caafimaadka kahor inta uuna ku siin adeeg gaar ah. Tan waxa loo yaqaan Oggolaansho Hore. Tani waa mas'uuliyadda bixiyahaaga. Haddii aanay helin oggolaanshaha hore, adigu ma heli doontid adeegyadaas.

**Oggolaansho hore ayaa laga yaabaa in loo baahdo**

Adeegyada qaarkood ee u baahan oggolaanshaha hore wax ka mid ah:

- Seexinta Isbitaalka
- Adeegyada daryeelka caafimaadka guriga
- Qaar ka mid habraacyada sawir caafimaad qaadista bukaan-socodka, oo ay ku jiraan MRI-yada, MRA-yada, iskaannada CT iyo PET

# Daryeel sii soconayo haddii u PCP-gaagu ka baxo shabakadda

Mararka qaarkood PCP-yada ayaa ka baxa shabakadda. Haddii ay tani ku dhacdo PCP-gaaga, waxaad naga heli doontaa warqad arrintaas kuu sheegaysa. Mararka qaarkood UnitedHealthcare Community Plan ayaa adiga kaa bixin doonta inaad hesho adeegyada caynsan ee dhakhaatiirta muddo gaaban ka dib markay ka baxaan shabakadda. Waxa laga yaabaa inay helitaanka daryeelka iyo dawayntu kuu sii socota markuu dhakhtarkaagu ka baxo shabakadda haddii markaa lagaa dawaynayo dhibaato caafimaad oo daran. Tusaale ahaan, waad mutaysan kartaa haddii aad helayso kiimoterabida kansarka ama uur aad leedahay ugu yaraan lix bilood markuu dhakhtarkaagu ka baxo shabakada. Si aad u weydiisato tani, fadlan wac dhakhtarkaaga. Weydiiso iyaga inay kaaga dalbaan UnitedHealthcare oggolaansho daryeel iyo dawayn kuu sii socota.

# Adeegyada gaadiidka – Aan gurmadka aheyn

Haddii aad u baahan tahay in lagu geeyo goobta PCP-gaaga ama bixiye caafimaad ee kale, waxaan laga yaabaa inaan ku caawin karno. Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan ayaa ku siin doona 30 qaaditaan oo hal dhinac u socod ah ama 15 qaaditaan oo sii socod iyo soo noqoshaba leh halkii sanaba oo lagu tagayo iyo lagaaga soo qaadayo goobta PCP-gaaga, WIC, farmashiyaha, ama dadka kale ka qaybgalaya ama bixiyeyaasha daryeelka habdhaqanka caafimaad, sida bixiyeyaasha daryeelka aragga ama ilkaha iyo ku xadgudubka maandooriyaha. Waxa kale oo aad codsan kartaa caawin si aad u hesho booqashooyinka dib u go'aaminta Medicaid.

Marka loo geeyo gaadiid-raaca loo baahan yahay, UnitedHealthcare Community Plan waxay bixiyaan adeegyadaan gaadiid-raac ee dheeraadka ah:

- Lacag celinta Mileage hada waxaa heli karaa xubnahaas ama kuwa ayaga matala ee jecel in ay u isticmaalaan safarada ilaa balamaha daawada gaari ay ayaga leeyihiin. Xubnaha waa in ay safaro ugu baaqaan 5 maalmood ka hor.
- Safaro aan xadidnayn oo loogu talalgalay kuwa uurka leh, dhalamada kahor, dhalmada kadib, balamaha WIC, NICU iyo caruurta (Ka yar 1 sano) booqoshooyin wanaagsan. Ogaysiis hore waa laga dhaaafay. Farmashiyaasha gaarka ah ee safarada waa la ogolaaday.

# Isbitaallada iyo gurmadyada

## Daryeelka dhakhsaha ah

Rugaha daryeelka dhakhsaha ah ayaa diyaar kuu ah markaad u baahan tahay inaad u aragto dhakhtar xaalad aan nafta halis galinayn laakiinse PCP-gaaga aanan la heli karin ama ay tahay in ka dambaysa saacadaha shaqada rugta. Xaaladaha caafimaadka ee ku habboon daryeelka dhakhsaha ah waxaa ka mid ah:

- Cune xanuun
- Infekshinka dhegta
- Jeexa ama gubashada sahlan
- Hargabka
- Qandho heer hoose ah
- Murgacasho

Haddii adiga ama carruurtaadu aad yeelataan dhibaato dhakhso leh, wac PCP-gaaga marka hore. Dhakhtarkaaga ayaa kaa caawin kara helidda nooca saxda ah ee daryeelka. Waxaa laga yaabaa in dhakhtarkaagu kuu sheego inaad u tagto meel daryeel dhakhso ah leh  ama qolka gurmadka.

**Tabaabushaha hore**

Waa wax fiican in la ogaado goobta rugta daryeelka dhakhasha ah ee kuugu dhow. Waxaad ka heli kartaa liiska xarumaha daryeelka dhakhasha ah hagahaaga Bixiyaha. Ama waxaad Adeegyada Xubinta ka wici kartaa lambarka **1-800-895-2017**, TTY **711**.

## Adeegyada isbitaalka

Waxa jira marar caafimaadkaagu u kaaga baahan karo inaad tagto isbitaalka. Waxa jira adeegyada isbitaalka oo loogu talagalay bukaan-jiif iyo bukaan-socodba labadaba.

**Adeegyada bukaan-socodka** waxa ka mid ah Raajada, baaritaanada shaybaadhka iyo qalliinada yaryar. PCP-gaaga ayaa kuu sheegi doona haddii aad u baahan tahay adeegyo bukaan-socod. Xafiiska dhakhtarkaaga ayaa kaa caawin kara inaad ballan jadwalka ugu gashato adeegyadaas.

**Adeegyada bukaan-jiifka** ayaa kaaga baahan inaad habeen ku dhaxdo isbitaalka. Kuwaas waxa ka mid ah cududrrada halista ah, qalliinka ama dhaamada ilmaha.

**Tagitaanka isbitaalka**

Waa inaad tagto isbitaalka kaliya haddii aad u baahan tahay daryeel gurmad ah, ama haddii uu dhakhtarkaagu kuu sheegay inaad tagto.

Adeegyada bukaan-jiifka ayaa u baahan in lagu seexiyo (isbitaal gelinta) isbitaalka. Isbitaalka ayaa la xiriri doona UnitedHealthcare Community Plan oo weydiisan doonta u oggolaanta daryeelka. Haddii dhakhtarka ku seexiyay isbitaalku uusan aheyn PCP-gaaga, waa inaad wacdaa PCP-gaaga oo aad u sheegtaa in lagu dhigay isbitaalka.

# Daryeelka ilkaha ee gurmadka ah

Daryeelka Ilkaha ee Gurmadka ah si loo xakameeyo laxawga, dhiigitaanka ama caabuqa ku caynsan qorshahaaga.

# Adeegyada caafimaad ahaan laga maarmaanka ah

Adeegyadaas caafimaad ee:

- Muhiimka u ah ka hortagga, garashada jirrada, ka hortagg ka sii darka, sahlidda, sixidda ama dawaynta xaaladaha caafimaadka ee khatarta galiya nolosha, sababa silic ama lahaw, keena qaab jireed ee doorsan ama hawlgab, halis u geliyo ama ugu sii dara naafanimada, ama u keeno cudul ama naafanimo xubin  ka tirsan UnitedHealthcare Community Plan;
- Lagu bixiyo goobta ku habboon iyo heer ku habboon daryeelka loogu talagalay dawaynta xaalad caafimaad ee qof xubin ka ah UnitedHealthcare Community Plan; iyo
- Lagu bixiyo marka la raaco heerarka guud ahaan la oggol yahay ee ku dhaqanka arrimaha caafimaadka.

Adeegyada xarunta dhalmada ee gaar-u-oolka ah ee laga helo xarunta dhalmada ee gaarka ah. Xubnuhu waa inay u wacaan Adeegyada Xubinta si ay u ogaadaan inay jiraan xarumo arrinta mutaysan oo laga helo Ohio.

Adeegyada daryeelka caafimaadka ee lagama maarmaanka ah waxaa laga heli doonaa adeeg bixiyayaasha iyadoo loo maraayo shabkada adeega bixisa ee MCO' marka laga reebo adeegyada degdega ah.

Haddii qof xubin ahi u baahdo adeegyada goobta kalkaalinta caafimaadka waa inuu qofkaasi uu waco Adeegyada Xubinta si u helo macluumaadka ku saabsan bixiyeyaasha la heli karo.

Dheefta ka nasinta waxa ka mid ah gargaarka ku meel gaar ah ee muddada gaaban ee la siinayo xanaaneeyaha kowaad ee qofka da'diisu ka yar tahay 21: si looga caawiyo diyaarinta cuntada iyo gargaarka gacan-ku-haynta ee la bixiyo inta lagu jiro nasinta/kormeerka ilmaha; adeegyadana waxaa lagu bixinn karaa si ku salaysan qorshayn ama xaalad degdeg ah waxaana guriga ilmaha ku bixin karaa shaqsiyaad u shaqeeya bixiyeyaasha Medicaid ka qoran kuwaas oo ah hay'ado caafimaad guri oo ay Medicare sharciayaysay ama hay'adaha haddii kale la aqoonsan yahay. Adeegyada nasinta ma

bixin karta xubinta qoyska ee sharci ahaan masuulka ka ah ilmaha ama korsade daryeel-bixiye sharci ilmaha u ah. Bixiyeyaasha waa inay soo jeedaan inta lagu guda jiro bixinta adeegyada nasinta oo laguma bixin karo haben dhixitaan. Waxa jira xad ah nasin bixin aan ka badnayn 24 saacadood bishii, aanan ka badnayn 250 saacadood sannadkiiba.

**Mutaysiga xubinta ee loogu talagalay faa'iidada nasinta:**

- Carruurta da'doodu ka yar tahay 21 ayaa loo go'aamiyay inay uqalmaan SSI
- Ka qoran barnaamijka maareynta daryeelka ee Urur Daryeel oo ay Medicaid Maarayso (MCO)
- La deggan daryeel-bixiye aan rasmi aheyn, oo aan lacag la siin
- U go'aamiyay MCO inuu buuxiyo heerka daryeelka hay'adeed
- U go'aamisay MCO inuu u baahan yahay kalkaaliyaha xirfadaysan ama adeegyada baxnaaninta hal mar toddobaadkii
- Helay ugu yaraan 14 saacadood toddobaadkii oo ah adeegyada kaaliyaha caafimaadka ee guriga taas oo socotay ugu yaraan 6 bilood oo isku xigta kana horeysay taariikhda adeegyada nasinta la codsaday
- MCO ay go'aamisay in xanaaneeyaha koowaad uu leeyahay baahi ah in si ku meel gaar looga wareejiyo daryeelka ilmaha iyada oo ay sababtu tahay adeeggyada iyo baahiyada taageerada ee muddada dheer ama si looga hortago ku meelaynta hay'adaha ama meel guriga ka baxsan

Qaar ka mid ah adeegyada caafimaad ee laga maarmaanka ah ayaa ah inaad u hesho oggolaansho hore ka hor inta ay kuu suurtagalin inaad hesho. Fadlan eeg bogga 24-aad ee buug-gacmeedkan si aad uga hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan oggolaanshaha hore.

# Caymiska caafimaadka kama jiro meelaha ka baxsan Maraykanka

Haddii aad joogto meel ka baxsan Maraykanka ama xuduudkiisa oo aad u baahan tahay daryeel caafimaad, adeegyo daryeel caafimaad kasta oo aad ka hesho ayaa ku hoos caynsanayn UnitedHealthcare Community Plan. Medicaid ma bixin karto kharashka adeegyo caafimaad kasta oo aad ka hesho meel ka baxsan Maraykanka.

**Ha sugin**

Haddii aad u baahato daryeel gurmad ah, wac 911 ama tag isbitaalka kugu dhow.

# Buug-gacmeedka Xubinta ee Waaxda Medicaid ee Ohio

# Buug-gacmeedka Xubinta ee Waaxda Medicaid ee Ohio

## Ku soo dhowoow ka socota gobolka Ohio

Xubinta Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan ee qaaliga ah:

Ku soo dhowoow Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan. Haddii aad wax dhibaato ah aad kala kulanto akhrinta ama fahamka macluumaadkan, fadlan kala xiriir Adeegyada Xubinta lambarka **1-800-895-2017**, TTY **711**, 7:00 subaxnimo–7:00 fiidnimo., Isniinta–Jimcaha si aad u hesho caawin, bilaash ah. Warbixintan waxaan ku faahgaahin karnaa Ingiriss ama luqadaada hooyo iyada oo llagu bixinaayo turjumaad afka aha ama adeegyada turjumida. Waxaan ku heli karnaa warbixintan iyada oo daabacan luqado aan Ingiriisi ahayn oo loo aqoonsaday qof xubnita ah luqadiisa hooyo. Waxaad dukumentigan oo bilaash ah ku heli kartaa habab kale, sida daabacaad, Farta Indhoolaha, ama maqal, qalabka iyo adeegyada taageero dadka qaba naafanimada. Haddii aad arragga ama maqalka ka xuntahay, caawin gaar ah ayaa lagu siin karaa. Ka wac Adeegyada Xubinta lambarka **1-800-895-2017**, TTY **711**, 7:00 subaxnimo–7:00 fiidnimo, Isniinta–Jimcaha. Wicitaanka waa bilaash.

Haddii aad qabto xaalad caafimaad oo u baahan daryeel caafimaad oo joogto ah, u wac Adeegyada Xubinta sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagal ah. Tusaale ahaan: Haddii aad u baahan tahay qalliin; ama aad uur leedahay, ama haddii aad u tagto dhakhtar takhasus ah, ama aad hesho terabiga jidhka, ama adeegyada caafimaadka guriga, fadlan soo wac adeegyada xubinta isla markiiba.

Ku lifaaqsan waa bug-gacmeedkaada Xubinimo. Buug-gacmeedka xubinimo ayaa ku siin doona macluumaad badan oo aad u baahantahay inaad ogaato markaad xubin ka tahay Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan. Waxa aad muhiim u ah in aad ka akhrisato bug-kacmeedkan.

Macluumaadka soo socdaa ayaa kaa caawin doona inaad hesho adeegyada daryeelka caafimaadka iyada loo maro Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan:

- Kaarkaaga aqoonsiga (ID) ayay ku qoran yihiin magaca iyo telefoon lambarka Daryeel bixiyahaaga Aasaasiga ah (Primary Care Provider, PCP). PCP-gaaga ayaa kaa dawayn doona baahiyadaada dareyeel caafimaad ee ugu badan. Haddii aadan rabin PCP-ga ku qoran kaarkaaaga aqoonsiga, waa inaad soo wacdo adeegyada xubinta ee Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan si aad beddesho PCP-gaaga. Daryeelahaaga PCP waa inuu noqdaa qeyb ka mid ah shabakada bixiyaha ee Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan.

- Diiwaanka bixiyaha ayaa taxaya magaacyada bixiyeyaasha qaybta ka ah shabakada Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan. Adeegyadaada daryeelka caafimaadka inta ugu badan, waa inaad ugu tagtid bixiyeyaasha qaybta ka ah shabakada bixiyaha ee Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan. Boog-gacmeedkan xubinta ayaa sharraxaya sida looga helo adeegyo bixiyeyaashan. Waxaad sidoo kale wici kartaa Adeegyada Xubinta si aad u hesho caawin.
- Haddii aad codsatay Hagaha bixiyaha oo daabacan marka aad la xiriirtay Khadka Furan ee Medicaid si aad uu doorato qorshaha daryeelka la maareeyay, waa inaad sidoo kale heshaa hagaha gudaha dhowrka maalmood ee soo socda. Haddii aadan la xiriirin Khadka Furan ee Medicaid si aad isu qortid laguguna meeleeyay Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan, waxaad codsan kartaa hagaha bixiyaha oo daabacan adiga oo waaxda Adeegyada Xubinta ka wacayo telefoonka **1-800-895-2017**, TTY **711**, 7:00 subaxnimo ilaa 7:00 fiidnimo, Isniin ilaa Jimce, ama adiga oo soo celinaya kaarka boostada ee la soo raaciyay waraaqda. Xubanaha ayaa sidoo kale booqan kara bartayada internetka ee **myuhc.com/CommunityPlan** si ay u arkaan macluumaadkii ugu dambeeyay ee bixiyeyaasha ku jira shabakadda.

Haddii aanad helin sheyada korka ku yaal, ama haddii aadan fahmin macluumaadka, fadlan ula xiriir Adeegyadayada Xubinta sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah.

Haddii ay qasab tahay inaad 30 mayl ama ka badan ka safarto gurigaaga iyo wax ka badan si aad u hesho adeegyo caafimaad oo caymisan, qorshaha UnitedHealthcare Community Plan ayaa ku siin doonaan gaadiidka lagu tago lagagana yimaado xafiiska bixiyaha. Intaa waxa u dheer, waxaan bixinaa gaadiidka loogu talagalay qaar ka mid ah booqashooyinka kale ee bixiyaha sida lagu sharraxay buug-gacmeedkaaga xubinta. Markaad tahay xubin, waxaad wici kartaa **1-800-895-2017**, TTY **711**, ugu yaraan 48 saacadood ka hor, si aad u ballansatid gaadiidka.

Marka laga reebo caawimaadka gaadiidka oo ay bixiso qorshaha UnitedHealthcare Community Plan, waxaad heli kartaa gaadiidka loogu talagalay adeegyada qaarkood iyadoo loo marayo waaxda kaawntiga ee adeegyada shaqada iyo qoyska ee barnaamijka Gaadiidka Xaaladaha Aan Degdegga Aheyn (NET). Ugu wac waaxda kaawntigaaga ee adeegyada shaqada iyo Qoyska wixii ku saabsan su'aalaha ama caawimada adeegyada NET.

## Xubinnimada MCP ee ikhtiyaariga ah

- Xubnaha ka tirsan qabiil Hindi ah oo ay dowladda federaalka aqoonsan tahay, iyada oo aan loo eegin da'da
- Shaqsiyaadka hela adeegyada ka-dhaafka hoyga iyo bulshada ku salaysan ee loo maro Waaxda Ohio  ee Kobcinta Naafanimaada.

## Ka-reeban xubinnimada MCP

Shaqsiyaadka soo socda looma oggolo inay ka mid noqdaan Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan:

- Qof u-qalma barnaamijyada Medicaid iyo Medicare labadaba

- Dadka Hay'adaha Lagu Hayo (ku jira goobaha xannaanaynta ona aan ugu qalmin qaybta U-Fidinta Qaan-gaadhka, goob daryeelka muddada dheer, ICF-IID, mise hay'ad kale)
- Kuwa hela Adeegyada Ka Dhaafka Medicaid ee aan ugu qalmin marka la eego qaybta Ku fidinta Qaangaadhka

Haddii aad aamminsan tahay inaad adiga ama ilmahaagu buuxin kartaan mid ka mid ah shuruudaha kor ku qoran oo ay tahay in aadan ka mid noqon xubin qorshe daryeel maaraysan, waa inaad ka soo wacdo Khadka Furan ee Medicaid telefoonka 1-800-324-8680 (TTY 1-800-292-3572). Haddii shuruucdda kore midkood aan la buuxin, xubinimadaada MCP ayaa la joojin doonaa.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan mid ka mid ah macluumaadka kor ku yaal ama su'aalo kale oo aan kaa caawin karno, fadlan ka soo wac adeegyadayada xubinta telefoonka **1-800-895-2017**, TTY **711**. Waxaan ku faraxsanahay inaad xubin naga noqoto oo waxaan sugaynaa in aan kaala shaqayno daryeelka caafimaadka wanaagsan.

# Buug-gacmeedka Xubinta ee Waaxda Medicaid ee Ohio

ATTENTION: If you do not speak English, language services, free of charge, are available to you. Call toll-free **1-800-895-2017**, TTY **711**, 7:00 a.m.–7:00 p.m., Monday–Friday.

Si habla español (Spanish), tiene a su disposición servicios gratuitos de asistencia lingüística. Llame al**1-800-895-2017**. TTY **711**.

**Nepali –** तपाईं नेपाली भाषा बोल्नुहुन्छ भने, तपाईंका लागि भाषा सहायता सेवाहरू निःशुल्क उपलब्ध छन्। टोल-फ्रि नम्बर **1-800-895-2017**, TTY **711** मा फोन गर्नुहोस्।

**Somali –** Haddii aad ku hadasho Soomaali, adeegyada kaalmada luuqadda, oo bilaash ah, ayaad heli kartaa. Wac lambarka lacag la'aanta lagu waco **1-800-895-2017**. TTY **711.**

**Russian –** Если Вы говорите по-русски, Вы можете бесплатно воспользоваться помощью переводчика. Звоните по бесплатному номеру **1-800-895-2017**. TTY **711.**

**Arabic –** إذا كنت تتحدث اللغة العربية، فيمكنك الاستعانة بخدمات المساعدة اللغوية المتاحة إليك مجانًا. اتصل برقم: **1-800-895-2017**، والهاتف النصي رقم: **711**.

Haddii wax dhiibato ah aad kala kulanto akhriska ama fahanka arrintan ama macluumaad kasta oo ka mid ah qorshaha UnitedHealthcare Community Plan, fadlan kala xiriir Adeegyada Xubnaha lambarka **1-800-895-2017**, TTY **711**, laga bilaabo 7:00 subaxnimo – 7:00 fiidnimo, Isniinta–

Jimcaha si aad u hesho caawimaad bilaa kharash kuu ah. Macluumaadkan ayaan kuugu sharrixi karnaa Ingiriis ama luqaddaada koowaad. Waxaad hababka kale ku heli kartaa dukumentigan oo bilaash ah, sida daabacaad, qoraalka indhoolaha, ama maqal. Wac lambarka lacag la'aanta lagu waco **1-800-895-2017**, TTY **711**, 7:00 subaxnimo–7:00 fiidnimo., Isniinta–Jimcaha.

Ku soo dhowoow UnitedHealthcare Community Plan. Adigu waxaad hadda tahay xubin ka tirsan qorshaha daryeelka caafimaadka, ee sidoo kale loo yaqaan qorshaha maareynta daryeelka(managed care plan, MCP). UnitedHealthcare Community Plan waxay siisaa adeegyada daryeelka caafimaadka dadka deggan Ohio ee u qalma, oo ay ku jiraan shaqsiyaadka daqliga hooseeyo, shaqsiyaadka uurka leh, dhallaanka, iyo carruurta, dadka qaangaarka ah, iyo shaqsiyaadka qaba naafanimada. Warbixinta lagu sheegay buugan waxaa loogu talagalay in ay u shaqayso sida hage warbixin degdeg ah laga tixraayo.

UnitedHealthcare Community Plan kuma kala takoorto dadka iyadoo ku salaynayso sinjiyad, midab, diin, jinsi, nooca galmada, naafonimo, asalka qarameed, xaaladda halyeynimada, abtirsiinyaha, xaaladda caafimaad, xaaladda ciidanimo, nooca jinsiga, macluumaadka hiddo-raaca ama baahida loo qabo adeegyada caafimaad.

Waa muhiim inaad xasuusato inay tahay inaad ka hesho adeegyada ku caynsan Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan goobaha iyo adeeg bixiyeyaasha ku jira shabakada qorshaha UnitedHealthcare Community Plan. Shabakada adeeg bixiyayaasha UnitedHealthcare Community Plan network waxay ogoshahay in ay kaagala shaqeyaan qorshahaaga caafimaadka si laguu siiyo daryeel loo baahan yahay. Ka eeg boggaga 59–65 si aad u hesho macluumaad ku saabsan adeegyada ay caymiyaan qorshaha UnitedHealthcare Community Plan. Waqtiga kaliya ee aad istcimaali karto bixiyeyaal aan ku jirin shabakada bixiyaha ee qorshaha UnitedHealthcare Community Plan waa markay tahay:

- adeegyada gurmadka
- xarumaha caafimaad oo ay fasaxday dowladda federaalka (FQHC)/rugaha caafimaadka miyiga (RHC)
- bixiyeyaasha qorsheynta qoyska ee sharciyeeysan
- kalkaalisada ummulisada ah ee sharciyeysan ama kalkaaliyaha caafimaadka ee sharciyeysan
- bixiyaha ka baxsan shabakadda oo ay UnitedHealthcare Community Plan kuu oggolaaday inaad aragto

Diiwaanka Bixiyaha wuxuu taxaa dhammaan kooxda bixiyeyaasha annaga naga tirsan iyo waliba bixiyeyaal aan shabakadda ku jirin ee aad u isticmaali karto helitaanka adeegyada. Waxay ahayd in aad hesho kaar ay lasocoto xulasho lagu codsanayo Diwaanka Adeeg Bixiyaha ee qorshaha UnitedHealthcare Community Plan. Waxaad codsan kartaa Diiwaanka Bixiyaha adoo wacaya Member Services ama adoo soo celinaya kaarka boostada ee aad ku heshay agabkaaga xubinnimada cusub oo uu ku jiro kaarka aqoonsiga (ID) xubinta. Diiwaanka Bixiyaha wuxuu taxaa dhammaan kooxda bixiyeyaasha annaga naga tirsan iyo waliba bixiyeyaal aan shabakadda ku jirin

ee aad u isticmaali karto helitaanka adeegyada. Waxaad sidoo kale booqan kartaa mareegta **myuhc.com/CommunityPlan** si aad u aragto macluumaadka la cusbooneysiiyay ee bixiyaha ku jira shabakadda ama ka wac Adeegyada Xubinta lambarka **1-800-895-2017**, TTY **711**, 7:00 subaxnimo–7:00 galabnimo., Isniinta–Jimcaha si aad u hesho caawimaad.

# Kaararka aqoonsiga (ID)

Adigu waa inaad heshay kaarka aqoonsiga xubinimada ee Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan. Xubin kasta oo ka tirsan qoyskaaga ee ka mid noqday UnitedHealthcare Community Plan ayaa heli doona kaar u gaar ah. Kaararkan wuxuu beddelaya kaarkaagii Medicaid ee billaha ahaa. Kaar kasta ayaa shaqaynaya illaa u qofku xubin ka yahay UnitedHealthcare Community Plan. Ma heli doontid kaar cusub bil kasta sidii aad ugu heli jirtay kaarka Medicaid.

Haddii aad uur tahay, waxaa lagaaga baahan yahay inaad ogeysiiso Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan. Waa inaad sidoo kale wacdaa marka ilmahaagu dhasho si aan kugu soo diri karno karaka cusub ee aqoonsiga oo loogu talagalay ilmahaaga.

Ka wac Adeegyada Xubinta ee qorshaha UnitedHealthcare Community Plan sida ugu dhakhsaha badan barta **1-800-895-2017** ama TTY **711** haddii:

- Adigu aadan weli helin kaararkaaga aqoonsiga, ama haddii
- Wax ka mid ah macluumaadka ku qoran kaararka uu khalad yahay
- Kaararkaagu kaa lumaan
- Aad ummusho ilmo

### Had iyo jeer hayso kaar(rar)kaaga aqoonsiga

Waxaad ugu baahan doontaa kaarkaaga aqoonsi mar kasta oo aad hesho adeegyo caafimaad. Tani micnaheedu waa inaad u baahan tahay kaarkaaga aqoonsiga ee xubinimada Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan marka aad adigu:

- u tageyso daryeel bixiyahaaga asaasiga ah (PCP )
- aad arkeyso takhasusle caafimaad ama bixiye kale
- ama aad tagto qolka gurmadka
- aad tagto goob daryeel xaalad degdeg ah
- u tagto isbitaalka sabab kasta
- heleyso daawo caafimaad
- aad hesho u-qoritaan daawo
- sameyneyso baaritaano caafimaad
- jadwalka gaadiidka

# Macluumaadka xubinta cusub

**Haddii aad lahayd adeegyo daryeel caafimaad oo horey loo ansixiyay ama loo jadwaleeyay, waa muhiim in aad u wacdo Adeegyada Xubinta (Member Services) isla markiiba.** Mararka qaarkood iyo waqti cayiman kadib markaad isqorto, wax laga yaabaa inaan kuu oggolaano ka helitaanka daryeelka bixiyaha aan ku jirin shabakadda qorshaha UnitedHealthcare Community Plan. **Waa inaad wacdaa UnitedHealthcare Community Plan kahor intaadan helin daryeelka.** Haddiiaadan noo soo wicin, adigu waxa laga yaabaa inaadan helin daryeelka iyo/ama aan sheegashada la bixin doonin. Tusaale ahaan, waxaad u baahan tahay inaad wacdo Adeegyada Xubinta haddii aad leedahay adeegyadan soo socda oo horay loo ansixiyay iyo/ama la jadwaleeyay:

- Xubnaha jirka, dhuuxa lafta, ama beddelka unugyada dhiig-samayska
- Daryeelka saddexda bilood ee dhalmada ka hor ah (uurka), oo ay ku jirto ummulitaanka
- Qalliinka bukaan-jiifka/bukaan-socodka
- Ballan ka qabsashada daryeelaha asaasiga ah ama bixiyaha takhasuslaha ah
- Kiimiko ku daawayn (chemotherapy) ama daaweynta shucaaca (radiation)
- Daaweynta ka dambeysa ka saarida isbitaalka ee 30-ka maalmood ee ugu dambeeya
- Adeegyada ilkaha ama aragga een caadiga ahayn (tusaale ahaan ilko toosinta ama qalliinkooda)
- Qalabka caafimaadka (tusaale: sariiraha isbitaalka, kuraasta curyaanka ee matoorka leh, saadka oksijiinta guriga iyo neef-qaadashada, saadka kaadi-ceshad la'aanta, nafaqo-qaadashada iyo saadka tuubada)
- Adeegyada aad ku hesho guriga, oo ay ku jiraan caafimaadka guriga, terabiyada iyo kalkaalinta caafimaad

Ka dib markaad isqorto, Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan ayaa kuu sheegi doonta haddii mid ka mid ah daawooyinka hadda kuu qoran u baahan yihiin oggolaansho aan horey loogu baahnayn markii adeegga ujiirada laga bixiyo ee Medicaid uu lacagta ka bixiyay. Aad ayay muhiim u tahay inaad eegto macluumaadka ay bixiso Qorshaha bulshada UnitedHealthcare Community Plan aadna la xiriirto Adeegyada Xubinta ee Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan haddii aad qabtid wax su'aalo ah. Waxaad sidoo kale eegi kartaa bogga internetka UnitedHealthcare Community Plan ee **myuhc.com/CommunityPlan** si aad u ogaato haddii aad daawadaada (daawooyinkaaga) ugu baahan tahay oggolaansho hore. Waxaad u baahan kartaa inaad la socoto xafiiska daawada qoray si aad ugu gudbiso codsiga oggolaansho hore Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan haddii loo baahdo. Haddii daawadaadu(inkaagu) ay u baahan yihiin oggolaansho hore, adigu ma heli kartid daawadaada (inkaaga) ilaa bixiyehaagu uu u gudbiyo cosdiga Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan oo la ansixiyo mooye.

# Daawooyinka dhakhtarku qoro

Xubnaha MCO waxay isticmaali doonaan Gainwell si loo meelmariyo sheegashada daawooyinka waxayna u baahnaan doonaan in ay ka tixraacaan wixii caawinaad ah lifaaqa buuga gacanta ee Gainwell.

# Adeegyada aan ku Caynsanayn UnitedHealthcare Community Plan

UnitedHealthcare Community Plan ayaan bixin doonin kharashka adeegyada ama agabka soo socda ee aysan daboolin Medicaid:

- Dhammaan adeegyada ama saadka aan caafimaadka loogu baahnayn
- Baaritaanka sugidda aabbanimada
- Adeegyada lagu garto dhimashada waxa sababay (autopsy) ama adeegyada la xidhiidha daraasaadka cilmiyada denbiga
- Adeegyada is-dilitaanka la caawiyay, ee loo qeexo inay yihiin adeegyo leh ujeedooyin u horseed u leh, ama caawinayo u horseedka dhimashada qofka

Haddii aad qabto wax su'aal ah oo ku saabsan in adeeg uu caynsan yahay iyo in kale, fadlan ka wac Waaxda Adeegyada Xubinta lambarka **1-800-895-2017**, TTY **711**, 7:00 subaxnimo–7:00 fiidnimo., Isniinta–Jimcaha.

# Adeegyada aysan daboolin UnitedHealthcare Community Plan haddii caafimaad ahaan lagama maarmaan u ahayn mooyee

UnitedHealthcare Community Plan waxay dib u eegis ku sameyn doonaan baahida caafimaad haddii loo baahdo. UnitedHealthcare Community Plan ayaan bixin doonin kharashka adeegyada soo socda ee aan ku caynsaneyn Medicaid inay caafimaad ahaan lagama maarmaan yihiin mooyee:

- Soo ridida ilmaha marka laga reebo xaalad kufsi oo laga soo warbixiyey, uurka ku yimaada marka dad isla dhashay ay wada seexdaan (incest) ama markay loogu baahdo badbaadinta nolosha hooyada
- Adeegyada Jawaab celinta Noolaha.
- Adeegyada iyo habraacyada tijaabada ah, oo ay ku jiraan daawooyinka iyo qalabka, ee aan ku caynsanayn Medicaid oo aan waafaqsanayn heerarka habdhaqan ee waxqabadka
- Adeegyada ma-dhaleysnimada ee loogu talagay ragga iyo haweenkaba, oo ay ku jiraan dib-u-celinta ma-dhaleysi ka dhigitaanka ikhtiyaariga ah
- Daaweynta bukaan-jiifka si loo joojiyo isticmaalka daroogada iyo/ama khamriga (adeegyada sunta mukhaadaraadka lagu saaro ee bukaan-jiifka markay tahay isbitaal guud ayaa la daboolaa)
- Qalliinka balaastiga ama qurxinta kaasoo aan caafimaad ahaan loo baahnayn
- Adeegyada daawaynta cayilka xad-dhaafka haddii la go’aamiyo inay baahi caafimaad tahay mooyee
- Adeegyada ay go'aamisay Medicare ama qolooyinka kale oo saddexaad ee lacaga bixiya inaysan ahayn arrin caafimaad ahaan lagama maarmaan ah
- Kala-talinta galmada ama guurka
- Madhaleys ka dhigitaanka ikhtiyaariga ah haddii qofku ka yar yahay da’da 21 sano ama sharci ahaan uusan awoodi karin inuu bixiyo oggolaanshaha habraaca

### Xaddidaadaha soo noqnoqoshada

Kani ma aha liis dhammaystiran oo adeegyada aan lahayn caymiska Medicaid ama Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan. Ururkaaga daryeelka ee maareeysan ayaa dib u eegi doona dhammaan codsiyada adeegyada uu bixiyo adeeg bixiyahaaga. Haddii aad qabto wax su’aal ah oo ku saabsan in adeeg uu caynsan yahay iyo in kale, fadlan ka wac Waaxda Adeegyada Xubinta lambarka **1-800-895-2017**, TTY **711**, 7:00 subaxnimo–7:00 fiidnimo., Isniinta–Jimcaha.

# Adeegyada maareynta daryeelka

Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan wuxuu bixiyaa adeegyada maareynta daryeelka.

- Haddii aad qabtid xaalad caafimaad oo daran, sida neefta ama sonkorowga, waxaad ka faa'iidaysan kartaa barnaamijkeena maareynta daryeelka. Shaqaalaha UnitedHealthcare Community Plan, oo ay ku jiraan kalkaalisooyinka, maamulayaasha daryeelka iyo shaqaalaha wacyigelinta waxay la xiriiri karaan xubnaha hadii dhaqtar codsado wicid telefoon, haddii xubin uu codsado wicid telefoon, ama haddii MCO uu dareemo in adeegyada maareeynta daryeelka ay u noqonayso mid wax u taraeysa xubinta. Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan ayaa siisa maaraynta daryeelka dadka xubnaha ka ah ee isticmaala adeegyada qadar ama tiro dhaafsan inta baahida caafimaadka loo qabo.
- Shaqaalaha UnitedHealthcare Community Plan ayaa laga yaabaa inay ku weydiiyaan su’aalo si ay u ogaandaan macluumaadka ku saabsan xaaladiisa/xaaladeeda
- Shaqaalaha UnitedHealthcare Community Plan waxay bixin doonaan macluumaad lagaga caawinaayo xubnaha in ay fahmaan sida ay iyaga naftooda isaga taxadirayaan iyo sdia adeegyada loo helo (oo ay ka mid yihiin qeyraadka maxaliga ah)
- Shaqaalaha UnitedHealthcare Community Plan ayaa la hadli doona PCP-ga xubinta iyo bixiyeyaasha kale ee adeegga si la isugu duwo daryeelka
- Shaqaalaha qorshaha UnitedHealthcare Community Plan waxay eegi doonaan taariikhdaada caafimaad, bulsheed iyo caafimaadka maskaxeed waxayna hubin doonaan inaan wax kasta diyaar inoo yihiin. Koox kalkaaliyayaal iyo shaqaale bulsho oo sharciyaysan ah ayaa idinla shaqayn doonaa adiga, qoyskaaga, PCP-gaaga, bixiyeyaasha kale ee daryeelka caafimaadka iyo ilaha beesha si loo naqshadeeyo qorshe daryeel ee sida ugu habboon u buuxiyo baahiyadaada.
  - Waxaan abuuri doonaa qorshe daryeel oo gaar ah oo ku salaysan baahiyadaada gaarka ah
  - Waxaan iskudubbarid la sameeyn doonaa xubnaha qoyska, daryeelayaasha iyo bixyeyaasha daryeelka caafimaadka
  - Waxaan kaa caawin doonaa inaad hubiso inaad hesho adeegyada laga yaabo inay u baahan yihiin

Xubnaha waa in ay soo wacaan haddii ay qabaan wax suaalo ah oo ku saabsan adeegyada maareeynta daryeelka, ama aya dareemayaan in ay ka faaiidayaan adeegyada maareeynta daryeelka, naga soo wac 1-800-508-2581.

# Adeegyada Xubinta

Adeegyada Xubnaha ayaa kaa caawin kara wixii su'aalo ama walaac ah. Tani waxa ka mid ah:

- Fahamka faa’iidooyinkaaga.

- Adeegyada la caymiyo
  - Ka caawinta helida adeeg bixiye
  - Lambarada telefooonda la wacayo
  - Saacadaha shaqada
- Sida loo helo daryeelka ama adeegyada khaaska ah
- Beddelida PCP-yada.
- Sida loo gudbiyo cabasho ku saabsan MCP/adeeg bixiyeyaasha/takoorka
- Sida loo codsado cabashada ama rafcaanka
- Helida caawimaad luuqadeed
- Haddii aad ku hadasho luqad kale oo aan ahayn Ingiriis, waxaan ku siin karnaa agabyo daabacan oo turjuman. Ama waxaan kuu diyaarin karnaa turjubaan kaa caawin kara inaad fahamto waxyaalahaas.
- Xubnuhu waa inay wacaan Adeegyada Xubinta marka isbeddel ku yimaado xogtooda dadweynaha iyo haddii ay uur yihiin
- Ka caawinta helida adeeg bixiye
- Gudbinta cabasho ku saabsan bixiyeyaasha/takoor Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan

Kala xiriir Adeegyada Xubinta lambarka **1-800-895-2017**, TTY **711**, 7:00 subaxnimo–7:00 fiidnimo., Isniinta–Jimcaha si aad u hesho caawimaad.

# Adeegyada caafimaadka hab-dhaqanka, adeegyada daaweynta caafimaadka maskaxda iyo xanuunnada isticmaalka maandooriyaha

Adeegyada daaweynta caafimaadka maskaxda iyo daaweynta cilladaha isticmaalka maandooriyaha waa la heli karaa. Adeegyadan waxaa ka mid ah:

- Adeegyada caafimaadka
- Daaweynta-ka caawisa daawada loogu talagalay qabatinka
- Baaritaanka maanka
- Adeegyada daaweynta xanuunada maandooriyaha waxaa ka mid ah taageerada kasoo raysashada saameynta faca, isbitaal-dhigida muddada kooban, iyo daaweynta hoyga, maareynta dhacdada, bukaan-socodka aad u xanuunsan, maareynta iska-dhaafida maandooriyaha

- Adeegga daaweynta dabeecadda / habdhaqanka
- Baxnaaninta fikirka maanka
- Taageerada daaweynta maskaxda ee bulshada
- Qiimaynta iyo falanqaynta baaritaanka
- Daaweynta maskaxda iyo la-talinta
- Wax-ka-qabashada dhibaatooyinka
- Adeegyada barnaamijka daaweynta Opioid
- Adeegyada kalkaalinta caafimaadka habdhaqanka
- Daaweynta dadka qaangaarka ah
- Daaweynta caafimaadka maskaxda ee bulshada ee loogu talagalay dadka waaweyn
- Ka jawaabida moobilada iyo adeega xasilinta (MRSS)
- Daawaynta degdega ah ee guriga ku salaysan ee loogu talagay carruurta/dhallinta

### Waad caynsan tahay

Waa muhiim in la ogaado halka laga raadsado caawimaad markii loo baahdo. Waxaan halkaan u joognaa inaan caawino xubnahayaga. Booqo **Liveandworkwell.com** si aad u hesho wadahadalo toos ah oo ku saabsan mowduucyada caafimaadka maskaxda.

### Sida loola xiriiro khadka 24 saac furan ee dhibaatada caafimaadka habdhaqameed

Sidoo kale inaga ayaad na soo wici kartaa haddii ay dhibaato ku haysato. Qof ayaa islamarkaaba la hadli kartaa waxaana kaa caawin karnaa inaad hesho daryeelka aad u baahan tahay. Soo wac khadkayaga dhibaatada caafimaadka habdhaqameed ee 24 saac furan ee ah 877-542-9236. Wicitaankan waa bilaash. Khadadka Dhibaatada Caafimaadka Habdhaqameed waxaa la heli karaa 24 saacadood maalintii, 7-da maalmood ee usbuuca, 365-ta maalmood ee sanadka. Waxaan dadka aan ku hadlin Ingiriisiga u haynaa adeegyo turjumaad oo lacag la'aan ah.

Haddii aad u baahato adeegyada caafimaadka maskaxda iyo/ama adeegyada daaweynta xanuunada isticmaalka daroogada, fadlan ka soo wac Adeegyada Xubnaha halkaan **1-800-895-2017**, TTY **711**. Sidoo kale waxaad ka heli kartaa adeeg bixyayaasha UnitedHealthcare Community Plan boggeena **myuhc.com/CommunityPlan**, in Diiwanka adeeg bixiyaheen ama adiga oo wacaaya Member Services **1-800-895-2017**, TTY **711**.

# OhioRISE

Barnaamija (OhioRise) oo ah Ohio resilience through integrated systems and excellence waa barnaamij daryeel oo loo maareeyay dhalinyarta leh baahiyaha caafimaadka dabeecada.

OhioRISE waxay doonaysaa in ay balaariso adeegyada la heli karo ee ku salaysan bulshada iyo guriga si loo xaqiijiyo xubnaha OhioRISE iyo qoysaska in ay haystaan qalabka ay u baahan yihiin si ay ugu tilmaanto isdhexgalka ay la sameynayaan sistemyo badan sida cadaalada caruurta, waxbarashada, iyo kuwa kale. Shaqsiga ka diiwaangashan barnaamijka OhioRISE wuxuu sii wadi doonaa barnaamijkooda daryeelka maareeysan ee faaidada caafimaadka jirka.

**Uqalmida OhioRISE:**

- Ka diiwaangashan Ohio Medicaid
- Ka yar da'da 21
- Gaar xadka ugu dambeeya ee baahiyaha shaqaynaya ee loogu talagalay daryeelka caafimaadka dabeecada, sida ay Soo ogaatay qiimeynta (CNS) ee baahiyaha iyo awoodaha ilmaha iyo dadka waweyn

**Adeegyada OhioRISE:**

Kasokoow adeegyada caafimaadka dabeecada ee marhoreba laga helaayay Medicaid, OhioRISE waxay bixisaa adeegyadan soo socda:

- Xiriirinta daryeelka oo ay go'aamisay qiimeynta CANS
  - Ururrkaaga daryeelka ee maareeysan waxaa lagu soo dari doonaa maamulka daryeelkaaga
- Daaweynta Xoogan ee Dhimirka ee Gudaha Guriga (IHBT)
- Nasinta caafimaadka dabeecada
- Taageero dhamaystiran
- Xarunta Hoyga Daawaynta Dhimirka (PRTF): La heli karo Oktoobar 2023
- Hindisaha baahiyaha iyo awooda canuga iyo dadka waaweyn ee ah Ohio Children’s Initiative Child and Adolescent Needs and Strengths (CANS). Hindisaha baahiyaha iyo awooda canuga iyo dadka waaweyn ee ah Ohio Children’s Initiative Child and Adolescent Needs and Strengths (CANS) waa qalab lagu go'aamin jiray u qalmida OhioRISE lagaaga caaawinayana iskuxirka daryeelkaaga. Waxay isku keentaa sheekadaada iyo tan qoyskaaga si loo fahmo baaahidaada iyo awoodahaaga, iyo in ay inaga caawiso in go'aan ka gaarno habka ugu wanaagsan ee lagu bixiyo caawin. Hindisahaaga Ohio Children’s Initiative CANS assessment waxaa loo cusboonaysiiyaa si joogto ah si lagaaga caawiyo qorshahaaga daryeel joogtada ah.

Wixii ah macluumad dheeri ah ee ku saabsan adeegyada OhioRISE fadlan la xiriir Aena Better Health of Ohio Member Services adigoo adeegsanayo lambarka 833-711-0773, TTY 711.

# Barnaamijka adeegyada la iskuduway

UnitedHealthcare Community Plan ayaa siisa maarayn daryeel dadka xubnaha ka ah ee isticmaala qadar ama tiro adeegyada ah oo dhaafsan inta caafimaad ahaan laga maarmaanka ah. Sidani waxa loo sameeyaa si loo hubiyo inaad hesho daryeel caafimaad oo la isku-dubbariday oo tayo sare leh. Haddii laguu doorto inaad ka qaybgasho barnaamijkan waxaa lagu siin doonaa isku duwid daryeel oo uu sameeyo Maareeye Daryeel. Haddiiba barnaamijka mar lagaa diiwaangeliyay, Maamulaha Daryeelka ayaa kula soo xiriiri doona kadib markii qof laguu xilsaaro.

Haddii aad qayb ka mid ah tahay barnaamijka, waxaad heli doontaa warqad ku weydiinaysa inaad xulato farmashiye oo aad xaqiijiso PCP-gaaga. Haddii aadan ku dooran farmasiye 30 maalmood gudahood laga soo qbilaabo taariikhda waraaqda laguu soo diray, Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan ayaa kuu dooran doonta farmasiye ku jira shabakadda iyada oo salka ku haysa kuwa soo socda:

- Halka horey aad tagtay
- 24 saacadood furan, hadday suurtagal tahay
- Gurigaaga u dhow

Marka laga reebo hadii ay jirta xaalad gurmad ah ama wixii ah adeegyada la bixiyo saacadaha shaqada kadib, hadaba xubnaha CSP:

- Waa inay leeyihiin hal farmashi oo ay ka qaataan dawooyinka uu dhakhtarka qoray
- Waxaa loo qoondeyn karaa hal PCP kaasi oo daryeelka la maareyn doona adeeg bixiyayaasha kale

Xubnuhu waxay codsan karaan inay beddelaan farmashigooda ama PCP-gooda keliya hadii ay jiraan daruufo qaas ah.

Tariikhdaada bilowga barnaamijkan ka hor, waxaad heli doontaa kaar aqoonsi oo cusub oo ay ku qoran yihiin farmashiyahaaga iyo PCP-gaaga. Haddii aad u baahan tahay inaad beddesho farmashiyaha ku yaala kaarkaaga aqoonsiga, ka wac Adeegyada Xubinta lambarka **1-800-895-2017**, TTY **711**. Codsiyada loogu talagalay beddelka farmashiyaha ayaa dib loo eegi doona iyada oo ku saleysan shaqsi ahaanta.

Kuwa loo doorto barnaamijka ayaa faahfaahin dheeraad ah ku heli doona boostada waxaana loo sheegi doonaa xaqa ay u leeyihiin dhegeysi gobol.

# Talaalka iyo tijaabda COVID

UnitedHealthcare Community Plan ayaa dabooli doonta dhamaan qarashaadka tijaabada, daaweynta iyo talaalka Medicaid COVID-19 adiga oo aan bixin wax qarasha ah.

Waxaa laga heli karaa onlaynka goobaha tijaabada COVID: **https://coronavirus.ohio.gov/wps/portal/gov/covid-19/dashboards/other-resources/testing-ch-centers**.

Waaxda caafimaaka ee Ohio (ODH) waxay dadka reer ohio u samaysay qalab wax lagu raadiyo si ay u isticmaaalaan una helaan dadka wax talaala. Diiwaanku waa mid lagu baari karo dowlada hoose iyo ZIP code wuxuuna tusayaa adeega bixiyayaasha helaya shixnada talaallka COVID. Waxaad heli kartaa macluumaadka iyo goobaha talaalka **https://vaccine.coronavirus.ohio.gov/** ama adiga oo ka wacaya waaxda caafimaadka Ohio telfoonka lacag la'aanta ah ee 833-427-5634.

UnitedHealthcare Community Plan waxay kaa caawin kartaa in aad hesho goobta iyo tijaabada caafimaadka ee bulshadaada dhexdeeda. Waxay sidoo kale kaa caawin karaan jadwalka iyo gaadiidka lagu tagayo balanta. Kala xiriir qorshahaaga **www.uhccommunityplan.com** ama Telfoonka: Adeegyada Xubinta **1-800-895-2017** ama TTY **711** ama khadka telfoonka ee 24 saac 1-800-542-8630 or TTY 1-800-855-2880.

Waaxda caafimaadka ee Ohio waxay bixinaysaa warbixino cusub oo ku saabsan talaalka ee marxaladaha uqalmida: **https://coronavirus.ohio.gov/wps/portal/gov/covid-19/covid-19-vaccination-program**.

# Healthchek

Healthchek waa dheefta Ohio ee baaritaanka xilliyeed ee wakhtiga hore ah, ogaanshaha cudurka iyo daawaynta (EPSDT). Healthchek ayaa daboosha baaritaannada caafimaadka, talaallada (irbado), waxbarashada caafimaadka, iyo baaritaannada sheybaarka ee loogu talagalay xubnaha ay da'doodu ka yar tahay 21 jir. Baaritaannadan ayaa lagu xaqiijiyaa inay carruurtu caafimaad qabaan oo ay jir ahaan iyo maskax ahaanba kobcayaan iyo in kale. Hooyooyinka waa inay qaataan baadhitaannada dhalmada kahor ah oo carruurtuna waa inay qaataan baadhitaannada dhalashada, 3–5 maalmood jir iyo markay da'oodu tahay 1, 2, 4, 6, 9, 12, 15, 18, 24, iyo 30 bilood jir. Waxa intaa ka dambeeya, carruurtu waa inay qaataan ugu yaraan hal baaritaan sannad kasta.

Healthchek ayaa sidoo kale daboosha caafimaadka, aragga, ilkaha, maqalka, nafaqada, korriinka, iyo baaritaannada caafimaadka dabeecada, iyada oo intaa ay u dheer tahay daryeelka kale ee lagu daweeyo jirka, dabeecada ama dhibaatooyinka kale ama xaaladaha laga helo baaritaanka. Qaar ka mid ah adeegyada baaritaannada iyo daaweynta ayaa laga yaabaa inau u baahdaan oggolaansho hore.

Healthchek ayay xubnuhu lacag la'aan heli karaan waxaana ka mid ah:

- Baaritaannada ka hortaga ee carruurta markaa dhasha, ilmaha sabiga ah, carruurta, dhowr-iyo toban jirayaasha, dhallinta qaangaarka ah ee ka yar da’da 21 jirka
- Baaritaannnada Healthchek:
  - Baaritaannada caafimaadka (baaritaannada jireed iyo korriin)
  - Baaritaanka aragga
  - Baaritaannada ilkaha
  - Baaritaannada maqalka
  - Baaritaannada nafaqada
  - Baaritaannada korriinka
  - Baaritaanka leedhka (lead) dhiiga
- Baaritaannada sheybaarka (baaritaano ku haboon da’da iyo jinsiga)
- Tallaallada
- Daba galka caafimaad ahaan loo baahan yahay si loo daweeyo jirka, dhimirka, ama dhibaatooyinka ama xaaladaha kaleba oo marka qofka la baarayo laga helo. Kan waxa ka mid ah, laakiin kuma xaddidno:
  - booqashooyinka lagu tago bixiyaha daryeelka caafimaadka aasaasiga, dhakhtarka takhasuska leh, dhakhtarka ilkaha, indhaha iyo bixiyeyaasha kale ee Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan si ay u baadhaan oo u daweeyaan dhibaatooyinka ama xaaladaha
  - daryeelka isbitaalka ee bukaan-jiifka ama bukaan socodka
  - booqashooyinka rugta caafimaadka
  - daawooyinka dhakhtarku qoro
- Waxbarashada caafimaadka

Aad bay muhiim u tahay in la maro baaritaanada kahortaga ah si ay daryeel bixiyeyaashaadu goor hore u ogaadaan wixii ah dhibaato caafimaad ah ee aad qabto. Hadii sidaa la sameeyo, daryeel bixiyahaagu ayaa daweyn kara dhibaatada, ama kuu gudbin karaa takhasusle si laguu daweeyo, ka hor intaanay dhibaatadu sii xumaan. **Xusuusnow: Adeegyada qaarkood ayaa laga yaabaa inay u baahdaan u-diritaan ka socdo PCP-gaaga ama oggolaansho hore oo ka socda Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan.** Sidoo kale, qaar ka mid ah waxyaabaha ama adeegyada EPSDT, adeeg bixiyahaaga codsan kara oggolaanshaha hore si ay Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan u daboolaan waxyaabaha xadidan ama aan u caynsanayn xubnaha ka weyn 20 sano jir. Fadlan eeg bogagga 24-aad si aad u ogaato adeegyada u baahan gudbinta iyo/ama oggolaansho hore.

Iyada oo qayb ka ah Healthchek, adeegyada maareynta daryeelka aya diyaar u ah dhammaan xubnaha da'doodu ka yar tahay 21 sano ee leh baahiyada daryeel caafimaad ee gaarka ah. Fadlan eeg bogga 36-aad si aad wax dheeraad ah uga u ogaato arrimaha ku saabsan adeegyada maareynta daryeelka ee ay bixiyaan Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan.

(Xubinta) waxaad heli karaan adeegyada Healthchek adigoo:

- Wacaya PCP-gaaga iyo dhakhtarka ilkaha si aad u dhigato ballamaha baaritaannada joogtada ah (iyadoo aad hubinayso inaad codsato Baaritaanka Healthchek marka aad wacdo PCP), ama adigoo
- Wacaya Adeegyada Xubinta ee Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan haddii aad qabto wax su'aalo ah ama u baahan tahay in lagaa caawiyo helitaanka daryeelka, oo ay ku jiraan raadinta bixiye ama qabsashada ballan; adeegyada la daboolo; gaadiid-raaca; oggolaanshaha hore; gudbinta dumarka, dhallaanka iyo caruurta (WIC), Help Me Grow, Bureau for Children with Medical Handicaps (BCMH), Head Start, iyo adeegyada bulsheed sida cuntada, kaalmada kululeynta, iwm.

# Xulashada Daryeel Bixiyaha Asaasiga ah (Primary Care Provider, PCP)

Xubin kasta oo ka mid ah Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan ayaa ah inay ka doortaan daryeel bixiye asaasi ah (Primary Care Provider, PCP) Hagaha Bixiyaha ee Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan. PCP-gaaga ayaa ah dhakhtar shakhsi ah, koox dhakhtarro ah, kalakaaliye caafimaad oo aqoon sare leh ama koox kalakaaliyaa; caafimaad ah oo qaoon sare leh oo ku tababbartay dhalmada/caafimaadka dumarka (OB/GYN), caafimaadka qoyska (caafimaadka guud), caafimaadka carruurta.

PCP-gaaga ayaa kaala shaqayn doona hagida daryeelkaaga caafimaad. PCP-gaaga ayaa samayn doona baaritaannada iyo tallaallada oo kaa dawayn doona inta ugu badan ee baahiyada daryeelka caafimaadka caadiga ah. Haddii loo baahdo, PCP-gaaga ayaa kuu diri doona daryeel bixiyeyaal, takhasusayaal ama ku seexin doona isbitaalka.

Waxaad kala xiriiri kartaa PCP-gaaga adiga oo wacaya xafiiska PCP-ga. Magaca iyo lambarka telefoonka ee PCP-ga ayaa ku daabacan kaarkaaga Aqoonsiga UnitedHealthcare Community Plan.

# Beddelida PCP-gaaga

Haddii aad rabto inaad beddesho PCP-gaaga, waa inaad marka hore wacdaa Waaxda Adeegyada Xubnaha si aad u codsato beddelka. Xubnaha ayaa beddelan kara PCP-gooda bil kasta. Waad beddeli kartaa PCP-gaaga wakhti kasta. Beddelashada PCP-ga ee ah bisha ugu horreysa ee xubinnimada ayaa hirgali doonta taariikhda codsashada. Haddii aad codsato beddelida PCP-ga kaddib bishaada ugu horreysa ee xubinnimada, beddelka ayaa hirgali doono maalinta ugu horreysa ee bisha xigta.

Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan ayaa kuu soo diri doonta kaar Aqoonsi oo cusub si ay kuu ogeysiiso in PCP-gaagi la beddelay iyo taariikhda aad bilaabi karto aragga PCP-ga cusub.

Si aad u hesho magaca PCP-yada ku jira qorshaha UnitedHealthcare Community Plan, waxaad eegi kartaa diiwaankaaga adeeg bixiyaha haddii aad codsatay nuqul daabacan, ama waxaad eegi kartaa mareegtayada ah **www.uhc.com/communityplan/ohio/plans/medicaid/community-plan**, ama waxaad Adeegyada Xubinta ee qorshaha UnitedHealthcare Community Plan Member ka wici kartaa **1-800-895-2017**, TTY **711**. Waan ku faraxsanahay inaan kaa caawino inaad hesho PCP ku jira shabakada oo kugu habboon.

# Adeegyada caafimaadka ee lagu bixiyo khadka

Adeegyada caafimaadka ee lagu bixiyo khadka waa daryeelka caafimaad ee si toos ah loo bixiyo iyadoo la adeegsanayo maqal iyo/ama muuqaal. Beddelkii aad xafiiska u tagi laheyd ballantaada, waxaad joogaysaa gurigaaga ama xafiiskaaga waxaadna isticmaaleysaa taleefankaaga casriga ah, tableetkaaga ama kombiyuutarkaaga si aad u aragto oo aad ula hadasho xirfadleyaashaada caafimaadka iyo habdhaqanka. Ma jiro wax kharash ah oo lagu dalacayo xubnaha Medicaid markay isticmaalaan adeegyada caafimaadka ee lagu bixiyo khadka waxayna adeegyada caafimaadka ee lagu bixiyo khadka meesha ka saarayaan culeyska u baahnaanta adeegyada gaadiidka.

Xubnaha Medicaid waxay iyagoo adeegsanayo adeegyada caafimaadka ee lagu bixiyo khadka u arki karaan xirfadlayaasha caafimaad iyo kuwa habdhaqanka in laga daaweeyo cuduro iyo dhaawacyo badan, xaaladaha caafimaad ee caadiga ah, ballamada daba-galka ah iyo baaritaanada iyo sidoo kale in daawooyin loo qoro.

Ka hubso daryeel bixiyahaaga caafimaad inuu bixiyo adeegyada caafimaadka ee lagu bixiyo khadka.

# Xuquuqdaada xubinimada

Markaad xubin ka tahay Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan, waxaad leedahay xuquuqaha soo socda:

- Inaad hesho dhammaan macluumaadka iyo adeegyada UnitedHealthcare Community Plan ay tahay inay bixiyaan
- In si xurmayn leh laguula dhaqmo iyadoo la eegayo sharftaada iyo asturnaantaada
- In la hubiyo in macluumaadka xogtaada caafimaad laga dhigo kuwa dhowran
- In lagu siiyo macluumaadka ku saabsan arrimaha caafimaadkaaga. Macluumaadkan ayaa laga yaabaa inuu helo qof si sharci ah aad ugu oggolaatay inuu helo macluumaadka ama adigu aad tidhi waa in loo wacaa markay jirto xaalad degdeg ah oo aysan caafimaad ahaan dan kuu ahayn in adiga lagu siiyo.
- Inaad kala qaybqaadato bixiyeyaasha go'aanada ay gaaraayaan ee khuseeya daryeelkaaga caafimaadka

- Inaad karti u yeelato ka qaybqaadashada go'aanada ku saabsan daryeelkaaga caafimaad haddii ay go'aanadu danahaaga ugu wanaagsan ka turjumayaan mooyee
- Inaad hesho macluumaadka dawaynta ee daryeel caafimaad kasta, oo lagugu siiyo hab aad la socon karto
- Inaad hubiso inaysan dad kale ku maqlin ama ku arag markaad heleyso daryeelka caafimaadka
- Inaad xor ka ahaato qaab kasta oo xakamayn ah ama takoor ah oo loo isticmaalo xoog, edbin, u fududayn, ama ka aar-goosasho sida ku qeexan sharciyada federaalka
- Inaad weydiisato, oo aad hesho, nuqul ah diiwaankaaga caafimaad, oo aad karti u yeelato inaad weydiisato in diiwaanka la beddelo/saxo haddii loo baahdo
- Inaad oggolaato ama diido in macluumaadka kugu saabsan la bixiyo in qorshaha UnitedHealthcare Community Plan uu sharci ku qasbayo bixinta macluumaadka mooyee
- Inaad diido daawaynta ama terabiga. Haddii aad diido, adeeg bixiyaha ama qorshaha UnitedHealthcare Community Plan ayaa ah inay kaala hadlaan waxa dhici doona oo ay xusuus-qor arrinta ku saabsan geliyaan diiwaankaaga caafimaad.
- Inaad rafcaan qaadato, cabasho gudbiso ama hesho dhageysiga dacwada ee gobolka. Eeg bogga 47-aad ee buug-gacmeedkan si aad wax dheeri ah u ogaato.
- Si aad dhammaan macluumaadka Xubinta ee ku qoran uga hesho qorshaha UnitedHealthcare Community Plan:
  - Iyada oo aan wax kharash ah kugu kicin
  - Baahsanaanta luqadaha aan ahayn ingiriiska ee xubnaha ka ah goobta adeega ee UnitedHealthcare Community Plan
  - Turjumaada afka ah iyo adeegyada fasiraada
  - Warbixino qoraal ah oo qaabab kale u habeysan
  - Gargaar kale oo degdega ah ama adeegyo loogu talagalay dadka naafada ah
  - Iyada oo siyaabo kale ah, si looga caawiyo baahida gaarka xubnaha laga yaabo in ay dhibayso akhriska macluumaadka sabab kastaba ha ahaatee
- Inaad caawimo lacag la'aan ka hesho qorshaha UnitedHealthcare Community Plan iyo adeeg bixyeyaashooda haddii aadan ku hadlin Ingiriisiga ama aad u baahan tahay caawimaad si aad u fahamto macluumaadka
- Inaad karti u yeelato helitaanka ka caawinta luqadda fara ka hadalka (dhagoolada) haddii maqalka kugu adag yahay
- In laguu sheego haddii uu bixiyaha daryeelka caafimaad yahay arday aadna karti u yeelato inaad diiddo daryeelkiisa
- In laguu sheego wixii daryeel tijaabo ah aadna karti u yeelato inaad diiddo ka qaybgalka daryeelka

- Inaad horey u dardaaranto (dardaaranka qofku intuu noolyahay). Eeg bogga 73-aad si aad wax dheeri ah uga ogaato Dardaaranada Hordhaca ah.
- Inaad u gudbiso Ohio Department of Health cabasho ku saabsan u-hoggaansanaan la'aanta Dardaarankaaga Horudhaca ah
- Xaq ulahaansho lagaga doodayo daaaweyn caafimaad oo lagama maarmaan u ah xaaladahaaga caafimaad, waxba dhib malahan qarash iyo faaido debero
- Xuquuqda bixinta tallooyin ku saabsan xaqa iyo mas'uuliyadaha xubnaha ururka/hay'adda
- Inaad ogaato in MCP uu dib u eegi doono oo uu xallin doono dhammaan cabashooyinka sida ugu dhakhsaha badan ee ay u baahan tahay xaaladda caafimaad ee xubinku. Xalinta cabashooyinka, oo ay ku jiraan ogeysiiska xubinta, waa in la sameeyo gudaha waqtiyada soo socda:
  (a) Laba maalmood gudahood oo maalmaha shaqada kadib markii la helo haddii cabashadu ku saabsan tahay helid la'aanta daryeelka caafimaad
  (b) Soddon maalmood taariikheysan gudahood wixii ah dhammaan cabashooyinka kale marka laga reebo cabashooyinka ku saabsan helitaanka biilka daryeelka aad heshay
  (c) Lixdan maalmood taariikheysan gudahood wixii ah dhammaan cabashooyinka ku saabsan helitaanka biilka daryeel aad heshay
- Si aad ugu beddesho daryeel bixiyahaaga asaasiga ah (Primary Care Provider, PCP) mid kale oo ku jira shabakada qorshaha UnitedHealthcare Community Plan, ugu yaraan bil kasta qorshaha UnitedHealthcare Community Plan waa inay kuu soo diraan qoraal sheegaya qofka bixiyaha cusub (PCP) yahay iyo taariikhda beddelku dhacay
- Inaad xor u ahaato ku dhaqanka xuquuqdaada oo aad ogaato in qorshaha UnitedHealthcare Community Plan, adeeg bixiyeyaasha qorshaha UnitedHealthcare Community Plan ama Waaxda Medicaid ee Ohio aysan arrintan kugu qabsanayn
- Inaad ogaato inay tahay in qorshaha UnitedHealthcare Communnity Plan ay raacaan dhammaan sharciyada federaalka iyo kuwa gobolka, iyo sharciyada kale ee ku saabsan xog-dhowrka ee khuseeya
- Inaad doorato bixiye ku siiya daryeel marka kasta oo ay suurtagal ah ayna habboon tahay
- Haddii qof haween ah aad tahay, inaad karti ugu yeelato inaad u tagto bixiyaha caafimaadka haweenka ee ku jira shabakada qorshaha UnitedHealthcare Community Plan ee loogu talagalay adeegyada caafimaadka haweenka ee caynsan
- In aad isticmaasho isbitaal ama goob kale oo ku haboon adeegyada degdeg ah
- Inaad hesho ra'yi labaad oo aad ka hesho bixiye sharciyeysan oo ku jira shabakada qorshaha UnitedHealthcare Community Plan. Haddii bixiye sharciyeysan uusan ku arki karin, qorshaha UnitedHealthcare Community Plan ayaa ah inay kaaga diyaariyaan booqasho bixiye aan ku jirin shabakadeena.
- Inaad macluumaad ku saabsan qorshaha UnitedHealthcare Community Plan inaga hesho innaga

- Inaad Waaxda Medicaid iyo/ama Xafiiska Xuquuqda Madaniga ah ee Waaxda Dawladda Maraykanka ee Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha kala xiriirto cinwaannada hoosta ku yaal aadna ula xiriirto cabasho kasta oo ku saabsan takoorka ku salaysan qowmiyadda, diinta, jinsiga, nooca galmada, da'da, naafoonimada, asal qarameedka, darajada ciidanka, macluumaadka firka, abtirka, xaaladda caafimaad, ama baahida adeegyada caafimaadka

  Xafiiska Waaxda Medicaid ee Ohio (ODM),
  Xafiiska Shaqaalaha, Xiriirka Shaqaalaha
  P.O. Box 182709
  Columbus, Ohio 43218-2709
  Iimaylka ODM: **EmployeeRelations@medicaid.ohio.gov**
  Fakiska: 614-644-1434

  Xafiiska Xuquuqda Madaniga ee
  Waaxda Dawladda Maraykanka ee Caafimaadka iyo Adeegyada Aadamiga
  233 N. Michigan Ave., Suite 240
  Chicago, Illinois 60601
  Telefoonka: 312-886-2359, TTY 312-353-5693

# Sida aad ugu sheegi karta UnitedHealthcare Community Plan haddii aadan ku qanacsanayn ama aadan oggolayn go'aan annagu aan gaadhnay – Racfaannada iyo cabashooyinka

Haddii aadan ku faraxsanayn qorshaha UnitedHealthcare Community Plan ama adeeg bixiyayaashayada, ama aadan nagu raacsanayn go'aan aanu gaarnay, nala soo xiriir sida ugu dhakhsaha badan. Adiga, ama qof aad rabto inuu kuu hadlo adiga ayaa nala soo xiriiiri kara. Haddii aad rabto inuu qof kuu hadlo, waa inaad annaga noo soo sheegtaa. UnitedHealthcare Community Plan ayaa rabaan inay ku caawiyaan. Si aad noola soo xiriirto, waxaad naga:

- Soo wici kartaa lambarka waaxda Adeegyada Xubinta lambarka **1-800-895-2017**, TTY **711**, ama
- Buuxi foomka ku jira buug-gacmeedka xubinimadaada, ama
- Wac waaxda Adeegyada Xubinta si aad u codsato nuqul daabacan, ama
- Booqo bartayada interneetka ee ku taalo **myuhc.com/CommunityPlan**, ama
- Soo qor waraaq aad noogu sheegeyso waxa aadan ku faraxsanayn. Hubso inaad magacaaga koowaad iyo magacagaaga dambe, lambarka ku qoran dhinaca hore ee kaarkaaga aqoonsiga ee Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan, iyo cinwaankaaga iyo taleefan lambarkaaga ku qorto waraaqda si aan kuula soo xiriri karno adiga, haddii loo baahdo. Waa inaad sidoo kale soo dirtaa wixii macluumaad ah ee annaga naga caawinaya sharaxa dhibaatadaada.

Foomka ama waraaqdaada ugu dir boostada cinwaankan:

UnitedHealthcare Community Plan
Grievances and Appeals
P.O. Box 31364
Salt Lake City, UT 84131-0364

Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan ayaa kuugu soo diri doonta qoraal haddii aan annagu go'aan ku gaarno inaan:

- diidno codsigo ah inaan adiga kuu daboolno adeeg;
- naaqusna, hakino ama joojino adeegyo kahor intaadan adigu helin dhammaan adeegyada la oggolaaday; ama
- diidno lacag bixin loogu talagalay adeeg aad adigu heshay oo aysan daboolin Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan.

Waxaan sidoo kale kuu soo diri doonaa wax qoraal haddii aannaan:

- Gaarin go'aanka ah in la bixiyo caymiska adeeg laguu codsaday, ama
- kaa siinin jawaab wax aad adigu noo sheegtay inaadan ku faraxsanayn.

### Racfaanada

Haddii aadan oggolayn go'aanka/ficilka ku qoran waraaqda, oo aad nagula soo **xiriirto 60 maalmo taariikheed gudahooda** si aad inoo weydiisato inaan beddelno go'aankayaga/ficilkayaga, tani waxaa loo yaqaan **racfaan**. Muddada 60 maalmo taariikheedka ah ayaa bilaabmaysa maalinta ka dambaysa taariikhda ku qoran warqadda. Haddii aan go'aan ku gaarnay inaan naaqusno, hakino ama aan joojino adeegyada kahor intaadan helin adeegyada la oggolaaday dhammaantood, waraaqdaada ayaa kuu sheegi doonta sida aad heli karto adeegyada haddii aad doorato iyo marka laga yaabo inaad bixiso kharashka adeegyada.

Haddii aanan kuu sheegin taariikh ka duwan, waa inaan ku siinaa jawaabqoraal ah  ku saabsan rafcaankaaga 15 maalmo taariikheed gudahood laga bilaabo taariikhda aad nala soo xiriirtay annaga. Haddii aanan beddelin go'aankayaga ama ficilkayaga racfaankaaga ka dib, waan ku ogeysiin doonaa xuquuqdaada ah inaad codsato dacwad-dhageysiga gobolka. **Waxaad kaliya codsan kartaa dhageysiga gobolka ka dib markaad martay geedi-socodka racfaanka Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan.**

### Eed-sheegashada

Haddii aad nala soo xiriirto iyada oo sababtu tahay inaadan ku faraxsanayn arrimo ku saabsan Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan ama adeeg bixiyeyaashayada, tani waxa loo yaqaan **cabasho**. Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan ayaa jawaabta cabashadaada kugu siin doonaan telefoonka (ama boostada haddii aan kugula soo xiriri kari weyno telefoonnka) gudaha muddada soo socota:

- 2 maalmo shaqo wixii ah cabashooyinka ku saabsan helitaan la'aanta daryeel caafimaad
- 30 maalmo taariikheed wixii ah dhammaan cabashooyinka kale marka laga reebo cabashooyinka ku saabsan helitaanka biilka daryeelka aad heshay
- 60 maalmo taariikheed wixii ah cabashooyinka ku saabsan helitaanka biilka daryeelka aad heshay

Haddii aan u baahano wakhti dheeraad ah oo go'aan uga gaarno racfaan ama cabasho midkood, waxaan kuu soo diri doonaa warqad ku ogeysiineysa inaan u baahnahay inaad qaadano 14 maalmood oo dheeraad ah. Warqada waxay sidoo kale sharixi doontaa sababta aan ugu baahanahay waqti dheeraad ah. Haddii aad u maleynayso inaan u baahanahay waqti dheeraad ah si aan go'aan uga gaarno racfaankaaga ama cabashadaada, waxaad sidoo kale na weydiisan kartaa inaad qaadano 14 maalmo taariikheed ah.

Waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad soo gudbiso cabasho **markii aad doonto** adiga oo la xiriiraya:

Waaxda Medicaid ee Ohio
Xafiiska U Hoggaansanaanta iyo
Kormeerka Daryeelka La Maareeyo
P.O. Box 182709
Columbus, Ohio 43218-2709

1-800-605-3040 ama 1-800-324-8680
TTY 1-800-292-3572

Waaxda Caymiska ee Ohio

50 W. Town Street
3rd Floor – Suite 300
Columbus, Ohio 43215

1-800-686-1526

# Foomka cabashada iyo rafcaanka

Magaca Xubinta ________________________________ Lambarka Aqoonsiga ________________

Cinwaanka ______________________________________

Lambarka Telefoonka (Guriga) ______________________ (Shaqada) _________________________

Fadlan u sharax cabashadaada si faahfaahsan adiga oo isticmaala magacyada, taariikhaha, meelaha adeegyada, wakhtiga maalintii iyo arrimaha dhacay. Haddii ay khuseyso, sidoo kale sheeg sababta Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan ay u tahay inay qaddariso lacag bixinta adeegyada aan caadi ahaan la daboolin ee aad weydiisatay. Fadlan foomkan oo dhammeystiran ku soo dir cinwaanka ku qoran hoosta.

______________________________________________________________________________

______________________________________________________________________________

______________________________________________________________________________

______________________________________________________________________________

______________________________________________________________________________

______________________________________________________________________________

______________________________________________________________________________

______________________________________________________________________________

______________________________________________________________________________

______________________________________________________________________________

______________________________________________________________________________

______________________________________________________________________________

(Saxeexa) (Tariikhda)

**UnitedHealthcare Community Plan**
**Grievances and Appeals**
**P.O. Box 31364**
**Salt Lake City, UT 84131-0364**

# Dhegeysiyada Gobolka

Dacwad-dhageysiga gobolka waa kulan idin dhex marayo adiga ama qof ku metelayo, qof ka socda Waaxda Gobolka ee Adeegyada Shaqada iyo Qoyska, qof ka socda qorshaha UnitedHealthcare Community Plan iyo sarkaalka dacwad-dhageysiga oo ka socda Xafiiska Dacwad-dhageysiyada Gobolka ee ka tirsan Waaxda Adeegyada Shaqada iyo Qoyska ee Ohio (ODHFS). Shirkani, waxaad ku sharixi doontaa sababta aad ugu maleynayso in Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan aysan gaarin go'aanka saxda ah waxayna Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan sharixi doonaan sababaha go'aanka ay u gaareen. Sarkaalka dhageysiga ayaa dhageysan doona oo markaa go'aamin doona midka saxan iyadoo lagu saleeynayo sharciyada iyo macluumaadka la bixiyay.

Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan ayaa ku wargalin doonta xaqa aad u leedahay inaad codsato dhegeysi gobol haddii:

- aanan beddelin go'aankayaga ama ficilkayaga racfaankaaga ka dib
- go'aan laga gaaro soo jeedinta diiwaangelinta ama sii wadashada diiwaangelinta Barnaamijka Adeegyada Isku-dubbaridan ee Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan
- go'aan laga gaaray in la diido codsigaaga ah in la beddelo bixiyehaaga Adeegyada Isku-dubbaridan ee Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan

### Waxaad kaliya codsan kartaa dhageysiga gobolka ka dib markaad martay geedi-socodka racfaanka ee Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan

Haddii aad rabto dacwad-dhageysi gobol, adigu ama qofka aad rabto inuu ku matalo waa inaad ku codsataan dhageysi **90 maalmood gudaheed**. Muddada 90 maalmood kalandar ayaa bilaabmaysa maalinta taariikhda ka dambeysa soo diritaanka ee ku yaal foomka dhageysiga. Haddii racfaankaagu ku saabsanaa go'aan lagu naaqusinayo, hakinayo ama aan joojinayo adeegyada kahor intaadan helin adeegyada la oggolaaday dhammaantood, waraaqdaada ayaa kuu sheegi doonta sida aad u heli karto adeegyada haddii aad doorato iyo marka laga yaabo inaad bixiso kharashka adeegyada. Haddii aan soo jeedino inaan kaa diiwaangelino Barnaamijka Adeegyada Isku-dubbaridan ee UnitedHealthcare Community oo aad codsato dhageysiga gudaha 15 maalmo taariikheed laga bilaabo taariikhda soo diritaanka ee ku taal foomaka, anangu kaama diiwaangelin doono barnaamijka ilaa go'aanka dhageysiga la gaaro.

Si aad u codsato dhageysi:

- waxaad saxiixi kartaa foomka dhageysiga gobolka waxaadna ku soo celin kartaa cinwaanka lambarka fakiska ee ku qoran foomka
- Xafiiska Dacwad-dhageysiga Gobolka ka wac 1-866-635-3748
- codsigaga ku soo gudbi onalyn adigoo adeegsanayo barta **https://hearings.jfs.ohio.gov/apps/SHARE/#_frmLogin**
- codsigaga ku soo gudbi imayl adigoo adeegsanayo imaylka **bsh@jfs.ohio.gov**

Haddii aad u baahan tahay macluumaad ku saabsan adeegyada sharci ee lacag la’aanta ah laakiin aadan garanayn lambarka xafiiska gargaarka sharci ee deegaankaaga, waxaad Ururka Adeegyada Gargaarka Sharciga ee Gobolka Ohio ka wici kartaa telefoonka 1-800-589-5888 si aad u hesho lambarka deegaanka.

Go’aanada dhageysiga gobolka ayaa badanaa lagu soo saaraa wakhti aan ka badnayn 70 maalmood taariikheed laga bilaabo marka la helo codsiga. Si kastaba ha ahaatee, haddii MCO ama Xafiiska Dacwad-dhageysiga Gobolka ay go'aamiyaan in xaalada caafimaad ay buuxisay shuruudaha go'aan degdeg ah, Go'aan degdeg ah ayaa la soo saari doonaa sida ugu dhakhsaha badan ee loogu baahan yahay laakiin kama dib dhici doono 3 maalmood oo ah maalmaha shaqada laga bilaabo xiliga codsiga la helo. Go’aannada la soo dedejiyo ayaa loogu talagalay xaaladaha ay muddada go'aan gaaritaanku caadiga ah si daran halis u galineyso naftaada, caafimaadkaaga ama kartidaada helitaanka, haysiga ama dib u helida waxqabadka ugu badan.

# Soo kabashada hantida

Haddii aad si joogto ah xaruun laguu dhigay ama jirto da'da 55 jir ama ka weyn markaad helayso macaashyada Medicaid, barnaamijka Estate Recovery Program ayaa laga yaabaa inuu dib u soo celiyo lacagihii kharashka daryeelkaaga ee ay Medicaid ka bixisay hantidaada. Qarashka daryeelkaaga waxaa laga yaaabaa in ay ka mid yihin lacagta adeega oo ay Medicaid ku bixiso qorshahaaga daryeelka maareeysan, haddii xitaa lacagta adeega ay ka badan tahay qarashka adeegyada aad heshay. **Soo kabaashada hantida keliya waxay dhacadaa kadib geerida qof Medicaaid wax ka qaata.**

# Adeegyada gurmadka

Adeegyada gurmadka waa adeegyo loogu talagalay dhibaatada caafimaad oo aad adigu u maleyso inay yihiin halis markaana u baahan in bixiyaha sida dhakhsaha ugu badan uu u daaweeyo. Waxaan daboolnaa daryeelka gurmadka markaad joogto ama aad ka baxsan tahay degmada aad ku nooshahay labadaba. Tusaalooyin qaarkood oo ka midka ah marka adeegyada gurmadka loo baahan yahay waxa ka mid ah:

- Dhicinta/uurka leh dhiig-baxa xubinta taranka
- Wadno-qabad
- Laab xanuun daran
- Dhiigbax daran oo aan joogsan.
- Neefsi la’aan daran
- Faalig suurtagal ah
- Caafimaadka maskaxda: Halista isdilitaanka, dilka badheedhka ah ama is-dhaawaca, khalkhal ama waalli u baahan daryeel caafimaad degdeg ah.

### Xaalad caafimaad oo degdeg ah

Xaalada caafimaadka ee degdega ah waa xaalad caafimaad oo iyada laftigeed isku muujinaysa calaamado qatar ah oo aad u daran (oo ay ka mid tahay xanuun aad u daran) sida qof caqli gal ah, oo aqoon dhexdhexaad u leh caafimaadka iyo daawada, ayaa si macquul ah u filan kara maqnaashaha daryeel caafimaad oo degdeg ah si ay u dhaliso mid ka mid ah waxyaabahan soo socda: meelaynta caafimaadka shaqsiga (ama, iyada oo la eegayo haweeneyda uurka leh, caafimadka haweenka ama canugeeda aan weli dhalanin) khatar weyn ku jirto; waxyeelo daran oo ku timaada shaqada jirka; ama shaqo la'aan daran oo ku timaada mid ka mid ah xubnaha jirka.

### Adeegyada xasilinta kadib

"Adeegyada daryeelka xasilinta kadib" waxaa macnaheedu yahay adeegyada la deberay ee la xiriira xaalad caafimaad oo degdeg ah oo midka adeeg bixiyaha uu u arko in caafimaad ahaan lagama maarmaan ay tahay kadib xaalada caafimaad ee degdega ah la xasiliyay si loo sii joogteeyo xaaladii la xasiliyay, ama duruufaha hoos yimaada ee lagu qeexay 42 C.F.R. 422.113 (October 1, 2019) si loo hagaajiyo ama loo xaliyo qofka xaaladiisa.

Ma aha inaad ula soo xiriirto UnitedHealthcare Community Plan inay oggolaansho ku siisa intaadan helin adeegyada gurmadka kahor. Ogolaansho hore looguma baahna adeegyada degdeg ah. Haddii aad kujirta xaalad gurmad ah, wac 911 ama tag qolka gurmadka (ER) ee KUUGU DHOW ama goobaha kale ee daryeelka ee habboon.

Haddii aadan hubin inaad tagto qolka gurmadka iyo in kale, ka wac daryeel bixiyahaaga asaasiga ah ama Khadkayaga Adeegyada ah 24/7 NurseLine halkan 1-800-542-8630 (TTY 1-800-855-2880). PCP-gaaga ama wakiilka Khadka Kalkaaliyaasha ee shaqeeya 24/7 (Nurseline) ayaa kaala hadli doona dibaatadaada caafimaad oo kaa siin doona wixii talo ah ee aad samayn lahayd.

Xusuusnow, haddii aad u baahato adeegyada gurmadka:

- Tag qolka gurmadka isbitaalka kuugu dhow ama goob kale oo ku habboon. Xaqiiji inaad u sheegto iyaga inaad xubin ka tahay Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan oo tus kaarkaaga aqoonsiga Xubinta ee qorshaha UnitedHealthcare Community Plan.
- Haddii bixiyaha daaweeyo xaaladaada gurmadka ah, u maleeyo inaad u baahan tahay daryeel kaloo caafimaad si loo daaweeyo dhibaatada keentay xaalada gurmadka ah, daryeel bixiyuhu waa inuu u wacaa qorshaha UnitedHealthcare Community Plan
- Waxaad u baahan doontaa inaad wacdo Daryeel Bixiyahaaga Aasaasiga ah sida ugu dhaqsaha badan ee suurtagalka ah kadib marka xaalada gurmadka la dejiyo
- Haddii u isbitaalku ku jiifiyo, fadlan hubi in qorshaha UnitedHealthcare Community Plan la soo waco 24 saacadood gudahooda

# Daawaca ama jirrada shil ahaan ku yimid (kharash-soo-ceshiga)

Haddii Xubin Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan ay tahay inuu u arko dhakhtar dhaawac ama jirro uu sababay qof kale ama ganacsi kale, waa inaad wacdaa Waaxda Adeegyada xubinta si aad noogu sheegto. Tusaale ahaan, haddii aad ku dhaawacanto shil baabuur, eey ku qaniino, ama haddii aad ku dhex dhacdo dukaan oo waxyeello kugu timaado markaas caymis kale ayaa laga yaabaa inay tahay inuu bixiyo biilka daryeelka ama adeegyada lagu siiyay. Markaad ina soo wacdo inoo sheeg magaca qofka dhibka keenay, shirkaddooda caymis iyo magac-a(yacda) qareenada ku lug leh arrinta.

# Caymiska caafimaad ee kale (Isku–Duwidda Dheefaha – COB)

Haddii adiga ama qof kale oo ka tirsan qoyskaagu uu ku leeyahay caymis caafimaad shirkad kale, <u>aad ayay muhiim u tahay</u> inaad Waaxda Adeegyada Xubnaha iyo shaqaalaha kiiskaaga degmada u wacdo arrimaha ku saabsan caymiska. Tusaale ahaan, haddii aad shaqeyso oo aad leedahay caymis caafimaad ama carruurtaadu leedahay caymis caafimaad iyaga oo maraya waalidkooda kale, markaa waxaad u baahan tahay inaad wacdo Adeegyada Xubinta si aad noo siiso macluumaadka. Sidoo kale waa muhiim inaad wacdo Adeegyada Xubinta iyo shaqaalaha kiiskaaga kaawtiga haddii aad u lumisay caymiska caafimaad ee aad horay uga warbixsay. Bixis la'aanta macluumaadkan ayaa dhibaatooyin ku keeni karta helitaanka daryeelka iyo bixinta biilasha caafimaadka.

# Ogeysiiska luminta caymiska (Shahaadada caymiska la aamini karo)

Mar kasta oo aad lumisa caymiska caafimaadka, waa inaad heshaa ogeysiis, loo yaqaan shahaadada caymiska la aamini karo, oo ka socdo shirkaddadi hore ee caymiska. Ogeysiiskan wuxuu sheegayaa inaadan wixii hadda ka dambeeya aadan laheyn caymis. Waa muhiim inaad nuqul ah ogeysiiskan u haysato diiwaankaaga sababta oo ah waxa laga yaabaa in lagu weydiiyo inaad dhiibto nuqulkan.

# Luminta u-qalmitaanka Medicaid

Waa muhiim inaad oofiso ballamahaaga aad la leedahay Waaxda Kaawntiga ee Adeegyada Shaqada iyo Qoyska. Haddii aad tagi weydo ballan ama aad siin weydo macluumadka ay u

baahan yihiin, waxa laga yaabaa inaad weydo u mutaysigaaga Medicaid. Haddii sidani dhacdo, Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan ayaa loo sheegi doonaa inay joojiso xubin ka ahaantaada Medicaid markaa wixii ka dambeeyana ma lihid caynsanaanta Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan.

# Dib-u-cusboonaysiinta otomaatiga ah ee xubinnimada MCP

Haddii aad lumiso u-qalmashadaada Medicaid laakiin ay mar kale kuugu bilaabanto 90 maalmood gudahood, adigu waxaad si otoomaatig markale u noqon doontaa xubin ka mid ah Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan.

# Joojinta xubin ka ahaantaada Qorshaha Daryeelka Maareysan (MCP)

Markaad xubin ka tahay qorshaha daryeelka maareysan, waxaad xaq u leedahay inaad doorato inaad iska joojiso xubinimada wakhtiyada qaarkood inta lagu jiro sannadka. Waxaad dooran kartaa inaad joojiso xubinimadaada inta lagu jiro saddexda bilood ee ugu horeeya ee xubinnimadaada ama inta lagu jiro bisha isqoritaanka furan yahay ee sanadlaha ah. Waaxda Medicaid ee Ohio ayaa wax kuugu soo diri doonta boostada si ay kuugu sheegto markay noqon doonto bisha is-qoritaanka furan yahay ee sannadlaha ah. Haddii aad ku nooshahay agagaar uu kajiro is-qoritaanka waajibka ah, waa inaad doorataa urur kaloo bixiya daryeel maareysan si ay u bixiyaan caymiska daryeelkaaga caafimaad.

Haddii aad rabto inaad joojiso xubinimadaada inta lagu jiro saddexda bilood ee ugu horeeya xubinnimadaada ama inta lagu jiro bisha is-qoritaanka furan yahay ee sanadlaha ah, waxaad ka wici kartaa Khadka Furan ee Medicaid adigoo adeegsanayo lambarka 1-800-324-8680; TTY: 1-800-292-3572. Waxaad sidoo kale codsi ku gudbin kartaa Khadka Furan ee barta internetka Medicaid ee **www.ohiomh.com**. Haddii aad na soo wacdo kahor 10-ka maalmood ee ugu dambeeya bisha, xubinimadaada ayaa joogsan doonta maalinta ugu horreysa ee bisha xigta. Haddii aad soo wacdo wakhtigan waxa ka dambeeya, xubin ahaantaada ayaan joogsan doonin illaa maalinta ugu horreysa ee bisha soo socota. Haddii aad doorato urur kaloo bixiya daryeel maaraysan, ururkaaga daryeelka maareeysan ee cusub ayaa kuugu soo diri doona macluumaad boostada kahor taariikhda bilowga xubinnimadaada.

### Doorashada qorshe cusub

Haddii aad ka fikireyso inaad iska joojiso xubinimadaada si aad ugu beddelato urur kaloo bixiya daryeel maaraysan (MCO), waa inaad ogaataa wax ku saabsan xulashooyinkaaga, khaas ahaan

haddii aad rabto inuu sii joogo dhakhtarkaaga (dhakhaatiirtaada) aad hadda ku xiran tahay. Xusuusnow, MCO kasta wuxuu leeyahay liiskiisa dhaqaatiirta iyo isbitaaladiisa u gaarka ah ee ka mid ah shabakada. Waxaa intaas dheer, MCO kasta wuxuu hayaa macluumaad qoran oo sharaxaya waxtarrada ay bixiyaan iyo xeerarka u degsan. Haddii aad jeclaan lahayd macluumaad qoran oo ku saabsan ururka daryeelka maaraysan ee aad ka fikireyso inaad ku biirto ama haddii aad qabto su'aalo ku saabsan MCO-ga, waxaad soo wici kartaa qorshaha ama waxaad soo wici kartaa Khadka Furan ee Mediaid adigoo adeegsanayo lambarka 1-800-324-8680; TTY 1-800-292-3572. Waxaad sidoo kale heli kartaa macluumaad ku saabsan MCO-yada aaggaaga jooga adigoo booqanayo mareegta Medicaid ee ah **www.ohiomh.com**.

### Iska joojinta xubin ka-mid ahaanshaha sabab kaliya

Mararka qaarkood waxa jiri karta sabab gaar ah oo aad ugu baahan tahay inaad joojiso qorshaha xubinimadaada. Tani waxa loo yaqaan joojinta "sabab kaliya" joojinta xubin ka-mid ahaanshaha. Kahor intaadan weydiisan iska joojinta xubinimada sababta leh, waa inaad marka hore wacdaa UnitedHealthcare Community Plan oo aad na siisa fursad aan ku xallino arrinta. Haddii aanan xallin karin arrinta, waxaad weydiisan kartaa joojin ku salaysan cadaalad wakhtigii aad doonto haddii aad haysato sababaha soo socda midkood:

1. Haddii aad guurto oo MCO-gaaga hadda jira aan laga heli karin meesha aad hadda ku nooshahay aadna u baahato inaad aagaaga cusub ka hesho daryeel caafimaad oo aan degdeg ahayn ka hor inta aysan xubinimadaada MCO-ga dhammaanin.
2. Haddii MCO-gu ma daboolo, iyadoo lagu salaysanayo arrimo ansheed ama kuwa diimeed, adeegga caafimaad ee aad u baahan tahay.
3. Haddii dhakhtarkaagu sheegay in adeegyada caafimaad ee aad u baahan tahay qaarkood ay tahay in isku mar la qaato oo dhammaan adeegyada aan laga heli karin MCO-yada ku jira shabakadda.
4. Haddii aa qabto walaac ah inaadan heleynin daryeel tayo leh oo adeegyada aad u baahan tahay aan laga heli karin bixiye kale oo ku jira sabakadda qorshaha UnitedHealthcare Community Plan.
5. Haddii aadan heli karin adeegyada caafimaad ee lagama maarmaanka ah ee Medicaid hoos yimaada ama aadan heli karin bixiyeyaal khibrad u leh inay wax ka qabtaan baahiyadaada daryeelka caafimaad ee qaaska ah.
6. Haddii PCP-ga aad dooratay uusan kujirin shabakadda qorshahaaga UnitedHealthcare Community Plan oo kaasi uu ahaa keliya PCP-ga ku jiray shabakadda kuna hadla luqadaada lagana helayay masaafo kuu dhow adiga; ama qorshe kale ay leeyihiin PCP ku jira shabakadooda kaasoo ku hadla luuqadaada lagana heli karo masaafo kuu dhaw uuna kuu aqbali doonaa bukaan ahaan.
7. Haddii aad u maleyneyso in xubin ka ahaanshaha qorshahaaga caafimaad ee hadda jira uu adiga waxyeello kuu leeyahay uuna ka turjumeynin danahaaga ugu wanaagsan.

Waxaad weydiisan kartaa iska joojinta xubin ka ahaantaada adiga oo ka wacayo Khadka Furan ee Medicaid telefoonka 1-800-324-8680; TTY 1-800-292-3572. Waaxada Medicaid ee Ohio (Ohio

Department of Medicaid) ayaa dib u-eegi doonta codsigaaga oona go'aamin doonta haddii aad buuxisay mid ka mid ah sababaha joojinta ku salaysan cadaalada. Waxaad boostada ku heli doontaa waraaq kuu sheegeysa in Waaxada Medicaid ee Ohio ay joojin doonto xubinimadaada iyo in kale iyo taariikhda ay xubinimadaada dhammaan doonto. Haddii aad ku nooshahay agagaar waajib ay tahay in la is-qoro, waa inaad doorataa qorshe kale si aad u hesho daryeel caafimaad in Waaxada Medicaid ee Ohio ku farto si sidaa ka duwan mooyee. Haddii codsigaaga iska joojinta la diido, Waaxada Medicaid ee Ohio ayaa kuu soo diri doonta macluumaad kuu sharaxya xaqaaga dhageysiga goboleed ee loogu talagaly rafacaan ka qaadashada go'aanka.

### Waxyaabaha ah inaad xasuusnaato haddii aad joojiso xubin ka ahaantaada

Haddii aad raacday tallaabooyinka korka yaal mid ka mid ah si aad u joojiso xubinimadaada, xusuusnow:

- Inaad sii isticmaasho dhakhaatiirta Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan iyo bixyeyaasha kale illaa maalinta aad qorshahaaga caafimaad ee cusub xubin ka noqoneyso ama aad ku noqoto Medicaid-ka caadiga ah
- Haddii aad doorato MCO cusub oo aadan helin kaarka aqoonsiga Xubinta kahor maalinta ugu horreysa ee bisha aad xubin ka noqoto qorshaha cusub, wac Waaxda Adeegyada Xubinta qorshaha ee Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan. Haddii ayna iyagu ku caawin karin, wac Khadka Furan ee Medicaid 1-800-324-8680; TTY 1-800 292-3572.
- Haddii laguu oggolaaday inaad ku soo noqoto kaarka Medicaid-ka caadiga ah oo aadan helin kaarka cusub ee Medicaid, wac shaqaalaha kiiskaaga ee degmada
- Haddii aad dooratay MCO cusub oo aad leedahay booqashooyin caafimaad oo jadwaleeysan, fadaln wac qorshahaaga cusub si aad u xaqiijiso inay bixiyeyaashani ku jiraan shabakadda bixiyeyaasha ee qorshaha cusub iyo in laga shaqeeyay dukumeentiyo kastoo loo baahan yahay. Tusaalooyinka qaar ee marka ay tahay inaad wacdo qorshahaaga cusub waxa ka mid ah: **markaad leedahay ballan aad ku aragto dhakhtar cusub, qalliin, baaritaan dhiig ama raajato ballan loo qabtay iyo khaas ahaan haddii aad uur leedahay.**
- Haddii laguu oggolaaday inaad ku noqoto Medicaid-ka caadiga ah oo ballamo aad u leedahay booqashooyin caafimaad, fadlan wac bixiyeyaasha si aad hubiso inay oggolaanayaan kaarka Medicaidka ee caadiga ah

### Joojinta xubin ka mid ahaanshaha ee ikhtiyaariga ah

Waxaad leedahay iqtiyaarka ah inaadan xubin ka noqoto urur bixiya daryeelka maaraysan (MCO) haddii:

- aad xubin ka tahay qabiilka Hindida ee dowladda federaalka aqoonsan tahay, iyada oo aan la egayn da'daada
- aad tahay shaqsi hela adeegyada ka-dhaafka hoyga iyo bulshada ku salaysan ee loo maro Waaxda Ohio ee Naafanimaada Kobcitaanka

Haddii aad aamminsan tahay inaad adiga ama ilmahaagu buuxiseen shuruucda kore midkood oo aadan rabin inaad xubin ka noqoto urur bixiya daryeelka maareysan, waad wici kartaa Khadka Furan ee Medicaid ee ah 1-800-324-8680 (TTY 1-800-292-3572). Haddii aad buuxisay shuruudaha kor ku yaal oo aadan rabin inaad xubin ka noqoto MCO, xubinimadaada ayaa la joojin doonaa.

**Ka-reebitaannada — Shaqsiyaadka aan loo oggolayn inay ka mid noqdaan MCO-ga Medicaid. Waxaal laga yaabaa in aan laguu ogolaanin in aad ku biirto ururka daryeellka maareeysan ee Medicaid (MCO) haddii aad tahay:**

- Qof u-qalma barnaamijyada Medicaid iyo Medicare labadaba;
- Dadka Ku Jira Goobaha Daryeelka (ku jira goobta xannaanada aana u qalmin qaybta Adult Extension, xarunta daryeelka muddada dheer, xarunta daryeelka ee dhexdhexaadka ah ee loogu talagalay shakhsiyaadka qaba naafanimada garashada (ICF/IID), ama xarun kasta oo kale); ama
- Kuwa hela Adeegyada Ka Dhaafka Medicaid ee aan ugu qalmin markay marka loo eego qaybta U Fidinta Qaangaadhka.

  * Haddii aad Medicaid ugu qalantid qeybta U-Fidinta Qaangaarka, waxaad heli doontaa adeegyadaada goobta xanaanada iyadoo loo marayo Ururka Daryeelka ee Maaraysan. Intaa waxaa dheer, xubnaha U-fidinta Qaangaarka ee loo ansixiyay adeegyada ka dhaafida waxay ku hari doonaan Ururka Daryeelka Maaraysan.

Haddii aad aaminsan tahay inaad buuxisay mid ka mid ah shuruudaha kor ku qoran ayna tahay in aadan xubin ka noqon Ururka Daryeelka Maaraysan, waa in aad soo wacdo Khadka furan ee Medicaid ee ah 1-800-324-8680 (TTY 1-800-292-3572). Haddii aad buuxiso shuruudda kore, xubinimadaada MCO ayaa la joojin doonaa.

**Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan Miyay joojin kartaa xubinnimadayda?**

Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan ayaa laga yaabo inay weydiisato Waaxda Medicaid ee Ohio inay joojiso xubin ahaantaada sababaha qaarkood awgood. Waaxda Medicaid ee Ohio waa inay oggolaataa codsiga kahor inteyna xubin ahaantaadu joogsan.

Sababaha Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan ay u codsan karto joojinta xubin ahaantaadu waa:

- Markay jirto been-abuur am ku xadgudubka kaarkaaga aqoonsiga ee Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan
- Markay jirto dabeecad carqalad ama wada-shaqayn-la'aan abuuri karta illaa heer ay saameyneyso kartida MCO-ga inuu awoodi waayo idin ku siiyo adeegyada adiga ama xubnaha kale

**Buug-gacmeedka Xubinta ee Waaxda Medicaid ee Ohio.**

---

Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan ayaa siisa adeegyo xubnayaashayada iyadoo sababtu tahay qandaraaska ay Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan la qaadatay Waaxda Medicaid ee Ohio. Haddii aad rabto inaad la xiriirto Waaxda Medicaid ee Ohio, waxaad wici kartaa ama u qori kartaa:

Waaxda Medicaid ee Ohio
Xafiiska Daryeelka La Maareeyo
Xafiiska U Hoggaansanaanta iyo Kormeerka Daryeelka La Maareeyo
P.O. Box 182709
Columbus, Ohio 43218-2709

Taleefonka: 1-800-324-8680
TTY: 1-800-292-3572

Waxaad sidoo kale ka booqan kartaa Ohio Department of Medicaid mareegta ku taala barta **www.medicaid.ohio.gov**.

Waxaad la xiriri kartaa UnitedHealthcare Community Plan si aad u hesho macluumaad kasta oo kale oo aad rabto ee ay ka midka yihiin qaab-dhsimeedka iyo hawl-socodsiinta UnitedHealthcare Community Plan iyo sida aan lacagta u siino bixiyeyaashayada. Haddii aad rabto inaad noo sheegto waxyaabaha aad u maleyneyso inay tahay inaan beddelno, fadlan ka soo wac Waaxda Adeegyada Xubnaha lambarka **1-800-895-2017**, TTY **711**.

# Jadwalka adeegyada Medicaid

## Adeegyada hoos yimaada UnitedHealthcare Community Plan

Xubin ka tirsan UnitedHealthcare Community Plan ahaan, waxaad heli doontaa dhammaan adeegyada caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah ee hoos yimaada adeegyada Medicaid iyadoo aan wax kharash ah adiga kugu kicin. Adeegyada caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah ee aad ugu baahan tahay kahortaga, ogaanshaha, ama daaweeynta xaalad caafimaad.

Haddii aad qabto wax suaalo ah oo ku saabsan faaidooyinkaaga, fadlan la hadal PCP ama wac xubinta adeegyada **1-800-895-2017**, TTY **711**. Waxaad sidoo kale gali kartaa **myuhc.com/CommunityPlan** waxaadna ka hoos raadin kartaa “Benefits” ama isticmaal ablikeesinka UnitedHealthcare si aad wax badan uga ogaato faaidooyinkaaga.

| Adeegga | Caynsanaanta |
|---|---|
| **Daloolino lagu daaweynayo cudurada/xaaladaha qaar** | Ka caymisan maareynta madax xanuunka iyo dhabar xanuunka. Waxaa jira xaddidaad ah 30 booqasho haddii aysan caafimaad ahaan lagama maarmaan aheyn. |
| **Adeegyada Xasaasiyadaha** | Caymisan |
| **Ambalaas iyo gaadiidka qaada gaari curyaanka** | Ka caymisan xaaladaha gurmadka degdega ah marka hawada lagu jiro ama laga baxsan yahay labadaba. |

| Adeegga | Caynsanaanta |
|---|---|
| **Adeegyada caafimaadka hab-dhaqanka, daaweynta caafimaadka maskaxda iyo xanuunnada isticmaalka maandooriyaha** | Caymisan; wac Adeegyada Xubinta si aad u hesho xarun/bixiye u-qalma ama si toos ah ugu hagaag xarumaha caafimaadka maskaxda ama xarumo dawaynta kaansrka ka sharciyeysan Waaxda Caafimaadka Maskaxda iyo Adeegyada Caadaysiga Ohio (OhioMHAS).<br>**Sida loola xiriiro khadka 24 saac furan ee dhibaatada caafimaadka habdhaqameed**<br>Sidoo kale inaga ayaad na soo wici kartaa haddii ay dhibaato ku haysato. Qof ayaa islamarkaaba la hadli kartaa waxaana kaa caawin karnaa inaad hesho daryeelka aad u baahan tahay. Soo wac khadkayaga dhibaatada caafimaadka habdhaqameed ee 24 saac furan ee ah 877-542-9236. Wicitaankan waa bilaash. Khadadka Dhibaatada Caafimaadka Habdhaqameed waxaa la heli karaa 24 saacadood maalintii, 7-da maalmood ee usbuuca, 365-ta maalmood ee sanadka.<br>Barnaamijyada daawada Opioid-ka: oo ay ka mid tahay daawo si caafimaad leh loo taageeray (Medically Assisted Treatment, MAT) oo ay ka mid tahay Suboxone, Buprenorphine, iyo Methadone.<br>• Daaweynta Qeexan ee Dhimirka Bulshada (Assertive Community Treatment, ACT) ee loogu talagalay xubnaha ah 18 jir iyo ka weyn<br>• Daaweynta Xoogan ee Dhimirka ee Gudaha Guriga (Intensive Home Based Treatment, IHBT). Adeegan waxaa loogu talagalay shaqsiyaadka da'doodu tahay 18 jir ama ka yar; si kastaba ha ahaatee, mararka qaarkood waxaa heli kara xubnaha da'doodu tahay 18–21 jir.<br>• Daaweynta dhameystiran ee caadaysika, ay ku jiraan adeegyada si buuxda ama qabyo u seexinta isbitaalka |
| **Adeegyada Kalkaalisada Ummulisada ah ee Sharciyeysan** | Caymisan |

| Adeegga | Caynsanaanta |
|---|---|
| **Adeegyada Kalkaaliyaha Caafimaadka ee Sharciyeysan** | Caymisan |
| **Adeegyada kiimoterabiga** | Caymisan |
| **Adeegyada Kirobratiigga (dhabarka)** | Caymisan; 30 booqashooyin sannadkiiba oo loogu talagalay xubnaha da'doodu ka yar tahay 21 haddii aysan caafimaad ahaan lagama maarmaan aheyn. 15 booqashooyin sannadkiiba oo loogu talagalay xubnaha da'doodu tahay 21 ama ka weyn. |
| **Adeegyada ilkaha** | Caymisan; laba baaritaan iyo laba nadiifin sannadkiiba, Raajada, buuxinta, siibista fudud, ilkaha caaga buuxa ama bar-dhimanka ah, suuxinta guud iyo habraaca (ilkaha hore) ilkaha. Habraacyada qaarkood waxay u baahan yihiin oggolaansho hore. |
| **Adeegyada terabiga kobaca ee loogu talagalay carruurta da'doodu ka bilaabanto dhalashada illa 6 sano jirka** | Caymisan; waxa laga yaabaa in loo baahdo oggolaansho hore. |
| **Adeegyada baaritaanka cudur (raajada, shey-baarka)** | Caymisan; Baaritaanka cuddurada iyo Baaritaanka Sheybaarka ka caynsan bixiyaha hawsha oggol. Baaritaanada qaarkood ayaa u baahan kara oggolaansho hore. |

| Adeegga | Caynsanaanta |
|---|---|
| **Qalab caafimaad oo raagaya ( tusaale ahaan bambada naaska, boorsooyinka keydiya caanaha naaska, walxaha lagu socodo, dhiig karka)** | Sheeyaasha DME badankooda oo qiimahoodu ka hooseeyo $500 waxaa lagu dabooli/caymin doonaa daawo qoritaan oo loo diro iibiye ka qaybqaate ah.<br>• Ka-reebinaanada ayaa lagu dabaqi karaa, ka tixraac shabakada oggolaanshaha DME.Burukada ma ahan adeegga la daboolo.<br>– Shabakada ku jira: Mashiinka naas liska ayaa DME ahaan loo daboolaa/caymiyaa.<br>Loogama baahna wax oggolaansho ah bixiyeyaasha DME ee Shabakada ka Tirsan.<br>– Shabakadda-Ka Baxsan: Oggolaansho ayaa loo baahan yahay. |
| **Adeegyada gurmadka** | Caymisan; adeegyo loogu talagalay dhibaato caafimaad oo aad adigu u maleyso inay tahay mid aad u daran markaana u baahan in uu dhakhtarka si dhakhso ah u daaweeyo. |
| **Adeegyada iyo waxyaabaha loo bixiyo qorsheynta qoyska** | Caymisan |
| **Adeegyada Xarumaha Caafimaad ee ay Fasaxday Dowladda Federaalka (Federally Qualified Health Center, FQHC) ama Rugaha Caafimaadka Miyiga (Rural Health Clinic, RHC)** | Caymisan |
| **Adeegyada xarunta dhalmada ee gaar-u-oolka ah ee laga helo xarunta dhalmada ee gaarka ah** | Wac Adeegyada Xubnaha si aad u hesho rug caafimaad oo la ansixiyay oo ku taalo gudaha Ohio. |

| Adeegga | Caynsanaanta |
|---|---|
| **Adeegyada cudurada haweenka (OBGYN)** | Caymisan |
| **Adeegyada caafimaadka ee guriga** | Caymisan; waxaa loo baahan karaa oggolaansho hore. |
| **Daryeelka goobta xanaanada bukaanka** | Oggolaasho hore ayaa looga baahan yahay qolka iyo qolka shirka. |
| **Adeegyada isbitaalka ee bukaan-jiifka.** | Oggolaasho hore ayaa looga baahan yahay dhigita la doortay. |
| **Daryeelka hooyada iyo dhallaanka — kahor iyo kadib ummulitaanka oo ay ku jiraan adeegyada uurka halista ku jira** | Caymisan |
| **Adeegyada daaweynta nafaqada (Medical Nutrition Therapy, MNT)** | Caymisan |
| **Sheyda loo isticmaalo Caafimaadka** | Caymisan; waxaa loo baahan karaa oggolaansho hore. |
| **Adeegyda xarunta kalkaalinta caafimaad** | Qorshaha wuxuu daboolayaa joogitaanka xubnaha illaa Waaxda Ohio ee Medicaid go'aansato in xubinta ku laabaneyso bixi khidmad si aad u hesho adeeg ee Medicaid iyo haddii xubinta u baahantahay adeegyada nuujinta, waa inay soo wacaan qorshaha si ay u helaan warbixin dheeraad ah oo ku saabsan bixiyayaasha la heli karo. |
| **Adeegyada isbitaalka ee bukaan-socodka** | Caymisan |

| Adeegga | Caynsanaanta |
|---|---|
| **Adeegyada farmashiyoolaha (Faaidada ku jirta caafimaadka)** | Caymisan |
| **Baxnaanaynta (terabiga) jirka iyo shaqada** | Caymisan |
| **Jir baaritaan loogu baahan shaqada ama loogu talagalay ka qaybgalka barnaamijyada tabbarka shaqada** | Caymisan haddii aan baaritaanka ayna ku bixin lacag la'aan il kale. |
| **Adeegyada dhakhtarka** | Caymisan |
| **Adeegyada xannaanada lugaha (cagaha)** | Ku caymisan gudaha shabakada — Loogama baahna wax oggolaansho hore ah booqashooyinka, habraacyada qaarkood ayaa u baahan kara oggolaansho hore. PCP-yada Gold Star — Oggolaansho hore looma baahno. |
| **Baaritaannada raajada naaska (maamogaraam), baaritaanada kansarka naaska iyo afka ilmo-galeenka** | Caymisan |
| **Adeegyada bixiyaha daryeelka hore** | Caymisan |
| **Raajada (MRI, CT iyo daraasada nukliyeerka)** | Caymisan; waxaa loo baahan karaa oggolaansho hore. |
| **Kaadi-saarista (adeegyada cudurka kelyaha)** | Caymisan |

| Adeegga | Caynsanaanta |
|---|---|
| **Adeegyada nasinta** | Caymisan:<br><br>Shuruudaha Xaq-u-yeelashada Dheefaha Nasiinta<br>Waaxda Medicaid ee Ohio waxay u sameeysay sharciyo dheefahan, ay ka mid yihiin:<br><br>• Kula nool guriga ama duddada daryeel bixiyihiisa/daryeel bixiyaheeda aasaasiga ah ee lacag la'aanta ah. Aan ku jirin xanaannada korrinta.<br>• Waa inuu la shaqeynayo maareeyaha Qorshaha daryeelka<br>• U baahan adeegyada xirfadlaha ugu yaraan hal mar toddobaad walba<br>• Ugu yaraan 14 saacadood toddobaad walba helay adeegyada kalkaaliyaha caafimaadka guriga ee ugu yaraan socday lix bilood ka hor codsashada adeegyada nasiinta<br>• Adeegga waxaa loogu talagalay xubnaha da'doodu ka yar tahay 21 jir ee qaba baahiyada LTC ama BH<br>• Xubanaha da'doodu tahay 21 iyo ka weyn: aan caymisneyn |
| **Adeegyada nasinta (sii socda)** | Shuruudaha u-qalmida faa'iidada nasinta caafimaadka habdhaqanka:<br><br>Waaxda Medicaid ee Ohio waxay u sameeysay sharciyo dheefahan, ay ka mid yihiin:<br><br>• In ugu yaraan 14 saacadood toddobaadkii u baahnaa adeegyada kaaliyaha caafimaad ee guriga taas oo socotay ugu yaraan LABO bilood oo isku xiga kahor taariikhda adeegyada nasinta la codsaday<br>• In daryeelaha xubinku uu ubaahan yahay in si kumeelgaar ah looga qaado daryeelka Xubinta taasi oo ay ugu wacan tahay LTSS-ka ama baahiyaha caafimaadka habdhaqanka ee xubinku, ama si looga hortago in xubinku noqdo bukaan-jiif, la dhigo xarun, ama uu joogo meel ka baxsan guriga<br>• In laga helo khalkhal xagga shucuurta ah oo aad u daran kaasi oo keenayo naafonimo waxqabad<br>• In uusan oo bandhigayn astaamo ama dhaqamo muujinaya halista is-waxyeelaynta ama waxyeelaynta dadka kale oo dhab ah |

| Adeegga | Caynsanaanta |
|---|---|
| **Ka eegidda iyo la talinta cayilidda xad dhaafka ah** | Caymisan |
| **Adeegyada carruurta leh curyaanimada caafimaad (Qodobka V)** | Caymisan |
| **Durista (Tallaalada)** | Caymisan |
| **Adeegyada dhakhaatiirta takhasuska leh** | Waxay ku caynsan yihiin shabakadda xaaladaha ugu badan |
| **Adeegyada hadalka iyo maqalka, oo ay ku jiraan maqal gargaarayaasha** | Caymisan |
| **Adeegyada fogaan-aragga ee caafimaadka** | La Daboolo; xirfadlayaasha caafimaad iyo kuwa habdhaqanka ee loo maro khadka fogaan-aragga ah ee daaweeyo cuduro iyo dhaawacyo badan, xaaladaha caafimaad ee caadiga ah, ballamada daba-galka ah iyo baaritaanada iyo sidoo kale in daawada(daawooyinka) dhakhtarku qoro. |
| **Adeegyada joojinta tubaakada** | Oo ay ka mid tahay gollaha joojinta tubaakada iyo daawooyinka la ogolyahay ee loogu talagalay joojinta tubaakada<br>**Qadka telfoonka Ohio ee joojinta tubaakada**<br>Wac 1-800-QUIT-NOW (1-800-784-8669) lana hadal qabiir si aad ugal hadasho caawin si uu kaaga caawiyo in aad joojiso tubaakada. |
| **Adeegyada aragga (okiyaalaha), oo ay ku jiraan muraayaduhu** | Caymisan; dhammaan xubnaha ayaa hela baaritaanka indhaha 12-kii bilood mar. Waxa kale oo leeyihiin xulasho muraayado ama gunno tafaariiq oo fareemka ookiyaalaha oo ah $25 ama gunno tafaariiq oo ah $150 oo ku wajahan nooca dhalada muraayadaha (waa in la istcimaalo isku mar) 12-kii bilood mar. |

| Adeegga | Caynsanaanta |
|---|---|
| **Baritaannada caafimaad-qabka ilmaha (Healthchek) ee loogu talagaly carruurta ka yar da'da 21.** | Caymisan; caafimaadka, aragga, ilkaha, maqalka, nafaqada, korriinka, iyo baaritaannada caafimaadka dhimirka, tallaalada (irbadaha), waxbarashada caafimaadka, iyo baaritaannada sheybaarka iyada oo intaa ay u dheer tahay daryeelka kale ee lagu daweeyo jirka, dabeecada ama dhibaatooyinka kale ama cudurada looga helo baaritaanka. |
| **Baaritaannada caafimaad-qabka qaangaarka ee sannadlaha ah** | Caymisan |

**Dhakhtarkaagu waa inuu ka wacaa Waaxda Maarynata Adeegsiga ee UnitedHealthcare Community Plan telefoonka 1-800-366-7304 si uu u helo oggolaanshaha adeegyada qaarkood.**

### Gaadiid-raaca

Haddii ay qasab tahay inaad 30 mayl ama ka badan ka safarto gurigaaga iyo wax ka badan si aad u hesho adeegyo caafimaad oo caymisan, qorshaha UnitedHealthcare Community Plan ayaa ku siin doonaan gaadiidka lagu tago lagagana yimaado xafiiska bixiyaha. Fadlan Adeegyada Xubinta ee UnitedHealthcare ka wac lambarka **1-800-895-2017**, TTY **711**, 7:00 subaxnimo – 7:00 fiidnimo, Isniin–Jimce, 2 maalin kahor (haddii aan gaadiidka loogu talagalin ka saarista isbitaalka) si aad u qabsato gaadiidka ama aad caawimaad u hesho.

Marka laga reebo caawimaadka gaadiidka oo ay bixiso qorshaha UnitedHealthcare Community Plan, waxaad heli kartaa gaadiidka loogu talagalay adeegyada qaarkood iyadoo loo marayo waaxda kaawntiga ee adeegyada shaqada iyo qoyska ee barnaamijka Gaadiidka Xaaladaha Aan Degdegga Aheyn (NET). Ugu wac waaxda kaawntigaaga ee adeegyada shaqada iyo Qoyska wixii ku saabsan su'aalaha ama caawimada adeegyada NET.

# Dheefaha UnitedHealthcare ee dheeraadka ah

## Dheefaha dheeraadka ah

Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan ayaa sidoo kale siisa dheefaha iyo/ama adeegyada dheeraadka ah ee soo socda xubnayaasha.

**Barnaamijyada badqabka / fayoqabka**

Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan ayaa leh barnaamijyo iyo aalado idinka caawiya inaad adi iyo qoyskaagaba ahaataan caafimaad-qab, oo ay ku jiraan:

- Fasallada kaa caawinaya iska joojinta sigaar-cabidda
- Daryeelka uurka iyo fasallada waalidnimada
- Fasallada nafaqada
- Xusuusiyeyaasha daryeelka fayoqabka

Bixiyahaaga ayaa kuu soo jeedin kara mid ka mid ah barnaamijyadaas adiga. Haddii aad rabto inaad ka ogaato wax dheeraad ah, ama si aad u hesho barnaamij kuu dhow, la hadal PCP-gaaga ama ka wac Adeegyada Xubnaha lambarka **1-800-895-2017**, TTY **711**.

**Qalabyada casriga ah ee caafimaadka**

- Xubnaha ayaa booqan kara **myuhc.com/CommunityPlan** si ay uga caawiso maareynta caafimaadkooda. Bogga ayaa ka caawiya inaad haysato taariikhda caafimaad. Wuxuu ku barayaa la shaqaynta dhakhtarkooda. Waxay xubnaha sidoo kale la socon karaan booqashooyinka mustaqbalka.
- **Findhelp.org** — barnaamij internet-ka. Barnaamijkani wuxuu ka caawiyaa xubnaha inay helaan adeegyada ku dhow meesha ay ku nool yihiin. Raadi caawinaad dhanka cuntada ah, caawinaad bixinta biilasha ah, ama qarashka baranaamijyo kuwa kale oo lacag la'aan ah / hoos loo dhigay ee ZIP koodhkaaga ku jira.
- Ka xubin ahaan, ama anigoo ah xubin waardiye oo UnitedHealthcare, waxaa dhici karta in aad u qalanto Assurance Wireless Lifeline Service, telfoonka gacanta iyo qorshe adeeeg oo lacag la'aan ah. Booqo **https://www.assurancewireless.com** si aad u codsato ama aad wax badan uga ogaato qorshayaasha Wireless Lifeline. U diyaargarow in aad ku raaxayssto caawinta caafimaadka ee guurguura bilaa kharashka ah.

### Si Fiican u Noolow Una Shaqeyso

**Waad caysan tahay**

Waa muhiim in la ogaado halka laga raadsado caawimaad markii loo baahdo. Waxaan halkaan u joognaa inaan caawino xubnahayaga. Booqo **Liveandworkwell.com** si aad u hesho wadahadalo toos ah oo ku saabsan mowduucyada caafimaadka maskaxda.

### Healthy First Steps™

Barnaamijkayaga Healthy First Steps ayaa hubiyaa inay hooyada iyo ilmaha labaduba helaan adeeg ah daryeel caafimaad wanaagsan. Kasbo abaalmarinno waaweyn (8 abaalmarin guud ahaan), oo uu kujira kaar hadiyad oo ah $20.00 oo aad helayso markaad is-qortaba. Iska qor barnaamijkayaga abaalmarinada hooyada xiliga uurka iyo uurka kadib. Daryeelka dhalmada kahor, xiliga dhalmada, dhalmada ka dib oo ay weheliyaan tallooyin caafimaad oo loogu talagalay adiga iyo ilmahaagu.

Waan kaa caawnin doonaa:

- Helidda talo fiican oo ku saabsan nafaqada, jirdhiska iyo badqabka
- Helidda saadka, oo ay ku jiraan mashiinka naas liska oo loogu talagalay hooyooyinka naasnuujinaya
- Xulashada dhakhtarka ama kalkaalisada ummulisada ah
- Jadwaleeynta booqashooyinka iyo baaritaannada
- Diyaarinta gaadiid lagu tago booqashooyinka dhakhtarka
- Ku xirnaashaha ilaha bulshada sida adeegyada Haweenka, Dhallaanka iyo Carruurta (WIC)
- Helida daryeel ka dib marka ilmahaagu dhasho
- Xulashada dhakhtarka carruurta (dhakhtarka ilmahaaga)
- Helidda macluumaadka qorsheynta qoyska

Naga soo wac lambarka bilaashka ah **1-800-599-5985**, TTY **711**, 8:00 subaxnimo–5:00 galabnimo. Waqtiga Dhexe (CST), Isniinta– Jimcaha.

Waxaa muhiim inaad horay U bilowdo daryeelka uurka. Hubi inaad tagto ballan kasta oo dhakhtarkaaga la leedahay, xataa haddii uuna ilmahani ahayn kii kuugu horreeyay.

### Wellhop

**https:/momandbaby.wellhop.com**
Hooyo iyo canug oo lagu xiiirinayo hooyooyinka bulshada.

### Ilkaha

- Wax lacag ah kuma bixinaysid adeegyada ilkaha
- 21 sano iyo wixii ka weyn, hal imtixaan oo dheeri ah sanadkiiba

Haddii aad rabto inaad wax badan ogaato, ka wac Adeegyada Xubinta (Member Services) lambarka **1-800-895-2017**, TTY **711**.

### Aragga

- Imtixaan hal il ah sanad kasta
- $150.00 oo gunno ah oo ku saabsan iibsashada iyo ku hagaahinta muraayadaha indhaha ee sanad kasta

Haddii aad rabto inaad wax badan ogaato, ka wac Adeegyada Xubinta (Member Services) lambarka **1-800-895-2017**, TTY **711**.

### Gaadiid-raaca

Marka loo geeyo gaadiid-raaca loo baahan yahay, UnitedHealthcare Community Plan waxay bixiyaan adeegyadaan gaadiid-raac ee dheeraadka ah:

- Safaro aan xadidaad lahayn oo loogu talagalay haweenka uurka leh, dhalmada kahor, dhalmada kadib, balamaha WIC, kooxda daryeelka ded dega ah ee dhalaanka (Neonatal Intensive Care Unit, NICU) iyo booqoshooyin wanaagsan oo loogu talagalaly caruurta ka yar hal sano
- Lacag celinta Mileage waxay diyaar u tahay gaadiidka ilaa kuwa adeega booqoshoyinka bixiya
- Gaadiidka qeyraadka cuntada (bangiga cuntada, qolka cuntada, dalabka iyo geynta keydka raashiinka). (Tani waxaa lagu xisaabinyaa safarka ugu badnaan safar15 ama 30 wareeg ah ee safarada halka qaab ah.)
- Safaro kale oo dheeri ah oo aan xad lahayn ayaa loo ogolyahay noocyada daryeelka safarka halista ah oo ay ka mid yihiin sifaynta, korontada/shucaaca, waxay daryeelaysaa, haweenka uurka leh, maandooriyaha. (Tani laguma tirin doono safarka ugu badan ee 15 safar ee soo noqoshada leh ama 30 safar ee halka dhinac ah.)

Haddii aad rabto inaad wax badan ogaato, ka wac Adeegyada Xubinta (Member Services) lambarka **1-800-895-2017**, TTY **711**.

### Hagaha guriga

Caawi adiga oo qiimeynaya baahida guriga iyo dooqyada xubnaha
guri degan aan lahayn, adiga oo soo ogaanaya dooqyada uqalma guriyeenta, kana caawi habka codsiga guriyeenta.

Haddii aad rabto inaad wax badan ogaato, ka wac Adeegyada Xubinta (Member Services) lambarka **1-800-895-2017**, TTY **711**.

### Cunto geyn

- Cuntooyin la isku geeyo kadib ka saarista isbitaalka muddo dhan 14 maalmood oo loogu talagalay haweenka uurka leh

Haddii aad rabto inaad wax badan ogaato, ka wac Adeegyada Xubinta (Member Services) lambarka **1-800-895-2017**, TTY **711**.

**Anida oo U Socda**

**http://www.uhcOMW.com**
Agabka xubnaha si ay uga caawiyaan u guurida nolol madax banaan.

**Daryeelka fogaan-aragga**

Adeegyada caafimaadka ee lagu bixiyo khadka waa daryeelka caafimaad ee si toos ah loo bixiyo iyadoo la adeegsanayo maqal iyo/ama muuqaal. Beddelkii aad xafiiska u tagi laheyd ballantaada, waxaad joogaysaa gurigaaga waxaadna isticmaaleysaa taleefankaaga casriga ah, tableet-kaaga ama kombiyuutarkaaga si aad u aragto oo aad ula hadasho xirfadleyaashaada caafimaadka iyo habdhaqanka. Ma jiro wax kharash ah oo kaaga baxaya isticmaalka adeegyada caafimaadka ee lagu bixiyo khadka (telehealth) waxayna adeegyadan meesha ka saarayaan istireeska la xiriira baahi loo qaba adeegyada gaadiidka.

Waxaad arki kartaa xirfadlayaasha caafimaadka iyo kuwa habdhaqanka adigoo adeegsanayo telehealth waxaana lagaa daaweyn karaa cuduro iyo dhaawacyo badan, xaaladaha caafimaad ee badanaa dhaca, waxaad gudan kartaa ballamada daba-galka ah iyo baaritaanada waxaana sidoo kale laguu qori karaa daawooyin.

Ka hubso daryeel caafimaad bixiyeyaashaada inay bixiyaan telehealth (adeegyada caafimaadka ee lagu bixiyo khadka) iyo in kale.

Haddii aad rabto inaad wax badan ogaato, ka wac Adeegyada Xubinta (Member Services) lambarka **1-800-895-2017**, TTY **711**.

**UnitedHealthcare® app**

UnitedHealthcare Community Plan waxay leeadahy app cusub oo loogu talagalay xubinta cusub. Waxaa la yiraahdaa UnitedHealthcare® app. App-ka ayaa laga heli karaa taableetyada iyo telefoonada Apple® ama Android® ee casriga ah. Ablikeeshinka UnitedHealthcare wuxuu fududeeyaa:

- Hesho dhakhtar, Qolka Gurmadka (ER) ama xarunta daryeelka degdega ee kuugu dhow
- Eegto kaarkaaga aqoonsiga
- Akhrisato buug-gacmeedkagaa
- Barato waxa ku saabsan faa'iidooyinkaaga
- La xiriir Adeegyada Xubnaha

Maantaba soo degso ablikeeshinka UnitedHealhcare. U isticmaal inaad ku xiranto qorshahaaaga caafimaad meel kasta oo aad joogto, mar kasta oo aad rabto.

### Abaalmarinoo caafimaad leh

Kahortag cabir yar ayaa lasinaan kara daaweyn cabir weyn. Waxay sidoo kale leedahay abaalmarino waawayn.
Si aad u hesho macluumaadka barnaamijyada kugu abaalmarinaaya in aad gaartay qaar ka mid ah yoolalka caafimaadka booqo:
**www.uhccommunityplan.com/oh** under Healthy rewards.

U hel naftaada ama ilmahaaga hadiyado waawayn adoo samaynaa arima sidan oo kale ah:

- Dhamaystirka baaritaanka badqabka ilmaha
- Marida baaritaannada shaybaarka
- Daryeelka kahortagga ah iyo baaaritaanada
- Tallaalada

### Barnaamijka Dr. Health E. Hound®

Waxa ku faraxsanahay nasiibkeena— Dr. Health E. Hound. Dr. Health E. Hound hadafkiisu waa inuu kaa caawiyo in ilmahaagu barto siyaabo madadaalo ah oo kuwaas ka caawinayo ilmhuhu caafimaad qabka iyo dhisnaanta jirka. Dr Health E. Hound ayaa jecel inuu socdaalo gobolka oo idil oo la kulma carruurta da' kasta leh. Wuxuu jecel yahay inuu qaybiyo waraaqaha macluumaadka, boodhadh, dhajimo, iyo midabaynta buugaagta si loo xasuusiso carruurta inay cunaan cunto caafimaad leh oona sameeyaan jimicsi. Waxa kale oo u ka caawiyaa carruurta inay fahmaan in dhakhtarka loo raadsado baaritaannada iyo tallaalada ay muhiim u yihiin caafimaad-qabka.

Adiga iyo qoyskaaga ayaa shakhsi ahaan kula kulmi kara Dr. Health E. Hound qaar ka mid ah munaasabadahayaga qorshaha caafimaadka. Waxaan kugu dhiirrigalinaynaa inaad timaaddaan munaasab oo aad wax ka barataan muhiimadda ay leedahay cunidda cuntada caafimaadka leh iyo jimicsigu. U soo qaado kaameero munaasabadahan oo sawir la qaado Dr. Health E. Hound.

# Faahfaahinta kale ee qorshaha

# Faahfaahinta kale ee qorshaha

## Helitaanka adeeg bixiyaha

Waxaan ka dhignaa helitaanka bixiyaha ku jira shabakada mid fudud. Si aad u hesho bixiye ku jira shabakada ama farmashiye kuu dhow:

Booqo **myuhc.com/CommunityPlan** si aad u hesho macluumaadkii ugu dambeeyay. Guji “Find a Provider.” ("Raadi Bixiye.")

Ka wac Adeegyada Xubnaha telefoonka **1-800-895-2017**, TTY **711**. Waxaan kuu raadin karnaa adiga bixiye ku jira shabakadda. Ama, haddii aad jeceshahay, waxaan boostada kuugu soo diri karnaa Hagaha Bixiyaha.

## Hagaha Bixiyaha

Waxaad aagaaga ka heli kartaa hagaha bixiyeyaasha. Haga ayaa taxaya cinwaanada iyo lambarrada telefoonada bixiyayaasha shabakaddayada ka tirsan.

Macluumaadka bixiyaha ayaa badanaa isbeddela. Booqo mareegtayada si aad uga hesho liis garayntii ugu dambeeysay barta **myuhc.com/CommunityPlan**. Waa ka eegi kartaa ama aad ka daabacan kartaa diiwaanka bixiyaha barta **myuhc.com/CommunityPlan**, ama guji “Find a Provider” si aad u istcimaasho diiwaankeena wax laga raadsan karo.

Waxaad ka heli kartaa diiwaanka bixiyaha ee ugu dambeeyay barta **myuhc.com/CommunityPlan** ama app-ka UnitedHealthcare app. Haddii aad jeclaan lahayd nuqul daabacan oo hagahayaga ah, fadlan kasoo wac Adeegga Macaamiisha **1-800-895-2017**, TTY **711**, waxaana kuusoo diraynaa mid.

Waad ku mahadsan tahay xubinnimadaada qiimaha badan ee qorshaha UnitedHealthcare Community Plan. Haddii aad raadineyso wax adeegyo ah oo ku saabsan caafimaadka aragga ama caafimaadka ilkaha, waxaad liiska bixiyeyaasha ka heli kartaa:

- Bixiyeyaasha caafimaadka aragga — **https://www.marchvisioncare.com/**
- Bixiyeyaasha caafimaadka ilkaha — **myuhc.com**

Ama si aad u hesho meesha uu ku yaallo bixiyaha caafimaadka aragga ama ilkaha qaabilsan, wac **1-800-895-2017**, TTY **711**, ama booqo **myuhc.com**.

# Haddii biilka adeegyada laguugu soo dallaco

Isbitaallada iyo dhakhaatiirtu uguma diri karaan biil xubnaha adeegyada caynsan. Haddii aad hesho biil, ka wac Adeegyada Xubnaha Lambarka **1-800-895-2017**, TTY **711**. Wakiil ayaa kaala shaqayn doona si aad u ogaato haddii ay tahay inaad bixiso biilka ama haddii ay tahay inaad inaga noo soo dirto:

Medicaid Program
UnitedHealthcare Community Plan
9200 Worthington Road, 3rd Floor
Westerville, OH 43082

Hayso nuqulka biilka. Waxaan dib u eegi doonaa biilashan si aan u hubino inay adeegyadu yihiin dheefocaynsan. Hadday cansan yihiin, lacagta waan siin doonaa bixiyaha daryeelka caafimaadka isla markaaba. Kasoo wac adeegyada xubinta lambarka **1-800-895-2017**, TTY **711**, hadaad qabto wax suaalo ah.

Bixiyeyaasha ayaa ku dallici lacagta caymiskaaga koowaad marka hore. Ka dib markuu caymiskaaga koowaad bixiyo qadarka la oggol yahay, bixiyaha ayaa UnitedHealthcare Community Plan ku soo dallici doonaa biilka. UnitedHealthcare Community Plan ayaa siin doonta bxiyaha qadarka lagula heeshiiyay bixiyaaha ee ku qoran qandaraaskayaga aan la galnay.

# Dardaaranka Horudhaca ah

Dardaaranka Horudhaca ah ayaa ah tallaabooyin qoran oo aad rabto in la qaado marka aadan hadhow iskaa u samayn karin go'aannada xulashooyinka daryeelka caafimaadka. Waxay sheegaysaa waxa uu yahay daryeelka caafimaad ee aad rabto ama aadan rabin. Waa inaad kala hadasho waxa aad rabto dhakhtarkaaga, qoyskaaga iyo asxaabtaadaba. Tallaabooyinkan ayaan beddeli doonin faa'iidooyinkaaga daryeelka caafimaadka. Qaar ka mid ah tusaalooyinka Dardaaranka Horudhaca ah waxaa ka mid ah:

### Dardaaranada Noolaha

Dardaaranka Noolaha ayaa u sheegayaa dhakhtarkaaga noocyada taageerada nolosha aad rabto ama aadan rabin.

### Awoodda Wakiilka Sharciga ah ee daryeel caafimaadka

Waxaad gudaha foomkan, ku magacaabi qof kale oo kuu oofin doona xulashooyinka caafimaad. Waxa kaliya loo isticmaali doonaa uun haddii aanad iskaa u samayn karin xulashooyinka.

### Caddaynta Loogu Talagalay Daawaynta Caafimaadka Dhimirka

Caddaynta loogu talagalay Daaweynta Caafimaadka Maskaxda ayaa siineysa fiiro gaar ah daryeelka caafimaadka maskaxa. Waxay u oggolaaneysaa qof, inta u karti u leeyahay, inuu magacowdo qof matala inuu go'aammada ku sameeyo magaciisa markuu isagu ama iyadu ayna kartida u lahayn inay go'aanka sameeyaan. Intaa waxa u dheer, caddaynta ayaa sifeyn karta rabitaanada qaarkood ee ku saabsan daaweynta. Qofka ayaa sheegan kara daawooyinka iyo daaweynta u doorbidayo, iyo door-biditaannada khuseeya seexinta/ku-haynta xarun.

Caddaynta loogu talagalay Daaweynta Caafimaadka Maskaxda ayaa awood badan Awoodda Wakiilka Sharciga ah Loo Siiynayo daryeelka caafimaadka maskaxda laakiin kama awood badno Dardaaranka Noolaha.

Waxaad weydiisan kartaa dhakhtarkaaga wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan Dardaaranka Horudhaca ah. Waxaad sidoo kale ka heli kartaa qaar ah foomam namuunad ah halakan:

**Familydoctor.org**

### Maxaa noocyo foomam ah oo meesha jira?

Sida ku cad sharciga Ohio, waxaa jira afar foom oo kala duwan, ama Dardaaranka Horudhaca ah, oo aad isticmaali karto. Adigu waxaad isticmaali kartaa Dardaaran Noolaha, Caddaynta Loogu Talagalay Daawaynta Caafimaadka Maskaxda, Awoodda Wakiilka Sharciga ah loo Siiynayo daryeelka caafimaadka ama Amarka Dib Ha u Kicin Wadnaha (Do Not Resuscitate, DNR). Buuxi foomka Dardaaranka Horudhaca ah intaad karti u leedahay inaad adigu wax isku qabato. Dardaaranka Horudhaca ah ayaa u sheegaya dhakhtarkaaga iyo dadka kale waxa aad ka rabto daryeelka caafimaadka.

### Amarka Dib Ha u Kicin Wadnaha

Xeerarka gobolka ayaa u bixiya Amarka Daryeelka u Raaxaynta ee Dib Ha u Kicin Wadnaha (Do Not Resuscitate, DNR) iyo Habraaca Daryeelka u Raaxaynta Xiranka sida ay u soo saartay Waaxda Caafimaadka Ohio. Amar DNR micnaheedu waa tilmaan u soo saaray dhakhtar, ama xaaladaha qaarkood, xirfad yaqaan ah kalkaaliye caafimaad oo sharciyeysan ama kalkaaliye caafimaad oo takhasus leh, oo tilmaamaya qofka sida goonida ah loo tilmaamay aan CPR (Dib-u-Dhaqaajinta Wadnaha iyo Sambabbada) lagu samayn. CPR micnaheedu waa dib-u-dhaqaajinta wadnaha iyo sambabbada ama waxyaabaha ka tirsan dib-u-dhaqaajinta wadnaha iyo sambabbada, laakiin kuma jirto bannaynta hawo-mareenka qofka oo ah ujeeddo ka duwan qayb ka mid ah CPR-ka.

Daryeelka u Raaxaynta ee Amarka Dib Ha u Kicin Wadnaha (DNR) iyo Habraaca Daryeelka u Raaxaynta Xidhanka ayaa taxaya ficillada gaarka ah ee baaramedhikyadu (paramedics) iyo farsamoo-yaqaannada caafimaadka gurmadka, dhakhaatiirta ama kalkaaliyeyaasha caafimaad ay qaadayaan markay wax ay ka qabanyaan qof buka oo leh Amarka Daryeelka u Raaxaynta DNR ama Daryeelka u Raaxaynta Xidhanka. Habraaca ayaa waliba taxaya ficillada gaarka ah ee aan la qaadi doonin.

Waa inaad kala hadasho dhakhtarkaaga arrimaha ku saabsan Daryeelka u Raaxaynta DNR iyo Daryeelka u Raaxaynta Xiranka iyo xulashooyinka habraaca.

# Xatooyada iyo xadgudubka

Qof kasta ayaa ka soo warbixin kara xatooyada iyo xadgudubka. Haddii aad ogaato xatooyo ama xadgudub, ka wac Adeegyada Xubinta lambarka **1-800-895-2017**, TTY **711**, si aad uga warbixiso. Qaar ka mid ah tusaalooyinka xatooyada iyo xadgudubka ayaa ah:

- Ka helitaanka dheefaha gudaha Ohio iyo gobol kale isla mar
- Dawooyinka la qoro oo la beddelo ama laga been abuuro
- Qof hela Dheefaha Gargaarka Caafimaadka oo aan mutaysan dheefaha
- Siinta kaarka aqoonsiga ee UnitedHealthcare Community Plan qof kale si uu u isticmaalo
- Istcimaalka dheefaha Medicaid oo xad-fhaaf ah ama aad ah
- Dhakhaatiirta ama isbitaallada kugu soo dallaco adiga ama ku soo dallaco UnitedHealthcare biilka adeegyo aan lagu siin
- Dhakhaatiirta ama isbitaallada in ka badan hal mar ku soo dallaca UnitedHealthcare biilka adeegyada aad heshay mar kaliya
- Dhakhaatiirta u soo gudbiya caddayno been-abuur ah UnitedHealthcare si aad u hesho adeegyo la bixiyo kaliya marka caafimaad ahaan loo baahan yahay

Warqad ayaad waliba ugu qori kartaa ODI:

Ohio Department of Insurance: Fraud Unit
2100 Stella Court
Columbus, OH 43215

**Khadka furan ee xatooyada iyo xadgudbka**

Waxa kale oo aad uga warbixin kartaa UnitedHealthcare Community Plan xatooyada iyo tacaddiga laga shakisan yahay adiga waca telefoonka lacag la'aanta ah ee 1-877-766-3844 oo ka taga farriin faahfaahsan. Tani waxa walibana loo dejiyay si aadan u bixin magacaaga.

Xusuusnow: Waligaa ha u siin cid kale inay isticmaalaan kaarka aqoonsiga xubinta.

# Ra'yigaaga ayaa wax ku ool ah

Ma haysaa wax fikrado ku saabsan sidii loo sii wanaajin laha UnitedHealthcare Community Plan? Waxa jira siyaabo badan oo aad noogu sheegi karto waxay kula tahay.

- Ka wac Adeegyada Xubnaha telefoonka **1-800-895-2017**, TTY **711**
- Noogu soo dir waraaq:

  UnitedHealthcare Community Plan
  9200 Worthington Rd.
  Westerville, OH 43082

**Guddiga La-Talinta Xubinta**

Guddiga La-Talinta Xubinta ayaa ah gole la-taliyayaal oo hubiya inay UnitedHealthcare si firfircoon ay ugu shaqayso macaamiisha, qoysaska, kooxaha u-doodidda, iyo kuwa kale ee arrimaha danaynaya iyada oo la iska kaashanayo arrimaha naqshadaynta barnaamija daryeelka kakan iyo nidaamka loo bixinayo.

Yaa ka mid noqon kara?

- Xubnaha UnitedHealthcare Community Plan
- Xubnaha Qoyska iyo xubnaha daryeel bixiyeyaasha ka ah UnitedHealthcare Community Plan
- Wakiillada ka socda bulshada iyo kooxaha u-dooda macmiisha

Ka-qeybqaatayaasha ayaa:

- La wadaagi kara jawaab-celinta iyo fikradaha kooxda UnitedHealthcare
- Ka mid noqon kara wicitaanka billaha ah ee madaaxda UnitedHealthcare ay sameeyaan ee ku saabsan caafimaadka iyo faya-dhowrka
- Ka qaybgeli kara shirarka sanadlaha ee gobolka
- Iska diiwaangelin kara tababbarada u-dooditaanka oo bilaa lacag ah

Wixii macluumaad ah oo ku saabsan golaha la talinta, kala xiriir:

Adeegyada Xubinta lambarka **1-800-895-2017**, TTY **711**

**Guddiga La-talinta Xubinta**

Waxaan sidoo kale leenahay Guddiga La-talin Xubinta oo kulma saddexdii biloodba mar. Haddii aad jeceshahay inaad nagu soo biirto, soo wac Adeegyada Xubnaha.

# Maareynta isticmaalka

UnitedHealthcare Community Plan ma rabto inaad hesho daryeel aad u yar ama daryeel aadan runtii u baahanayn. Waxaan waliba hubin doonaa in daryeelka aad hesho u yahay dheef caynsan. Waxaan adeegsanaa maaraynta isticmaalka (Utilization Management, UM) si aan u hubino inaad helayso daryeelka habboon waqtiga habboon iyo meesha ku habboon.

Waxaa sidoo kale jira dawayno iyo habraacyo kale oo aan u baahannahay inaan dib u eegno kahor intaadan helin. Bixiyeyaashaada ayaa yaqaan waxay yihiin, oo waxay ku dadaalaan inay na ogaysiiyaan si aan dib ugu eegno. Dib u eegista aan annnagu samayno waxa loo yaqaan U Dib u eegista Isticmaalka. Annagu uma abaalmarino qofna markay diidaan daryeel loo baahan yahay. Haddii aad ka qabto su'aalo arrimaha ku saabsan UM, waxaad la hadli kartaa shaqaalahayga Maareynta Daryeelka ee Medicaid. Kalkaaliyeyaashayada caafimaadka ayaa laga heli karaa 8:00 subaxnimo ilaa 5:00 galabnimo, Isniinta ilaa Jimcaha telefanka 1-800-504-9669, TTY 711; ka caawin luqad ayaa laga heli karaa.

# Barnaamijka tayada

Barnaamijkayaga Tayada ayaa kaa caawin kara inaad la shaqeeynta dhakhtarkaaga aad ka hesho caafimaad-qab. Barnaamijka Tayada ayaa kaa caawinaya inaad xusuusato helitaanka baaritaannada iyo tallaalada ka hortagga ah. Waxaan adiga iyo bixiyeyaasha u soo dirnaa xusuusino ku saabsan ka tijaabinta lead-ka dhiiga, tijaabooyinka baab (Pap tests), baaritaanada naasaha iyo tallaallada ka hortagga cudurrada ay ka midka yihiin dabaysha, Qanjo-bararka (qaamow-qashiirka), jadeecada iyo busbuska (hablabaasta).

UnitedHealthcare Community Plan ayaa isticmaasha HEDIS® oo ah cabbirka ka caawisa in la qiyaaso heerka aan ka taagannahay barnaamijkayaga Tayada. HEDIS waa cabbiro dhowr ah oo lagu qiyaaso waxqabadka iyo dhibcaha si ay uga caawiyaan inay dadka isbarbar-dhiggaan waxqabadka qorsheyaasha daryeelka la maareeyey. HEDIS ayaa darasta aagag badan, sida barnaamijyada daryeelka dhalmada ka hor iyo ka hortagga cudurka.

UnitedHealthcare Community Plan ayaa raba in la hubiyo inaad ku faraxsan tahay adeegyada aad ka hesho dakhtarkaaga iyo annagaba. Si taas aan u samayno, waxaan fiirinaa xogta CAHPS®. CAHPS waxay u taagan tahay Qiimaynta Macmilka Bixiyayaasha iyo Nidaamyada Daryeelka Caafimaadka. Ra'yi-ururintan ayaa ku weydiinaysa su'aalaha sida aad ugu qanacsan tahay daryeelka aad hesho. Haddii aad ku hesho ra'yi-ururinta xubinta boostada, fadlan buuxi oo nagu soo celi.

UnitedHealthcare Community Plan ayaa eegta natiijooyinka HEDIS iyo CAHPS. Markaa waxaan la wadaagaanaa natiijooyinka bixiyeyaashayada. Waxaan bixiyeyaasha kala shaqaynaa sidii loo xaqiijin lahaa in adeegyada ay ku siiyaani iyo adeegyada aan ku siino ay waxtar u leeyihiin daryeelkaaga caafimaad.

Haddii aad jeceshahay inaad wax dheeri ah aad ka ogaato arrimaha ku saabsan barnaamijka tayada, kasoo wac Adeegyada Xubnaha lambarka **1-800-895-2017**, TTY **711**.

# Ka badqabka iyo ka ilaalinta takoorista

Badbaadka bukaanka ayaa annaga aad muhiim noogu ah. In kasta oo annaan annagu hagin daryeelka, waxaan rabnaa inaan hubino inay xubnahayagu helaan daryeel ammaan qaba. Waxaan la soconaa arrimaha tayada-daryeelka, waxaan soo saarnaa tilmaamo lagu hormariyo daryeelka ammaanka qaba, waxaan siinaa xubnaha macluumaad ku saabsan ammaanka bukaanka, waxaan la shaqaynaa isbitaallada, dhakhaatiirta iyo kuwa kale si loo horumariyo arrimo ku sii wadka iyo iskaashiga ka dhexeeya goobaha daryeelka. Haddii aad jeceshahay inaad hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ammaanka bukaanka ama goobaha laga helo macluumaadka, kasoo wac Adeegyada Xubnaha lambarka **1-800-895-2017**, TTY **711**.

UnitedHealhcare Community Plan, iyo adeeg bixiyayasheeda waxaa laga mamnuucay in qof kasta ay ku takooraan da', jinsiyad, qowmiyad, diin, midab, jinsi, aqoonsiga jinsiga, dooqa galmada, naafaniimo, meesha uu kasoo jeedo, maqaam ciidan, maqaam ciidan hore, abtirsi, macluumaadka hidaha, xaalada caafimaad, ama baahi loo qabo helitaanka adeegyada caafimaadka. Bixiyayaasha UnitedHealthcare Community Plan ayaa ah inay raacaan Xeerka Dadka Mareykanka ee Naafada ah mana sameeyn karto takoor ku saleysan caafimaadka ama caafimaadka dhimirka, u baahnida daryeelka caafimaad ama xaalado horay-u-jiray. Haddii aad u malaynayso in lagugula kacay nooc takoor ah, fadlan soo wac Adegyada Xubnaha telefoonka **1-800-895-2017**, TTY **711**, islamarkaaba.

# Tilmaamaha habdhaqanka caafimaad iyo tiknoolojiyadda cusub

UnitedHealthcare Community Plan ayaa siisa bixiyayaashayada tilmaamo caafimaad eel eh macluumaad ku saabsan sida ugu wanaagsan ee loogu bixiyo daryeelka xaaladaha qaarkood. Tilmaan kasta oo caafimaad waa qiyaas la isku hallayn karo oo daryeel markay atahay hawlaha caafimaadka, taas oo macnaheedu yahay dhakhaatiirta ayaa ku raacsan arrimo abbaarkaas. Waxaan rabnaa inaan sii wanaajino caafimaadkaaga aannaga oo siinayna bixiyeyaashayada macluumaadka taageera habdhaqankooda caafimaad, sida waafaqsan heerarka daryeelka ee qaran ahaan la aqoonsanyahay.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan tilmaamaha caafimaad ee UnitedHealthcare Community Plan ama aad jeclaan lahayd nuqul warqad ah oo tilmaanta habdhaqanka caafimaad ah, fadlan ka soo wac Adeegyada Xubnaha lambarka **1-800-895-2017**, TTY **711**. Waxaad sidoo kale ka heli kartaa tilmaanta habdhaqanka caafimaad bartyada internetka ee ku taalo **myuhc.com/CommunityPlan**.

### Qiimaynta teknooloojiyadda cusub

Habdhaqannada caafimaadka iyo Daaweynta qaarkood ayaan weli la xaqiijin inay wax ku ool yihiin. Habdhaqanada cusub, Daaweynta, tijaabooyinka iyo teknoolajiyadda ayaa heer qaran ahaan dib ay ugu eegtaa UnitedHealthcare Community Plan si ay u gaadho go'aamo ku saabsan habdhaqanada cusub ee caafimaad iyo Daaweynta iyo waxa ay yihiin cudurada loo isticmaali karo. Macluumaadkan waxa dib u eega guddi ay ka mid yihiin dhakhaatiir, kalkaaliyayaal caafimaad, farmashiistayaasha UnitedHealthcare

Community Plan ay iyo khubaro martida ku ah oo gaaro go'aanka ugu dambeeya ee ku saabsan caynsanaata. Haddii aad jeceshahay macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida aan go'aannada ku saabsan habdhaqanada caafimaad u gaarno, naga soo wac telefoonka **1-800-895-2017**, TTY **711**.

# Mas'uuliyadahaaga xubbinimada

**Markaad Xubin Ka Tahay UnitedHealthcare Community Plan waxa ku saaran masuuliyada ah:**

- Inaad fahanto siday UnitedHealthcare Community Plan u shaqayso adiga oo akhrisanaya buug-gacmeedkan
- Inaad xulato Daryeel Bixiyahaaga Asaasiga ah
- Inaad sidato kaarkaaga UnitedHealthcare Community Plan. (Wa inaad tustaa kaarkaaga markaad adeeg qaadanaysa sidoo kale waa inaad waliba ku wargaliso UnitedHealthcare Community Plan caymis kasta oo kale oo laga yaabaa inaad leedahay, iyo inaad siiso macluumaadka caymiska ee hadda jira Bixiyahaaga Asaasiga ah).
- Inaad raadsato daryeel caafimaad kolba sida loogu baahdo
- Inaad dhammaan ballamaha waqtigooda xaadirto
- Inaad u sheegto xafiiska PCP-gaaga ama xafiis kasta oo caafimaad haddii aad rabto inaad beddelato ballan
- Inaad ixtiraanto xuquuqda iyo hantida PCP-gaaga, iyo shaqaalaha kale ee daryeelka caafimaadka, iyo bukaannada kale
- Inaad ogaato marka aad qaadanayso daawadaada, sida loo qaato daawadaada iyo inaad raacdo tilmaamaha dhakhtarkaaga ee daryeelka kuwaasoo aad oggolaatay
- Inaad UnitedHealthcare Community Plan iyo bixiyeyaashaada daryeelka caafimaad aad siiso macluumaadka caafimaad ee saxda ah iyo wixii macluumaad ah ee loo baahan yahay si laguu siiyo daryeel
- Inaad isa saarto xil buuxa, ka fekerto arrimaha ku saabsan cawaaqibta ka dhallan kara go'aankaaga haddii aad diiddo daryeelka (aad dhahdo maya daawaynta), iyo inaaad weydiiso su'aalo haddii aadan fahmin
- Inaad oggaatid dhibaatooyinkaaga caafimaad sida ugu wanaagsan oo aad ka qaybqaadatid horumarinta ogolaanshaha labada dhinac xiliga daawaynta
- Inaad hubiso inuu Daryeel Bixiyahaaga Asaasiga ah hayo dhammaan xogtaada caafimaad. (Taas waxa ka mid ah dhammaan xogta caafimaadka ee ka timid dhakhaatiirta kale.)
- Inaad UnitedHealthcare Community Plan u sheegto haddii aad ku jirto Isbitaalka. (Samee sidan 24 saacadood gudahood ama sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah.)
- Inaad oggolaato isticimaalka habboon ee macluumaadka caafimaadkaaga
- Inaad cusbooneysiiso u-qalmitaankaaga Medicaid si aadan u waayin xubinnimada UnitedHealthcare Community Plan

# Erey bixinta daryeelka la maareeyay

**Xadgudbka:** Si ula kaca ah/qasad ah qof loo waxyeeleeyo. (Waxaa ka mid ku qaylyidda, inkiridda baahida qofka iyo taabashada aan habbooneyn.)

**Dardaaranka Horudhaca ah:** Go'aan ku saabsan daryeelka caafimaadkaaga oo aad horey u samayso haddii ay dhacda inaadan mar uun awoodin inaad iskaa wax u sheegato. Tani ayaa u sheegi doonta qoyskaaga iyo dhakhaatiirtaada go'aammada aad samayn lahayd aad lahayd haddii aad awoodi lahayd.

**Rafcaan:** Codsiga xubineed ee ku saabsan qorshaha UnitedHealthcare Community Plan in ay dib u eegaan go'aan xun oo ku saabsan faaidada qorshaha.

**Oggolaanshaha:** Oggolaansho ama ansixin adeeg.

**Dheefaha:** Adeegyada, habsocodyada iyo dawooyinka ay UnitedHealthcare Community Plan ay kaa bixin doonto.

**Lacagta go'an ee caymiska:** Qadar go'an ee uu ku bixiyo qofka xuninta ah daryeel adeeg caafimaad la bixiyay.

**Joojinta Xubinimada:** Si aad u joojiso Xubinimadaada UnitedHealthcare Community Plan.

**Qalabyada Caafimaadka ee Waara (Durable Medical Equipment, DME):** Qalabka u adkaysan kara isticmaal badan, asaasiyan iyo dhaqaan ahaanba wuxuu u shaqayn jiray ujeedo caafimaad, guud ahaan faaido uma lahan qof aan jirnayn ama dhaawac ahayn, wuxuuna ku haboon yahay in guriga lagu isticmaalo.

**Gurmadka:** Isbeddel ku soo bood ah oo, wakhtigaa, lama filaan ku ah xaalada jireed ama maskaxeed ee qofka, taas oo, haddii qaansocod ama dawayn aan lagu samayn isla markaaba, laga filan karo inay keento 1) dhimasho ama luminta addin, 2) wax u dhinnaan daran oo ku timaad waxqabadka jirka, 3) waxyeello joogto ah oo ku timaad qayb jirka ka mid ah ama caafimaadka ilmaha aan dhalan. (Caafimaadka Maskaxda: Halista Isdilitaanka, dilka badheedhka ah ama is-dhaawaca, khalkhal ama waalli u baahan daryeel caafimaad oo degdeg ah.)

**Xaalad Caafimaad oo Degdeg ah:** Micnaha waxaa loola jeedaa xaalad caafimaad oo isku muujisa calaamado ba'an oo daran oo ku filan (oo ay ku jiraan xanuun daran) sida qof tagnida ka dhaca, oo leh celceliska aqoonta caafimaadka iyo daawada, wuxuu si macquul ah u filan karaa maqnaanshaha daryeel caafimaad oo degdeg ah inay ka dhalato mid ka mid ah kuwan soo socda: gelinta caafimaadka shakhsiga (ama, marka la eego haweeneyda uurka leh, caafimaadka naagta ama ilmaha uurka ku jira) khatar weyn; daciifnimo daran oo ku timaada hawlaha jidhka; ama cillad daran oo ah xubin ama qayb kasta oo jidhka ah.

**Gaadiidka Caafimaadka Gargaarka Degdegga ah:** Gaadiid ambalaas ah oo lagu qaadayo dadka buka, dhaawacan ama naafada ah ee u baahan daryeel caafimaad oo gurmad ah.

**Gurmadka– Caafimaadka Maskaxda ee aan nafta halis gelinayn:** Marky calaamadaha ugu horreeyaa soo baxaan, laakiin aanay ahayn kuwa nafata-halis gelinaya, sida fikradaha isdilitaanka ee aan lahayn qorshe lagu hirgelinayo ama xubintu uu bilaabo muujinta calaamadaha khalkhalka ama waallida.

**Qolka Gurmadka Degdegga ah:** Baadhitaanka caafimaadka, baadhitaanada, iyo qiimaynta oo uu sameeyo dhakhtar, ama, ilaa xadka uu sharciga khuseeya ogolyahay,ay sameeyaan shaqaalaha kale ee ku haboon ee hoos yimaada kormeerka dhakhtarka, oo ku saabsan go’aaminta in xaalad caafimaad oo gurmad ah jirto iyo in kale iyo, haddii ay jirta, daaweynta daryeelka ama qaliinka adeega caynsan ee uu sameynayo dhakhtarku kaasi oo ah lagama maarmaan si looga nafiso ama meesha looga saaro xaalada caafimaad ee gurmadka ah, iyadoo la adeegsanayo awooda adeeg ee isbitaalka.

**Adeegyada Gurmadka:** Adeegyada bukaan-jiifka ee daboolan, adeegyada bukaan-socodka, ama adeegyada gaadiidka caafimaadka ee uu bixiyo adeeg bixiye u qalma oo loo baahan yahay si loo qiimeeyo, loo daweeyo, ama loo dejiyo xaalad caafimaad oo degdeg ah. Adeeg bixiyeyaasha adeegyada gurmadka ah waxaa kaloo ka mid ah dhakhaatiirta ama xirfadlayaasha kale ee daryeelka caafimaadka ama tas-hiilaadka daryeelka caafimaadka ee aan u shaqeynin ama heshiis qandaraas kula jirin qorshaha UnitedHealthcare Community Plan.

**Adeegyada Laga Saaray:** Adeegyada caafimaadka ee UnitedHealthcare Community Plan aynan bixin ama daboolin.

**Xatooyo:** Ficil been abuur ah (tusaale: haddii qof aan adiga ahayni isticmaalo kaarkaaga aqoonsiga xubinimada isagoo adiga iska kaa dhigayo).

**Cabashada:** Muujinta qanacsanaanta xubinta ee ku saabsan arrin kasta oo aan ahayn wax xun go'aaminta faa'iidada leh. Cabashooyinka waxaa ka mid noqon kara, balse kuma xaddidno, tayada daryeelka la bixiyo, iyo arrimaha cilaaqaadka dadka ka dhexeeya sida bixiye ama shaqaale si xun kuula dhaqma, ama ka gaabinta ixtiraamka xuquuqda xubinta iyadoo aan la eegin in tallaabo wax looga qabanayo la codsaday. Cabashooyinka waxaa ka mid ah xaqa uu xubinku u leeyahay in uu ka doodo muddo kordhin ay soo jeedisay MCE si uu u sameeyo go'aan oggolaansho.

**Adeegyada iyo Qalabka Baxnaaninta:** Adeegyada loogu talagalay in lagu caawiyo shakhsiyaadka helitaanka, haysashada, iyo horumarinta is-caawinta, bulshada dhexdeeda, iyo xirfadaha la-qabsiga ee lagama maarmaanka u ah in si wanaagsan loogu noolaado guriga iyo goobaha bulshada ku kulman.

**Macluumaadka Caafimaadka:** Xaqiiqaha ku saabsan caafimaadkaaga iyo daryeelkaaga. Macluumaadkan ayaa ka iman kara UnitedHealthcare Community Plan ama bixiye. Waxa ka mid ah macluumaadka ku saabsan caafimaadka jirkaaga iyo maskaxdaada, iyo waliba bixinta lacagaha daryeelka.

**Caymiska Caafimaadka:** Qandaraas u baahan in qorshahaaga UnitedHealthcare Community Plan ay bixiyaan qaar ama dhammaan kharashaadkaaga daryeelka caafimaadka adiguna aad bixiso khidmad caymis.

**Daryeel Caafimaad Guriga:** Adeegyada ay ku jiraan kalkaalisada caafimaadka guriga, adeegyada kaalmada caafimaadka guriga iyo daawaynta xirfadaysan.

**Adeegyada Hospice:** Hay'ad dawli ah, urur gaar ah, ama qayb-hoosaad midkood, iyada oo ku xidhan shuruudaha ka qeybqaadashada sida waafaqsan 42 C.F.R. Qaybta 418 (Oktoobar 1, 2017), kaas oo shatiga ka haysta gobolka Ohio oo ay ansixisay ODM inay ka qayb qaadato bixinta daryeelka shakhsiyaadka jirran. (5160-56-01 (V).

**Isbitaal dhigista:** Daryeelka ka jira isbitaalka ee u baahan seexinta bukaan-jiif ahaan.

**Daryeelka Bukaan-socodka Isbitaalka:** Baahinta, daawaynta, baxnaaninta, ama daawaynta palliative ama adeegyada uu bixiyo ama hoos yimaado jihaynta hawlwadeenada adeegyada dhakhaatiirta kuwaas oo uu siiyo bukaanka cusbitaalka.

**Macluumaadka Caafimaad Maskaxda:** Xaqiiqaha ku saabsan caafimaadkaaga maskaxda iyo daryeelkaaga. Macluumaadkan ayaa ka iman kara UnitedHealthcare Community Plan ama bixiye. Waxa ka mid ah macluumaadka ku saabsan caafimaadka jirkaaga iyo maskaxdaada, iyo waliba bixinta lacagaha daryeelka.

**Kaarka Aqoonsiga:** Kaar aqoonsi oo sheegaya inaad xubin ka tahay UnitedHealthcare Community Plan. Waa inaad haysato kaarkan had iyo jeer.

**Tallaalka:** Duris kaa ilaalisa cudurka. Carruurtu waa inay da'o kala duwan ku qaataan dhowr. Tallaallada waxaa inta badan la bixiyaa inta lagu guda jiro booqashada caadiga ah ee dhakhtarka.

**Oggolaashaha la Ogeeysiiyay:** In dhammaan dawaynta caafimaad laguu sharxay; oo aad fahamtay aadna ogoshahay .

**Shabakada ku jira:** Dhakhaatiirta, takhasuslayaasha, isbitaallada, farmashiyaasha iyo bixiyeyaasha kale ee heshiiska la leh UnitedHealthcare Community Plan si ay adeeg ah daryeel caafimaad u siiyaan xubnaha.

**Bukaan-jiif:** Marka lagu jiifiyo isbitaal wakhti muddo ah.

**Caafimaad ahaan lagama maarmaan ah:** Shuruudaha caymiska ee hababka, alaabta, ama adeegyada ka hortagga, baaritaan, qiimee, ama daaweeya xaalad caafimaad oo xun sida jirro, dhaawac, cudur ama astaamihiisa, shucuureed ama habdhaqan xumo, garaad yaraan, garasho xumo, ama naafanimada korriinka oo la'aanteed qofka laga filan karo inuu ku dhaco xanuun daba dheeraada, koror ama cudurro cusub; daciifnimada shaqada;Xubinta jidhka ama qayb ka mid ah jidhka oo aan shaqayn; ama xanuun iyo raaxo la'aan weyn.

**Xubinta:** Qof u qalma oo UnitedHealthcare Community Plan barnaamijyada uga sajilan Medicaid ama DHCP.

**Shabakada:** Adeeg bixiyeyaasha qandaraaska kula jira qorshaha UnitedHealthcare Community Plan ee ay heli karaan xubnaha qorshaha UnitedHealthcare Community.

**Bixiye Aan Ka Qayb-Gelin:** Bixiye kasta oo haysta heshiiska bixiyaha ee ODM kaas oo aan qandaraas kula jirin qorshaha UnitedHealthcare Community Plan laakiin adeegyada daryeelka caafimaadka siiya xubnaha qorshaha UnitedHealthcare Community Plan.

**ODM:** Waaxda Medicaid ee Ohio (Ohio Department of Medicaid).

**Shabakadda-Ka Baxsan:** Dhakhaatiirta, takhasuslayaasha, isbitaallada, farmashiyaasha iyo bixiyeyaasha kale ee aan heshiiska la lahayn UnitedHealthcare Community Plan si ay u siiyaan adeeg daryeel caafimaad xubnaha.

**Bukaan socod:** Marka laguu qabto habraac caafimaad oo aa u baahnayn ku jirid isbitaal.

**Bixiyaha ka qayb qaadanaya:** Bixiye kasta, koox bixiyayaal ah, ama cidda haysato qandaraaska bixiyaha kujira shabakada ee UnitedHealthcare Community Plan ee waafaqsan qaanuunka 5160-26-05 ee Xeerka Maamulka kaasi oo u hela maalgelinta Medicaid si toos ah ama si dadban si loo dalbado, loo gudbiyo, ama loo bixiyo adeegyada caynsan iyadoo ay sababtu tahay heshiiska bixiyaha ama qandaraaska ODM ee ay qorshaha UnitedHealthcare Commmunity Plan kula jiraan adeeg bixyeyaasha.

**Adeegyada Dhakhtarka:** (L) “Dhakhaatiirta adeegyada dhakhaatiirta”: waa dhakhaatiir, dhakharka dhimirka, dhaqaatiirta ilkaha, kalkaalisada caafimaadka ee takhasuska leh, kalkaalisada-umulisooyinka shahaadeysan, kalkaalisooyin caafimaad oo shahaado haysta ama caawiyayaal dhakhtar. (5160-2-02(L))

**Qorshe:** (S) “Ururka daryeelka la maareeyey (Managed Care Organization, MCO)” ama “Qorshaha daryeelka la maareeyey (MCP)” waxa loola jeedaa shirkad caymis caafimaadka (Health Insuring Corporation, HIC) oo shati u haysata gobolka Ohio oo heshiis bixiyaha daryeelka la maareeyey la gasha ODM. (5160-26-01(S))

**Adeegyada Daryeelka Xasilinta Kadib:** Adeegyada la daboolay ee la xidhiidha xaalad caafimaad oo degdeg ah taas oo bixiyaha daawaynta u arko mid caafimaad ahaan lagama maarmaan u ah kadib markii xaalad caafimaad oo degdeg ah ay leedahay lana dejiyay si loo ilaaliyo xaalada xasiloon, ama xaaladaha lagu tilmaamay sanadkii 42 C.F.R. 422.113 si loo hagaajiyo ama loo xalliyo xaaladda xubinta.

**Oggolaansho hore:** Go'aanka UnitedHealthcare Community Plan ee dhigayo in adeegga daryeelka caafimaadka, qorshaha daawaynta, daawada dhakhtarka qoray, ama qalab caafimaad oo waara ay

caafimaad ahaan lama huraan yihiin. Mararka qaarkood waxaa loo yaqaan oggolaansho hore, oggolaan hore ama caddayn horudhac ah. Caymiska Caafimaadka ama qorshahaaga waxa laga yaabaa inay u baahdaan ogolaansho kahor inta aanad helin adeegyada qaarkood, marka laga reebo xaaladaha degdeg ah.

**Qadarta canshuurta:** "Qadarta Carbuunta" macneheedu waa qadarka lacag bixinta bishiiba xubin kasta laga rabo oo MCO ay xaq ugu leedahay magdhow ahaan gudashada waajibaadkeeda si waafaqsan cutubka 5160-26 ee xeerka maamulka iyo/ama bixiyaha heshiiska ODM. (516026-01(NN))

**Caymiska Daawooyinka Dhakhtarka uu qoro:** Daawooyinka uu daboolo Maamulaha Faa'iidada Farmashiyaha Keli (Single Pharmacy Benefit Manager, SPBM) ee la siiyo xubnaha si loogu isticmaalo deganaha bukaanka, oo ay ku jiraan xarun kalkaalin ama xarun daryeel dhexdhexaad ah oo loogu talagalay shakhsiyaadka naafada maskaxeed.

**Dawooyinka Loo Qoro:** Walxaha fudud ama isku dhafan ama isku dhafka walxaha ee loo qoray daawaynta, yaraynta, ama ka hortagga cudurka, ama kor u-qaadida caafimaadka ee uu qoro dhakhtarka ama xirfadle kaloo shati haysta si loogu isticmaalo qaab bogsiinta iyadoo la eegayo baaxadda dhaqankan xirfadeed sida lagu qeexay kuna xadidan sharciga Federaalka iyo Gobolka; oo ay bixiyaan farmashiistayaal shati haysta iyo xirfadlayaal shati haysta iyadoo la raacayo Xeerka Dhaqanka Caafimaadka ee Gobolka; oo uu ku bixiyo farmashiistaha shatiga ama xirfadlaha warqad qoraal ah oo la geliyay diiwaanka farmashiistaha ama dhakhtarka.

**Daryeel-bixiyaha/Dhakhtarka Aasaasiga ah (PCP):** Dhakhtarka gaarka ah (MD ama DO), koox dhaqatir ah, kalkaaliso caafimaad oo heer sare ah oo diiwaangashan sida lagu qeexay qaybta 4723.01 ee Xeerka Dib-u-habaynta Ohio, Tababar kooxeed hore oo kalkaalisooyin ah oo ku dhex jira takhasus la aqbali karo, ama kalkaaliye dhakhtar oo buuxiya shuruudaha qaanuunka 5160-4-03 ee Xeerka Maamulka Ohio ee qandaraaska kula jira Qorshaha UnitedHealthcare Community Plan/ OhioRISE si loo bixiyo adeegyada sida ku qeexan qaanuunka 5160-26-03.1 ee Xeerka Maamulka Ohio.

**Oggolaanshaha Hore:** Nidaamka u dhakhtarkaagu u isticmaalo si uu u helo ansixinta adeegyada u baahan in la ansixiyo kahor intaan la sameeyn.

**Hagaha Bixiyaha:** Liiska bixiyeyaasha kala qaybqaata UnitedHealthcare Community Plan si ay uga caawiyaan wax ka qabashada baahiyadaada daryeelka caafimaad.

**Bixiye:** Cusbitaal, xaruun daryeel caafimaad, dhakhtar, dhakhtarka ilkaha, farmashiye, ama haddii kale shakhsi ama hay'ad shatiyeysan ama shahaado haysato oo loo idmay ama xaq u leh in lacag lagu siiyo adeegyada daryeelka caafimaadka la xiriira ee ay siiyeen xubnaha UnitedHealthcare Community Plan.

**U-Gudbinta:** Markaad adiga iyo PCP-gaaga aad ku heshiisaan inaad u baahan tahay inaad u tagto dhakhtar kale, oo uu PCP-gaaga kuu gudbiyo takhasuse ka mid ah shabakadda bixiyeyaasha.

**Adeegyada Dhaqancelinta iyo Qalabyada:** Hawlo gaar ah oo ay tahay, si waafaqsan Ciwaanka 47 ee Xeerka Dib-u-habaynta Ohio, inuu si toos ah u bixiyo qof shati u leh ama shaqaale kale oo si habboon u shahaado farsamo ama shaqaale daryeel caafimaad leh.

**Adeegyada Iskaa-u-imaadka:** Adeegyada aadan ugu baahnayn inaad u aragto PCP-gaaga u gudbinta.

**Daryeelka Kalkaalinta Xirfadeysan:** Hawlaha gaarka ah ee ay tahay, si waafaqsan Cutubka 4723 ee Xeerka Dib-u-habaynta Ohio, ay bixiso kalkaaliye wax-ku-ool ah (License Practical Nurse, LPN) oo ay ku jihaynayso kalkaalisada diiwaangashan. ama si toos ah kalkaaliso diiwaan gashan.

**Dhakhtarka Takhasusaha ah:** Dhakhtarka takhasuska leh wuxuu diiradda saaraa meel gaar ah oo daawo ah ama koox bukaanno ah si loo ogaado, u maareeyo, looga hortago ama loo daweeyo noocyada calaamadaha iyo xaaladaha qaarkood. Khabiir aan dhakhtar ahayn waa bixiye haysta tababar dheeraad ah oo ku saabsan qeyb gaar ah ee daryeelka caafimaad ah.

**Macluumaadka Maandooriye Isticmaalka:** Xaqiiqaha ku saabsan isticmaalkaaga maandooriyaha iyo daryeelkaaga. Macluumaadkan ayaa ka iman kara UnitedHealthcare Community Plan ama bixiye. Waxa ka mid ah macluumaadka ku saabsan taariikhda isticmaalkaaga maandoriyaha iyo isticmaalka hadda, iyo waliba lacag bixinta loogu talagalay daryeelka.

**Daryeel Dhakhso leh:** Daryeelka jirro, dhaawac ama xaalad halis ah oo ku filan in qof macquul ah uu raadsado daryeel isla markiiba, laakiin ma aha mid aad u daran waxay u baahan tahay qolka gurmadka degdegga ah.

**WIC:** Barnaamijka cuntada kaamilinta ah ee loogu talagalay Haweenka, Dhallaanka iyo Carruurta ee bixisa la-talinta nafaqada, waxbarashada nafaqada, iyo cuntooyinka nafaqada leh ee loogu talagalay haweenka uurka leh iyo ummulaha, dhallaanka iyo carruurta da'doodu tahay illaa 2. Carruurta loo arko inay nafaqadoodu hooseyso ayaa hoos imanaya barnaamijka illaa da'da 5 haddii u dakhligoodu hooseeyo oo loo garto inay halis ugu jiraan nafaqaynta.

# Ogeysiisyada Qorshaha Caafimaadka ee Habdhaqannada Asturnaanta

**OGEYSIISKANI WUXUU QEEXAYAA SIDA MACLUUMAADKA CAAFIMAADKA EE ADIGA KUGU SAABSAN LOO ISTICMAALI KARO LOONA SHAACIN KARO IYO SIDA AAD KU HELI KARTO MACLUUMAADKAN. FADLAN SI TAXADAR LEH DIB UGU EEG.**

Dhaqangalayo Janaayo 1, 2023

Sharci ahaan, annagu[1] waa inaan ilaalinaa asturnaanta macluumaadkaaga caafimaad ("HI"). Waa inaan kuu soo dirnaa ogeysiiskan. Wuxuu kuu sheegayaa:

- Sida aan u isticmaali karno macluumaadkaaga caafimaadka (HI).
- Markaan la wadaagi karno macluumaadkaaga caafimaadka (HI) dadka kale.
- Xuquuqda aad u leedahay inaad hesho macluumaadkaaga caafimaadka (HI).

Sharci ahaan, annagu waa inaan raacnaa shuruudaha ogeysiiskan.

Macluumaadka caafimadka (HI) waa macluumaadka ku saabsan caafimaadkaaga ama adeegyada daryeelka caafimaadkaaga. Waxaan xaq u leenahay inaan beddelno dhaqammadayada asturnaanta ee loogu talagalay fara ku haynta macluumaadka caafimaadka (HI). Haddii aan beddelno, waxaan kugu soo wargelin doonaa boostada ama iimayl. Waxaan sidoo kale soo gelin doonaa ogeysiiska cusub mareegtan **(www.uhccommunityplan.com)**. Waxaan kaa soo wargalin doonaa haddii lagu xadgudubo macluumaadka caafimaadkaaga. Waxaan u ururinna oo aan u haynaa macluumaadka caafimaadkaaga (HI) si aanu u hmaamulno ganacsigayaga. Macluumaadka caafimaad (HI) waxaa laga yaabaa inay noqoto hadal, qoraal ama qaab elektaroonik ah. Waxaan helida macluumaadka caafimaadkagaa (HI) ka xaddidnaa shaqaalahaga iyo bixiyeyaasha adeegga. Waxaan leenahay hab dhowritaan lagu ilaaliyo macluumaadkaaga caafimaad (HI).

**Sida aan u uruurino, u isticmaalno, oo u wadaagno macluumaakaaga**

**Waan uruurinaa, isticmaalnaa oo wadaagnaa Macluumaadka CaafimaadkaAGA (HI):**

- Adiga ama wakiilkaaga sharci.
- Ha'ydaha Dowladda.

**Waxaan xaq u leenahay inaan uruurino, isticmaalno oo wadaagno macaluumaadkaaga caafimaad (HI ) innagoo ka leh ujeeddooyin gaar ah.** Tani waa inay noqotaa mid loogu talagalay daaweyntaada, lacag bixinta daryeelkaaga, iyo maamulka ganacsigayaga. Waxaan macluumaadka caafimaadkaaga (HI) u isticmaali karnaa ama u wadaagi karnaa sida soo socota.

- **Lacag Bixinta.** Waxaa dhici karta inaan uruurino, isticmaalno, oo wadaagno macluumaadka caafimaadkaaga si aan uga shaqeyno bixinta lacagaha carbuunta ah iyo sheegashooyinka. Tani waxaa ku jiri kara isku-duwidda macaashyada.

- **Daaweynta ama Maaraynta Daryeelka.** Waxaa laga yaabaa inaan uruurino, isticmaalno oo la wadaagno macluumaadka caafimaadkaaga daryeel bixiyayaashaada si ay gacan uga geystaan daryeelkaaga.
- **Hawgallada Daryeelka Caafimaadka.** Waxaa laga yaabaa inaanu kuu soo jeedino barnaamij maamul cudur ama wacnaan. Waxaa laga yaabaa inaanu darasno xogta si aan u horumarino adeegyadayada.
- **Si Aan Kuugu Sheegno Barnaamijyada ama Sheyada Caafimaadka.** Waxaa laga yaabaa inaan kuu sheegno daawooyin kale, sheyo, iyo adeegyo kale. Hawlahani waxaa laga yaabaa inuu sharcigu xaddido.
- **Kafaalo-qaadayaasha Qorshaha.** Waxaa laga yaabaa inaan loo-shaqeeyahaaga siino saajilinta, ka saarka sajilka iyo soo koobka macluumaadka caafimadkaaga (HI). Waxaa laga yaabaa inaan iyaga siino macluumaadka caafimaadka (HI) ee kale haddii ay si habboon u xaddidaan isticmaalkeeda.
- **Ujeeddooyin Dammaanad-qaad.** Waxaa laga yaabaa inaan uruurino, isticmaalno, ama wadaagno macluumaadka caafimaadkaaga si aan u gaarno go'aamada dammaanad qaadka. Uma isticmaali doono macluumaadkaaga hiddaha ee caafimaadka arrimo dammanad ka qaad.
